# Warhixinta Himilooyinka Horumarinta Miliniyaamka Soomaaliya



January 2007

# Warbixinta Himilooyinka Horumarinta Miliniyaamka Soomaaliya

Xuquuqda keydsan © 2007

Hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan Horumarinta (UNDP)
1 UN Plaza, New York, New York, 10017, USA

Dhammaan Xuquuqdu way dhawrsan tahay. Lama ogola qayb ka mid ah daabacaddan in dib loo adeegsado ama lagu keysado qalabka Aaladda Kubiyuutarka ama loo gudbiyo Agabkan Qaabkasta ee noocyada; Makaaniyakada, Elektroonigga, Sawirrada ama la duubto cod ahaan iyadoo aan wax oggolaansho ah loo helin.

Haddii nuqullo dheeraad ah loo baahdo fadlan kala soo xiriir:
United Nations Development Programme, Somalia
Springette House
Spring Valley, off Kabete Road
Tel.(254-20)4255000
Fax:(254-20)4183641
P.O. Box 28832
00200 Nairobi
Kenya
E-mail: registry.so@undp.org
http://www.so.undp.org

Waxaa daabacday: Waaxda Adeegyada Madbacadda UNON Nairobi

# Mahad-Naq

Warbixintani waa tii ugu horreysay ee Himilooyinka Horumarinta Millennium-ka ee Soomaaliya, taas oo ah natiijadii dadaalka wadajirka ah ee ay fuliyeen Hay'daha hawl-gallada ee heer qaran iyo Beesha caalamka iyo la wadaagayaasha dhinaca horumarinta .Warbixintan waxaa Agaasimay iskuna duba-riday hay'adda Horumainta Barnaamijyada Qaramada Midoobay (UNDP). Waxaana si hufan gacan uga gaystay Guddiga gaarka ah ee loo xilsaaray ee Hay'adaha Qaramada Midoobay (Q.M) oo hawlgalladaas taabbageliyey.

Warbixintan waxaa diyaarinteeda dusha kala socday, islamarkaana talooyinka xiriirinta farsamo ka bixinayey Dr. KNS Nair (UNDP) iyadoo uu ka caawiyey Abdullahi Sheikh Ali, xiriiriyaha HHM ee Heer Qaran) isagoo abaabulay Daraasado waaxeedyo dhawr ah, aqoon-is-weydaarsiyo, iyo dulmar akhris ah oo lagu sameeyey qaybo kala duwan oo Soomaaliya ka tirsan, taas oo qayb wayn ka qaadatay taabbagalinta soo saarista Qoraalka warbixintan. Warbixintan waxaa kaloo dib-u-eegay Mudane Hussein Elabe Fahiye, Wasiirka Qorshaynta Dawladda Federaalka Ku-meel-gaarka ah iyo sii hayaha Agaasinka Guud ee isla wasaaradda Nur Weheliye. Sidoo kale waxaa talo ka dhiibtay Mudane Abdi Salad Ali, Wasiirka Qorshaynta iyo Xiriirka Caalamiga ah ee Dawlad Goboleedka Puntland iyo Abdinasir Warsame, Agaasimaha Guud ee isla Wasaaraddaas. Dad fara badan oo ka tirsan xeel-dheerayaasha xirfadleyda Soomaaliyeed ayaa iyaguna gacan ka gaystay diyaarinta warbixintan oo iyagu noqday shakhsiyaadka la tixraacayo. Kuwaasna waxaa ka mid ah: Halima Abdi Sheikh, Mariam Mohamoud Ga'al, Professor Hussein Tohow Farah, Jeylani Abdullahi Osman, Dr. Mohamed Mohamud, Dr. Abdikarim Asayr Ali, Marian Abdulle Qawane, Professor A. H. Shirwa, Farah Sheikh Abdulkadir, Dr. Qasim Hersi Farah, Hussein Elmi Gure, Abdirahman Mohamed, Professor Suleyman A. Gulaid, Safiya Haji Abubakar, Dr. Ismail Adam Abdillahi, Dr. Nimo H. Abubakar, Dr. Abdi Ismael Houssein, Engineer Ali Abdi Odowa, Dr. Khadra O. Hadrawi oo dhammaantood wax weyn ku biiriyey warbixintan.

Sidoo kale, waxaa gacan muhiim ah ka gaystay Akedeemiyada Nabadda iyo Horumarinta Nabadda ee (Hargeisa), Abdurahman Osman-Shuke (Xarunta Cilmi-baarista iyo Horumarinta ee Garowe), Jabril I. Abdulle (Xarunta Cilmi-baarista iyo Horumarinta Muqdisho),

Qoraalka hindisaha hore wuxuu ku salaysnaa dhinaca farsamada dib-u-eegista Hay'adaha hawlgallada wadajirka wadaaga iyo dib-u-xaaqiinta ama u habaynta qaar ka mid ah qaababka qoraalka. Shakhsiyaad iyo hay'ado kale oo fara badan ayaa iyana gacan ka gaystay, iskamarkaana mudan in lagu xuso mahad-naq kaalintooda mudnaanta leh oo ay ka mid yihiin; UNICEF-Marcus Betts, UNICEF-Mira Ihalainen, UNICEF-Christy Dow Murray, UNICEF-Noel Ibehuzar, UNICEF-Christine Muthee, UNICEF-Robert Kihara; UNIFEM-Hendrica Okondo; WHO-Dr Daher Aden; UNESCO-Ted Groenewegen and Devadoss Mudiappaswammy; Horn Relief-Degan Ali; FSAU-Cindy Holleman; ILO-Angela Kabiru; UNDP- Eric Overvest, Carsten Harnsen, Sandra Macharia, Moe Hussein ,Wiston Mathu, Yussuf Gumma, Tom Munyasia, Laila Shamji and Femi Terry; Alex Alusa (UNEP), UNHABITAT-Filiep Decorte; EU-Dr. Friedrich Mahler. Zena Ali-Ahmed iyo Adib Nehmeh (SURF-AS, UNDP) oo dib-u-eegay warbixinta qoraalka asalka ah. Namita Mediratta (WHO) iyo Alexandra Williams oo tafaftiray, Khalif Farah (UNDP) iyo Yassin Isse Wardere oo gacan weyn ka gaystay dhinaca tarjumidda iyo sixitaanka Af-ka Soomaaliga. Sidoo kale, Richard Ng'etich, Felix Mulama, Mariam Alwi iyo Seroni Anyona ee hay'adda UNDP oo dhammaantood taageero lixaad leh ka gaystay hawlgallada la xiriira soo saarista warbixintan.

**Bruno Lemarquis**
**Agaasimaha heer Qaran**
**ee UNDP Soomaaliya**

# Arar

Laga soo bilaabo Sannadihii 1980-maadkiii,waxaa Dalka Soomaaliya ka dhacay degenaansho la'aan siyaasadeed oo dalka iyo dadweynahaba saamayn ku yeelatay. Ilaa intii dagaallada sokeeye iyo burburkii xukumadii Soomaliya ay dheceen sannadkii 1991kii, dhammaan haykalkii hay'adaha siyaasadda, dhaqaale iyo bulsho way dumeen,iyadoo ay dalkii dhaxalsiisay burbur, islamarkaana waxaa soo food-saartay xaalad qalafasan iyo rajo xumo quusasho leh. Dalkiina waxa soo foodsaartay xaaalado degennaansho la'aan siyaasadeed, taasoo ay si weyn u saamaysay jawi ciidammo hubaysan oo qabaa'il ku salaysan. Culaysyada ugu waaweyn ee waqtiyadii la soo dhaafay saameeyey dalka Somaaliya waxaa ka mid ahaa xasilooni-darrida iyo nabadgelyo la'aanta ka jirtay, taas oo dalka u horseeday in muwaadiniinta ay dhaxalsiiso saboolinimo lixaad leh iyo gaajo, iyagoo la kulmay khatar dhinaca caafimaadka ah iyo sidii ay ku heli lahayeen waxbarasho tayo leh,islamarkaana ay garda-duubtay ama aysan fursad u helin ilaha dhaqaalaha iyo taag-darro kala soo gudboonaatay sidii ay u taabbagalin lahaayeen heerka nolosha asaasiga ah, iyadoo labo jiil oo bulshada ka mid ah ay ka luntay fursadihii waxbarashada rasmiga ah ee dugsiga ay ku biiri lahaayeen .

Kaddib shirweynihii caalamiga ahaa ee Sannadkii 2000, baaqii caalamiga aha ee Himilooyinka Horumarinta Millennium-ka (MDGs) ee waddamada xubnaha ka ah QM wuxuu bartimaameedkoodu ahaa in la isku-xidho hawlgallada lana xoojiyo Yoolasha ajendada heer caalami ee ku wejahan horumarinta dunida.

Iyadoo ay intaas weheliyeen kulamo heer gobol iyo kuwo heer caalmi ahaa, shirarka Qaramada Midoobay, hay'adaha dhinaca iskaashiga horumarinta dhaqaalaha, Bangiga Adduunka iyo Hay'adda Lacagta Adduunka(IMF), kuwaas oo diiradda saaray tallaabooyinka lagu tabagalin karo Aejndada caalamiga ah ee la xiriirta, kuwaas oo loo sii marayo yoolasha, bartilaameedyada iyo tilmaamayaasha dhab ahaantii ay ku qotomaan HHM.

Golaha loo dhan yahay ee QM waxay damaanad siinayaan Xoghayaha Guud iyo nidaamka QM hawlgallo ay ku taageerayaan Dawlaha Qarameed si ay ku meel-mariyaan Baaqa Yoolasha, iyagoo dhiirigelinaya ka qaybgalka hay'adaha la wadagayaasha hawlgallada oo ay ka mid yihiin; waaxda gaarka ah iyo bulshada rayidka ah sidii ay ugu guulaysan lahaayeen HHM.

Tani waa warbixintii ugu horraysay ee dalka Soomaaliya ee la xiriirta HHM-ka, si kastaba ha ahaatee, tani waxay xaqiijinaysaa sida ay dalka uga go'an tahay ama la iskugu taxaluujiyey dadaalka la xiriira yaraynta ama hoos u dhigista saboolnimada iyo mudnaansiinta horumarka laga saamayn karo hawlgallada ku aadan ku guulaysiga bartilmaameedyada heer caalamiga ah ee lagu xusay HHM-ka- kuwaas oo ay ka mid yihiin; dib-u-soo-celinta dadka bara-kacay, ababul-ka saarka Maleeshiyooyinkii hore e dagaalka oo dhaqan-celin lagu samaynayo. dhanka kale, Laga soo bilabo 2004, waxaa loo hawlgay dib-udhiska Hay'adaha Dawladda Federaalka ku-meel-gaark ah, iyadoo lagu hawllan yahay tallaabooyin la xiriira dib-u-soo-kabashada dhaqaalaha, sharciga iyo kala dambaynta iyo kaabayaasha dhaqaalaha dalka.

Weli, caqabado fara badan ayaa jira oo u baahan in laga gudbo. Xogta ay warbixintani xambaarsan tahay,ayaa waxaa lala xiriirin karaa iyadoo xogta la heli karaa ay tahay mid xaddidan.Warbixin –waaxeedyada ee mid kasta oo la xiriirta tilmaamayaasha HHM-ka waxaa diyaariyey ama laga helay aqoonyahannada dalka u dhashay, taas oo noqotay isha rasmiga ah ee loo kaashaday ama suuragalisay dhammaaystirka warbixintan iyada ah. Ilaa 2004 Xogta la heli karo ee ku wajahan Tilmaamayaasha HHM-ka min ilo kala duwan oo dib-u-eegis lagu sameeyey sidii ay ku noqon lahayd xog gaar ah oo ku qotonta tayo iyo xeel-dheeri buuxda.


Warbixintani,waxay soo bandhigaysaa xaaladaha jira ee dhinacyada fursadaha xilligan la heli karo iyo caqabadaha hortaagan meel-marinta HHM-ka, kuwaas oo tilmaamo ka bixinaya arrimaha suuragalka ah ee lagu gaari karo inay waddada u sii xaaraan horumar taam ah.Waxay kaloo soo bandhigaysaa waqtiga ku habboon ee maalgelinta, celcelisyada, hawlgallallada lagama maarmaanka ah iyo hoggaaminta Soomaaliya oo ay ka wada qaybgalaan dhinacyada kala duwan ee Bulshada - dhismaha heer qaran, maamullada heer gobol, aqoonyahannada, Hay'adaha an dawliga ahayn (NGOs), Haweenka iyo kooxaha dhallinyarada iyo waaxda gaarka ah- kuwaas oo ay gacn siinayaan hay'adaha gargaarka caalamiga ah iyo kooxda QM ee dalka Soomaaliya. Waxayna warbixintani si dhab ah u tilmamaysaa hawlgallada wadajirka ah ee lagu meel marinayo horumarinta HHM-ka.

Qaab-hawledyada Horumarinta iyo Dib-u-dhiska oo imminka hawlgalladoodu ay soconayaan, kaddib markii ay wadajir ahaan u meel-mariyeen daraasadaha baahida wadajirka ah oo ay fuliyeen aqoonyahanno soomaali iyo heer caalami isugu jiray oo lagu taabbagalinayo qorshayaasha dib-u-soo-kabashada iyo horumarinta Soomaaliya.

Waxaan aad ugu han-weynahay, kuna kalsoonnahay in taageero wax ku ool ah oo dhinacyada maaliyadeed iyo farsamo oo loo fidiyo Soomaaliya, ay dar-dar gelin doonto horuamrka ku wejahan sidii looga dhabayn lahaa Himilooyinka Horumarinta Millenium-ka.



**Ali Mohamed Gedi**
**Ra'iisul Wasaaraha**
**Dawladda Federaalka Ku-Meel -Gaarka ah**
**Soomaaliya**



**Eric Laroche**
**Xiriiriyaha Gargaarka Bini'aaminimada Q.M**
**Ahna Madaxa Hay'adda UNDP Soomaaliya**

# Tusmada Buugga


Gogol-Dhig 1

Macnaynta Xarfo la soo gaabiyay 4

Soomaaliya: Xaaladda Horumarinta ee Jirta 6

MDGs iyo Xaaladda Soomaaliya 9

Himilada 1aad: In La Ciribtiro Saboolnimada iyo Gaajada 17-24

Bartilmaameedka 1aad: In inta u dhaxaysa 1990 iyo 2015-ta la dhimo kala bar tirada dadka dakhligoodu ka hooseeyo 1 doolar maalintii

Xaaladdu Sida ay Tahay iyo Isbedellada Socda

Saboolnimo

Waxyaabaha Taabbagalay

Caqabadaha

Talooyin

Bartilmaameedka 2aad: In Inta u Dhaxaysa 1990-Ka iyo 2015-Ka la Dhimo Xaddiga Dadka ay Gaajadu Hayso

Nafaqada

Waxyaabaha Taabbagalay

Caqabadaha

Talooyin

Himilada 2aad: In la Xaqiijiyo in Waxbarashada Asaasiga ah Wada Gaarto Caalamka 25-30

Bartilmaameedka 3aad: Ina La Hubiyo In Sannadka 2015-Ka Ay Dhammaan Carruurtu, Gabdho Iyo Wiilalba , Meelkastoo Ay Joogaanba, Ay Awood U Heleen Inay Si Buuxda U Dhammaystirtaan Waxbarashada Asaasiga Ah

Xaaladda Jirta iyo Isbedellada Socda

Tirada Guud ee Diiwaangelinta Waxbarashada Asaasiga ah

Qiyaasta Ardada Gaarta Fasalka 5aad

Heerka Wax Qorida Iyo Wax Akhrinta Ragga Iyo Dumarka (15 Sano Iyo Wixii Ka Sarreeya)

Waxyaabaha Taabbagalay

Caqabadaha

Talooyin

Himilada 3aad: In Kor Loo Qaado Sinnaanta JinsigaDumarkana Awood La Siiyo 31-36

Bartilmaameedka 4aad: In Meesha Laga Saaro Farqiga u Dhexeeya Labka Iyo Dhedigga ee ka jira Waxbarashada Asaasiga Iyo Tan Dugsiyada Sare Sida Haboon Sannadka 2005 iyo Heer Kasta Haddii La Awoodo Sannadka 2015-Ka

Xaaladda Jirta iyo Isbedellada Socda
Saamiga Gabdhaha Iyo Wiilasha Hela Waxbarashada Asaasiga Ah, Tan Sare Iyo
Mid Jaamacadeed
Tirada Wax Qorta Waxna Akhrisa Marka La Isu Fiiriyo Dhedig iyo Lab (15 sano iyo wixii ka sarreeya)
Saamiga Haweenka ka Helaan Shaqooyinka Mushaarka Bixiya
Ka Qaybgalka Baarlamaanka
Waxyaabaha Taabbagalay
Caqabadaha
Talooyin

Himilada 4aad: In la Yareeyo Dhimashada Dhallaanka 37-40

Bartilmaameedka 5aad: In Saddex Meelood Laba Meel La Dhimo Tirada Dhimashada Carruurta Da'doodu Ka Hooseysa 5 Sano

Xaaladda Jirta iyo Isbedellada Socda
Dhimashada Dhallaanka
Tallaalka Jadeecada ee Carruurta 1 sano jirka
Waxyaabaha Taabbagalay
Caqabadaha
Talooyin

Himilada 5aad: In la Yareeyo Dhimashada Dhallaanka 41-44

Bartilmaameedka 6aad: In Saddex Meelood Laba Meel La Dhimo Tirada Dhimashada Carruurta Da'doodu Ka Hooseysa 5 Sano

Xaaladda Jirta iyo Isbedellada Socda
Waxyaabaha Taabbagalay
Caqabadaha
Talooyin

Himilada 6aad: In lala Dagaalamo, HIV/AIDS-ka, Duumada iyo Cudurrada Kale 45-50

Bartilmaameedka 7aad: In la hakiyo lana xakameeyo faafidda Cudurka HIV/AIDS-ka Sannadka 2015-ka

Xaaladda HIV/AIDS-ka Soomaaliya
Dulmarka guud ee Jaweeb-celinta Soomaaliya
Waxyaabaha Taabbagalay
Taag-darrida
Caqabadaha
Talooyin

Bartilmaameedka 8a:In la joojiyo lana xakameeyo faafidda cudurka duumada sannadka 2015

Xaaladda jirta iyo Isbedellada Socda

Waxyaabaha Taabbagalay

Caqabadaha

Talooyin

Bartilmaameedka 8a: In la hakiyo lana xakameeyo faafidda cudurka qaaxada sannadka 2015-ka

Xaaladda Jirta Iyo Sida Wax u Socdaan

Waxyaabaha Taabbagalay

Caqabadaha

Talooyin

Himilada 7aad: In la Hubiyo Waaritaanka Deegaanka lana Dhaqaaleeyo 51-58

Bartilmaameedka 9aad: In Siyaasadda Wadanka iyo Barnaamijyadiisa lagu daro Mabaadi'da Dhawridda Deegaanka iyo in la Xakameeyo Khasaaraha Khayraadka Deegaanka

Xaaladda Jirta iyo Isbedellada Socda

Xaalufinta iyo Geedo Jaridda

Aagga Badaha

Magaalowga

Culayska Daaqsinta Iyo Qodashada

Waxyaabaha Taabbagalay

Caqabadaha

Talooyin

Bartilmaameedka 10-aad: In Sannadka 2015 la Dhimo Kala Bar Dadka Aan Si Joogta Ah U Helin Biyo la Cabb oo Nadiif ah iyo Faya-dhawr

Helidda Biyo Nadiif ah

Baahida Faya-dhawr ee Asaasiga ah

Talooyin

Bartilmaameedka 11-aad: In la Xaqiijiyo Sannadka 2002 in Horumar Weyn la Gaarsiiyo Nolosha Ugu Yaraan 100 Milyan oo ah Dadka ku Nool Xaafadaha Saboolka ee Isku- Raranta

Xaafadaha Saboolka ee Isku - Raranta

Sugnaanta Dhulka

Caqabadaha

Talooyin

Himilada 8aad: Dhisidda Isbahaysiga Horumarinta 59-66

Bartilmaameedka 12-aad In la sii Horumariyo Ganacsi iyo Nidaam Lacageed oo Furan Sharci ku Dhisan, la saadaalin karo oo aan Takoorid ku Dhisnayn

Xaaladda Jirta Iyo Sida Wax u Socda

Bartilmaameedka 13-aad: In la soo bandhigo Baahida Gaarka ah ee Waddamada Ugu Horumarka liita Ganacsiga iyo Nidaamka Maaliyadda

Bartilmaameedka 14-aad In la soo Bandhigo baahida gaarka ah ee Waddamada aan Badaha lahayn iyo Jasiiradaha yar-yar ee Waddamada soo koraya

Lama Hayo/Xilligan kuma Habboona

Bartilmaameedka 15-aad: In si Dhamaystiran Wax Looga Qabto Dhibaatada Deymaha Wadamada soo Koraya Iyadoo la Qaadayo Tallaabooyin Caalami Ah Iyo Kuwa Qaran si ay Muddada Fog Deyn Xamili Karaan ama u Heli Karaan

Soomaaliya Deynta Dibadda Looga Leeyahay

Bartilmaameedka 16-aad: In Iyadoo Lala Kaashanayo Waddamada Soo Koraya, La Dejiyo Lana Meel Mariyo Istiraatijiyado Shaqooyin Fiican Oo Wax Soo Saar Leh Loogu Abuurayo Dhallinyarada

Xaaladda Shaqo ee Dhallinyarada

Bartilmaameedka 17-aad: In iyadoo la Kaashanayo Shirkadaha Daawada Sameeya loo Sahlo W adamada soo Karaya inay ku Helaan Daawooyinka Daruuriga ah Qiimo ay Awoodi Karaan

Helitaanka Daawooyinka Asaasiga Ah

Bartilmaameedka 18-aad In iyadoo lala Kaashanayo Qayabaha Gaarka loo Leeyahay, in Faa'iidada Tiknoolajiyada Casriga ah, Gaar Ahaan Macluumaadka iyo Isgaarsiinta Laga Dhigo Mid la Heli Karo

Macluumaadka iyo Isgaarsiinta

Jawiga Fududeynaya Qaab-hawleedyada iskaashiga

Waxqabadka

Caqabadaha

Talooyin

Lifaaq 1aad: Sahanka Nafaqada Soomaaliya (1991 - 2003) 67

Lifaaq 2aad: Kala Duwanaanshaha Gobollada ee Wiilasha iyo Gabdhaha ee D/ Hoose-Dhexe 68

Lifaaq 3aad: Kartida Qaran iyo Goboleed ee la Socoshada iyo ka Warbixinta Horumarka HHM-ka 69

Eray-Bixin 70

Tixraacyada 72

## Santuukhyada


| | | |
|---|---|---|
| Santuukha 1:1 | Himilooyinka Horumarinta Miliniyaamka | 3 |
| Santuukha 1:2 | HHM iyo Xaaladda Colaadeed iyo Deganaansho La'aanta Soomaaliya | 8 |
| Santuukha 2:1 | Labada jiil ee Khasaartay | 28 |
| Santuukha 3:1 | Wax qorista iyo Akhrinta Haweenka | 33 |
| Santuukha 4:1 | Xannaanada Hooyadu waa Wannaanada cunygga | 39 |
| Santuukha 4:2 | Dabaysha | 40 |
| Santuukha 5:1 | Gudniinka Dumarka | 43 |
| Santuukha 6.1 | Ballan-qaadka Afrika ee 2015 | 48 |
| Santuukha 7:1 | Dhibaatooyinka Deegaanka ee ugu Waaweyn | 53 |
| Santuukha 7:2 | Biyo La'aanta | 55 |
| Santuukha 7:3 | Saameynta Abaarta | 56 |
| Santuukha 8:1 | Xaqiijinta HHM | 62 |
| Santuukha 8:2 | Shaqaalaynta Dhallinyarada | 63 |


## Jaantusyada


| | | |
|---|---|---|
| Jaantuska A: | Sida Dakhli Helidda Farqiga Loogu Kala Duwanyahay Gobollada ($) | 9 |
| Jaantuska 1:1 | Saamiga Dadka Hela Wax Ka Yar 1 Doolar Maalintii | 20 |
| Jaantuska 1: 2 | Saamiga Dadka Hela Wax Ka Yar 1$ iyo 2$ Doolar Maalintii | 20 |
| Jaantuska 1: 3 | Boqolkiiba Dadka Cuna Cunto Leh Wax'Ka Yar Tamartii Jirku u Baahnaa (1,600 Kcal/ Maalintiiba) | 22 |
| Jaantuska 2:1 | Tirada Guud ee Ardayda D/Hoose Ka Diiwaangashan | 27 |
| Jaantuska 2:2 | Inta Waxbarashada Asaasiga ah aada Aag Kasta | 27 |
| Jaantuska 2:3 | Isku-dheelitirka Hannaanka Dhammaystirka waxbarashada Wiilasha iyo Gabdhaha 1997 | 28 |
| Jaantuska 2:4 | Qiyaasta waxbarashada dadka waaweyn(15 sano ka sarreysa) | 28 |
| Jaantuska 3:1 | Qiyaasta waxbarashada dadka waaweyn eed heddig | 34 |
| Jaantuska 3: 2 | Ka qeybgalka haweenka shaqada aan beeraha ahayn 2002 | 34 |
| Jaantuska 4:1 | Saamiga Dhimashada ilmaha 5ta sano ka yar | 39 |
| Jaantuska 5:1 | Qiyaasta Dhimashada hooyada/100,000 ee nolol Ku dhasha | 43 |
| Jaantuska 7:1 | Boqolkiiba Dadka Fursad u hela Inay Ka Cabbaan Ilo Biyo Nadiif ah | 56 |
| Jaantuska 7:2 | Boqolkii dadka nadaafadda ku nool | 56 |
| Jaantuska 8:1 | Goobaha mudnaanta u ah kaalmada deeq bixiyayaasha sannadka 2003 | 61 |
| Jaantuska 8:2 | Kaalmada dibadda ee Sannadka2000-2003 (Qiyaasta Milyan Doolar) | 62 |
| Jaantuska 8:3 | Kaalmada waddamadu toos u bixiyaan oo doolar ah 2000 ilaa 2003 (Qiyaasta Milyan Doolar) | 62 |

## SHAXDA


| | | |
|---|---|---|
| Shaxda A | Halbeegyada asaasiga ah ee bulsho–dhaqaale Soomaaliya | 10 |
| Shaxda B: | Sooaaliya ma xaqiijin kartaa HHM-ka ? | 11 |
| Shaxda 1:1 | Milicsiga Xaaladda Dakhliga iyo Saboolnimada Soomaaliya | 18 |
| Shaxda 1:2 | Milicsiga Xaaladda Gaajada Soomaaliya | 22 |
| Shaxda 2:1 | Milicsiga Xaaladda Waxbarashada Somaaliya | 26 |
| Shaxda 3:1 | Milicsiga Xaaladda Jinsiga Soomaaliya | 32 |
| Shaxda 4:1 | Milicsiga Xaaladda Badbaadada Dhallaanka Soomaaliya | 38 |
| Shaxda 5:1 | Milicsiga Xaaladda Caafimaadka Hooyada Soomaaliya | 42 |
| Shaxda 6:1 | Milicsiga Xaaladda Dulinka HIV/AIDS-ka Soomaaliya | 46 |
| Shaxda 6:2 | Milicsiga Xaaladda Duumada Soomaaliya | 49 |
| Shaxda 6:3 | Milicsiga Xaaladda Qaaxada Soomaaliya | 50 |
| Shaxda 7:1 | Milicsiga Xaaladda Deegaanka Soomaliya | 52 |
| Shaxda 7:2 | Milicsiga Xaaladda Xaafadaha isku-raranta Soomaaliya | 57 |
| Shaxda 8.1 | Milicsiga Xaaladda Helitaanka Dawooyin Soomaaliya | 64 |
| Shaxda 8:2 | Milicsiga Xaaladda Macluumaad Helidda iyo Is-gaarsiinta Soomaaliya | 65 |

# Gogol-Dhig

Ka dib dhismihii Hay'adaha Federaalka Ku-meel-gaarka ah (TFIs) ee 2004-2005, ma ahayn oo keliya horumar laga gaadhay dhinaca nabadgelyada iyo xasiloonida ee guud ahaan dalka, balse waxay u gogol-xaadhay yiddidiilo wanaagsan iyo rajo inay ku sameysanto Dawlad dhexe taas oo xanbaarsan fursado dhaqaale iyo dib-u-dhiska hay'adaha siyaasiga ah ee dalka; kuwaas oo lama huraan u ah in la xaqiijiyo Himilooyinka Horumarinta Miliniyaamka(HHM).

Laga soo bilaabo markii dagaalku dhacay iyo burburka Dawladii Soomaaliyeed, Soomaaliya waxay ku jirtay xaalad nidaam la'aan iyo deganaansho la'aan siyaasadeed. Hay'adihii siyaasadda, dhaqaalaha iyo bulshadu way dumeen taas oo keentay burbur maamul iyo jawi siyaadeed oo 13-kii sano ee la soo dhaafay aan degenayn kuna sifoobay colaad iyo mid milateri oo aad u sarreysa. Waddanku wuxuu ka kooban yahay 18 gobol wuxuuna u kala qaybsamay saddex maamul; Jamhuuriyadda Somaliland waxaa laga sameeyay Waqooyi-Galbeed 1991-kii; Dawlad-Goboleedka Puntland ee Soomaaliya waxaa laga sameeyay Waqooyi-Bari 1998-kii; Dawladda Ku-Meel Gaarka ah waxaa la sameeyay 2004 waxayna ka hawlgashay Koofurta iyo Bartamaha Soomaaliya. Xasilooni iyo nabadgelyo ayaa ka jirta gobollada waqooyi marka loo eego qaybaha kale ee waddanka, hase ahaatee colaado hubaysan ayaa weli ka sii socda inta badan gobollada Koofurta iyo Bartamaha waddanka.

Ka dib shirkii dib- u- heshiisiinta qaran ee ka dhacay Kenya 2002-2004, waxaa jiray yiddidiilo wanaagsan iyo rajo inay sameysanto Dawlad dhexe taas oo xanbaarsan rajo nabadeed iyo xasilooni; kuwaas oo lama huraan u ah in la xaqiijiyo Himilooyinka Horumarinta Miliniyaamka.

Caqabadda ugu weyn ee xilligii la soo dhaafay Soomaaliya hortaagnayd waxay ahayd ammaan la'aanta taas oo waddanka iyo dadkiisaba aafaysay. Natiijada ka dhalatay taasina waxay noqotay fursadaha khayraadka dhaqaale oo yaraada, kala filiqsanaan bulsho, siyaasadeed iyo dhaqaale oo waddanka ku dhacay taas oo yareysay awoodii wax soo saar ee dhaqalaha iyo fursadaha dadka colaadu saameysaay ay ku heli karaan nolol joogto ah. Saboolnimada, khatarta caafimaad, helidda waxbarasho, dakhli iyo nolol joogto ah oo yar awgeed waxay hor istaagtay in la gaaro himilooyinka HHM-ka.

Hase yeeshee, inkastoo ay jiraan dhibaatooyin hortaagan dib u dhisidda hannaankii bulsho-dhaqaale, haddana dadaallo rajo leh oo dib loogu dhisayo awoodda hay'adaha Dawladda, laguna soo celinayo qaanuunkii iyo kala dambayntii, dibna loogu dayactirayo kaabayaashii sida xarumaha caafimaadka, dugsiyadii iyo isgaarsiinta ayaa socda. Horumar ayaa laga gaaray sidii dadka barakacay dib loogu dejin lahaa, loo kala diri lahaa dadka horay u dagaalami jirey bulshadana dib loogu celi lahaa.

Weli waxa jira caqabado waaweyn oo na horyaal. Wax in yar ka yar kala bar dadka Soomaaliyeed waxay ku noolyihiin saboolnimo daran awoodooda wax gadashana way ka yartahay 1 doolar maalintii; saddex meelood laba meelood waxay ku jiraan saboolnimo guud waxaana soo gala wax ka yar 2 doolar. Qiyaastii nus ka mid ah dadweynuhu waxay ku nool yihiin in ka hoosaysa xadka ugu yar ee tamarta ay ku badbaadi karaan (1,600 Kcal/maalintii).

Marka la fiiriyo awooddooda wax gadashada. In ka badan kala bar dadku waxay ku noolyihiin cunto leh wax ka yar tamartii jirkoodu u baahnaa. Waxaa jira ku dhawaad 400,000 qof oo ah qiyaas u dhiganta 7% tirada guud ee dadka Soomalida ee waddanka gudihiisa ku barakacay kuwaas oo ku nool saboolnimo argagax leh iyadoo intooda badan yihiin dumar iyo carruur, kuwaas oo ah kooxaha kuwa ugu nugul bulshada, kuwaaas oo loo adeegsado shaqooyinka jaban si ay nolol uga helaan.

Deeganka oo keliya ma ahan meelaha uu dagaalka sokeeye iyo xasilooni darridu ay saamaysay in ka badan shan iyo tobankii sano ee la soo dhaafay, hase yeeshee, waxay saamyn ku yeesheen khayraadka kale ee dabiiciga ah iyo waxyeelada uu bini'aadmigu abuuray sida; abaaraha, daadadka iyo tsunami- iyadoo ay barbar socdaan miinada dhulka, iyo xayiraaddii Boqortooyada Sucuudigu ku soo rogtay Xoolaha nool ilaa 1999kii. Cabsi xad dhaaf ah ayaa ka soo fooleh khatarta ka iman karta waxyaabaha aan weli qarxin ee dhulka ku aasan oo halis weyn ku haya dhaqdhaqaaqa iyo nolosha dadweynaha.

Waxaa iyana dhibaato jirta ah helitaanka waxbarashada asaasiga ah iyo midda far qorid iyo akhrinta, taas oo lagu qiyaaso (19.2%) oo u dhiganta shan meelood hal meel heeraqoonta, iyadoo ay xaddidan yihiin fursadaha waxabarashada asaasiga ah. Soomaaliya waxay ku jirtaa heerka adduunka ugu hooseeya

xagga ardada tagta dugsiyda hoose, waxana lagu qiyasaa ilaa (18.8). Waxaa iyaduna jirta in hal milyan iyo bar dhallinyaro ahi gefeen fursado waxbarasho tobankii sano ee la soo dhaafay kuwaas oo lagu tilmaamo 'Jiilka dayacmay'. Caruur badan ma awoodaan in ay dugsiyada asaasiga ah tagaan maadama aysan gaari karin ama aysan awoodin qiimaha waxbarashada oo sarreeya, iyada oo in ka yar shan meelood meel ay dadka Soomaaliyeed wax akhrin karaan qorina karaan.

Farqiga u dhexeeya labka iyo dheddiga xagga helidda waxbarashadu waa iska muuqdaa. Waxbarashada hoose, dugsiyada sare iyo jaamacadaha intaba wiilasha ayaa uga badan gabdhaha, waxaana la ogodaay heerka ka haridda waxbarashada ee gabdhuhu in uu aad u sarreeyo. Ka qaybgalka haweenka ee baarlamaanku aad ayuu u hooseeya in kasta oo dhawaanahan guul la gaaray oo Axdiga Federaalka ee Soomaliya ka siiyay haweenka qoondo dhan 12% hay'adaha qaranka iyo 25% maamulada gobollada.

Heerka Dhimashada hooyada ee Soomaaliya wuxuu weli ka mid yahay meelaha ugu sarreeya dunida, iyadoo heerka dhimashada hooyada uurka leh ay gaarsiisan tahay 1600 marka loo eego 100,000 haween ah ee umulaya. Haweenku waa qaybta ugu badan bulshada ee aan waxna akhrin waxna qorin taas oo yareynaysa helitaanka ay heli karaan macluumaad ay isticmaalan si ay u qaataan go'aanno ay caafimaadka naftooda ku hagaajiyaan. Waxay kaloo tani sii kordhinaysaa xaddiga dhimashada caruurta iyo dhallaanka ka yar 5-sano waddanka

oo dhan. Ma jiro adeeg caafimaad oo ballaaran marka laga reebo bukaan socod eegtooyin ay sameysteen bulshadu iyo goobo cafimaad oo gaar loo leeyahay kuwaas oo aysan inta badan dadka saboolka ahi kari karayn. timaaddo takoorid.

Shubanka, fuuqbaxa, neef-qabatowga iyo Duumadu waxay ka mid yihiin; cudurrada ugu badan ee dila in ka badan nus ahan carruurta dhimata. Run ahantii way xaddidan yihiin adeegyada caafimaadka, iyadoo goobaha bukaan eegtooyinka ay sameeyeen dadweynah oo iskood isku xilsaaray meelaha qaarkood, kuwaas oo inta badan ka horjoogsanaya ruuxa saboolka ah helitaanka adeegyadaas maadama uusan awoodin kharajka caafimaadka laga qaado. Arrintani wxay xoogga saaraysaa goobaha magaaloyinka iyo nawaaxigooda- warbixin ay hay'adda Caafimaadka Adduunka ee (WHO) ka diyaarisay waqooyiga Soomaaliya, taas oo sheegaysa in hal isbitaal oo ka mid ah tobonkii isbitaal uu si fiican u shaqeeyo.

Colaadda iyoAbaaruhu wxay waxyeelo lixaad leh u gaysteen deegaanka- taas oo Soomalida u horseeday inay ku dagaalaman khayraadka muhiimka ah, islamarkaana ay xaalufiyeen dhirtii iyo daboolkii keymiha. Tusaale ahan, 2004, intii lagu guda jiray abaartii muddada afarta sano ahayd, qaar badan oo xoolo-dhaqatada ka mid ah aya jaray dhir fara badan iyagoo dhuxul ka gubay, si ay dhaqaale ama dakhli uga helaan. falalka noocaan oo kale ah ayaa horseedi kara dhibaatooyin deegaanka la soo gudboonaada islamarkaana saamayn ku yeelan doona heer-nololeedkooda.

La'aanta biyo nadiif ah oo la cabbo ayaa ka mid ah hadimooyinka ugu waaweyn ee sababa dhimashada carruurt. iyadoo afar meelood meel ahaan ay heli karaan fursadaha biyo nadiif ah oo la cabbo. arrimahaasna waxaa sabab u ah, burburka la soo gyudboonaaday nidaamkii biyio-gelinta xilliga dagaallada sokeeye ay socdeen, iyadoo nabadgalyo darrida baahday ay horseeday dayactir la'aanta adeegyadaas. Xaaladda biyaha waxaa saamayn ku yeeshay roobabk aan la sii saadaalin karin, ayna sii xumeeyeen abaaraha iyo daadaadka. Tartanka iyo is-hardanka loogu jiro khayraadka wuxuu sii hurinayaa colaadda wuxuuna sii kordhinayaa dhibaatada deegaanka.

In ka yar nus dadweynaha ayaa hela fursado dhinaca faya-dhawrka ah, kuwaas oo labadaraadle u badan Magaalooyinka iyo tuulooyinka waaweyn. Iyadoo aysan jirin goobaha qashinka lagu uruuriyo iyo bacda Balaastikada ah wax lagu rito oo saamayn weyn ku yeeslatay deegaanka magaaloyinka iyo caafaamaadka bulshada.

Fursadaha adegyada asasiga ah iyo suuqgaynta ayaa ah kuwo xaddidan, iyadoo caqabado hor leh ay la soo gudboonaadeen horumarinta dhaqaalaha. Maqnanshaha hay'adaha dawliga ah awgeed, waaxda gaarka ah, ayaa noqotay qayba ugu muhiimsan kororka dhaqaalaha, iyadoo ay dadweynaha maxalliga ah iyo bulshada rayidka ahiba ay buuxiyeen farqigii u dhexeeyey, ayna ka soo if-bexeen hannaanka deegyada guud ee bulshada iyo baahida kale ee asasiga ah. dadaalka noocaas ahina wuxuu xuddun u noqday aaladdii loo kaashan lahaa caqabadaha lagu hor-joogsan karo in 'Soomaaliya aysan jaro lahayn'.

Inkastoo uu burbur qaran iyo dhaqaaleba uu la soo dersay Soomaaliya shan iyo tobankii sano ee la soo dhaafay, haddna, taageerada deeq-bixiyayaasha aya gacan ka gaystay horumarinta ku wejahan Yoolasha Horumarinta Millenium-ka(YHM). qaar ka mid ah Barnaamijyada iyo iyo hawlgallo la xiriira ayaa la meel mariyey, iyadoo fursad loo siiyey inay arday fara badani ay ku biiraan waxbarashada asasiga ah, iyadoo hoos-loo dhigayo heerka dhimashada dhallaanka, lana horumarinayo caafimaadka

hooyada uurka leh, islamarkaana la yaraynayo saboolnimada xad-dhaafka ah iyo gaajada. Goobaha kale, qaar ka mid ah tilmaamayaasha la socoshadu aad bay u liitaan, halka kuwa kalana ay horumar sameeyeen, qaar ka mid ah tilmamayasha ayaan la xisaabinin,taas oo ay sabab u tahay, iyadoo aan xog laga haynin dhinaca tira-koobka (eeg Dulmarka shaxda B-Soomaaliya ma meel-marin kartaa bartilmaameedyada HHM?').

Guud ahaan, Soomaaliya hoos-uma dhigi karto saboolnimada si ay u xaqiijiso HHM-ka hadii aysan sare u qaadin kobcinta dhaqaalaha. hawlgallada dhiirigelinta waxqabadku waa inay xoojiyaan shaqo siinta dadka saboolka ah islamarkaana ay taageero lixaad leh u fidiyaan hantida dhaqalaha asaasiga ah si ay fursad ugu helaan wax soo saarka ama awood ugu helaan iibsashada cuntada iyo waxyaabaha kale ee ay u baahan yihiin.

Dhinaca Beeraha, Xoooolaha iyo kalluumaysigu waxay laf-dhabar u yihiin Dhaqaalaha Soomaaliya, kuwaas oo fursado shaqo ay ka helaan in ka badan seddex-meelood labo meel xoogsatada dalka. Waaxyahani waxay xuddun u noqon karaan istraatiijiyada lagu yarayn karo saboolnimada islamarkaana looga heli lahaa saami ku habboon maaliyadda iyo gargaarka caalamiga ah. Waxaaa kaloo iyana kaalin muhiim ah yeelan karta si loo xaqiijiyo deegaan ku habboon maalgashiga iyo horumarinta, labadaraadle,ganacsiga yar-yar si loo abuuro shaqooyin, sarena loogu qaado dakhliga dadka ugu saboolsan bulshada.

Lacagaha dadka dibadaha ku nooli u soo diraan eheladoodu waa isha ugu weyn ee dakhli ee qoysaska, isla markaana waa muuqaalka ugu weyn korokooda dhaqaalaha tabane yahay xaddi aad u sarreeya ee dhaq-dhaqaaqa dhaqaale ee waddanka ka jira, iyada oo shirkadaha xawilaaduhu kaalin muhiim ah ka ciyaaraan fududeynta gudbinta lacagaha.

Saboolnimada waxay sii korodhay xilligii dagaallada sokeeye iyo xasilooni darridu ka jirtay dalka, mana ahan wax sahlan qorshaha hawlgallada hoos loogu dhigayo saboolnimada, hase yeeshee, waa lagamamaarmaan meelmarinta nabadgalyada dalka iyo gobolkaba. Sida waaya-aragnimadu na barayso, waddamada saboolka ahi waxay u nugul yihiin inay la kulmaan xiisado iyo iska horimaadyo nabadgalyo darro ku salaysan, taasoo waddamaas u horseedi karta saboolnimo aad u ba'an; iyadoo celcelis ahaan lagu tilmaamo boqolkiiba shan in heerka , ayna dagaallada sokeeye sii kordhin karaan khatarta ilaa 50%. intaas waxaa soo raaca, in waddamada ka soo kabanaya xiisadaha colaadeed iyo iska-horimaadyada laga yaabo inay mar kale dib ugu noqdaan colaad haddii aan muddo shan sano ku siman sida ugu dhaqsiyaha badan wax looga qaban xasiloonida dadweynaha iyo sidii loogu abuuri lahaa fursado dakhli dhqaaale oo taabbagal ah.

Marka loo eego rajada caalamiga ah ee ku wajahan tixraacyada iyo hannaanka meel marinta HHM-ka ee farqiga u dhexeeya waddamada Saboolka ah iyo inta kale ee beesha caalamka. Somaaliya waxay u baahan tahay hawlgallo isku-dhafan oo ay la wadagto waddamada deriska ah iyo wax wada qabsi baahsan oo ay la yelato deeq-bixiyayaasha marka ay u hawlgalayso inay ka soo kabato dagaallada sokeeye ayna u hawlgasho sidii ay muwaadiniinteeda ugu noqon lahayd dawlad u dammaanad qaadda adeegyada asaasiga ah ee ay u baahan yihiin. Warbixintani waxay diiradda saaraysaa baahida lixaadka leh ee ay dhammaantood u qabaan sidii loo taabbagalin lahaa asaas togane ah oo saldhig u noqon kara bartilmaamedka la higsanayo, kuwaas oo lagu xaqaajinayo inaan Soomaaliya mar kale dib u noqon burburkii iyo colaadihii hore u soo maray.

**Santuukha 1.1 Himilooyinka Horumarinta Miliniyaamka**



UNDP/Thomas Zobel

**(HHM-ka)**

| | |
|---|---|
| Yool 1aad: | In si weyn La Dhimo Saboolinimada iyo Gaajada |
| Yool 2aad: | In Dunida la gaarsiiyo Waxbarashada Asaasiga ah |
| Yool 3aad: | In Kor Loo Qaado Sinnaanta Dheddig-laboodka |
| Yool 4aad: | In La Dhimo Dhimashada Carruurta |
| Yool 5aad: | In La horumariyo Caafimaadka Hooyada |
| Yool 6aad: | La dagaallanka HIV/AIDS-ka, Duumada Iyo Qaaxada |
| Yool 7aad: | In La xaqiijiyo badbaadada Deegaanka |
| Yool 8aad: | In La Horumariyo iskaashiga Horumarinta caalamiga ah |

# Macnaha Erayo La soo Gaabiyay

| | |
|---|---|
| AFP | Dabaysha saameynta Deg Degga ah leh |
| CDR | Heerka Ogaanshada Xaaladda Cudurka |
| CECs | Guddiyada Waxbarashada |
| CEDAW | Heshiiska Dabargoynta Noocyada Takoorka oo Dhan |
| CSZ | Aagga Koofurta iyo Bartamaha Soomaaliya |
| DAC | Guddiga Kaalmada Horumarinta |
| DOTS | Daaweynta si toos ah loola Socdo ee Muddada Gaaban |
| EC | Guddiga reer Yurub |
| ECHO | Xaafiiska Bini'aadanimada ee Guddiga reer Yurub |
| EPI | Barnaamijka La Ballaariyay ee Tallaalka |
| FAO | Hay'adda Cuntada iyo Beeraha |
| FGM | Gudniinka Dumarka |
| FSAU | Waaxda Daraasaadka Badbaadada Cuntada |
| GAVI | Isbahaysiga Caalamiga ah ee Tallaalka iyo Tallaalidda |
| GDP | Wax soo Saarka Guud ee Waddanka |
| GER | Qiyaasta Diiwaangelinta Guud/Xaddiga Diiwaangelinta Guud |
| GNP | Dakhliga Guud ee Waddanka |
| HDI | Tibaaxayaasha Horumarka Aadamiga |
| HDR | Warbixinta Horumarka Aadamiga |
| HIPC | Wadamada aad u Qaamaysan ee Saaboolka ah |
| HIV/AIDS | Dulinka Waxyeeleeya Unugyada Difaaca Jirka |
| HF Radio | Raadiyaha Isgaarsiinta ee Halow Halowga |
| ICRC | Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas |
| ICT | Tiknoolajiyada Macluumaadka iyo Isgaarsiinta |
| IDPs | Dadka Waddanka Gudihiisa ku Barakacay |
| IGAD | Uururka ka Dhexeeya Wadamada Geeska Africa ee Horumarinta |
| ILO | Ururka Shaqaalaha Adduunka |
| IMF | Hay'adda Lacagta Adduunka |
| INGO | Urur aan dawli Ahayn oo Caalamiya |
| ITNs | Shabaqa La Daaweeyay ee Kaneecada |
| KABP | Aqoonta, Fikradaha, Aaminaadda, iyo Dhaqamada |
| KCAL | Qaabka lagu Cabbro Tamarta Cuntada ku Jirta |
| LDC | Waddanka ugu Horumarka liita |
| LNGO | Urur Waddani ah oo Aysan Dawladi Lahayn |
| LICUS | Waddamada Dhaqaalahoodu Hooseeyo ee dhibaatooyinka ku Jira |
| MCH | Caafimaadka Hooyada iyo Dhallaanka |
| MDGs | Himilooyinka Horumarka ee Miliniyaamka |
| MICS | Sahanka Kooxaha ee Halbeegyada Badan |
| MMR | Heerka Dhimashada Hooyada |
| NEZ | Aagga Waqooyi Bari |
| NGOs | Ururrada aan Dawliga Ahayn |
| NWZ | Aagga Waqooyi-Galbeed |
| ODA | Kaalmada Horumarinta ee Rasmiga ah |

| | |
|---|---|
| OECD | Ururka Iskaashiga Dhaqaalaha iyo Horumarinta |
| PMAS | Habka la Socoshada iyo Faaqidaadda Saboolnimda |
| PPP | Heerka Awoodda Wax Gadashada |
| PRER | Soo Noolaynta Dhaqaalaha iyo Yaraynta Saboolnimada |
| PSS | Sahanka Dugsiyada Hoose |
| RBM | Hakinta Duumada |
| RVF | Qandhada Xoolaha ee 'Rift Valley" taas oo Keentay in Xoolaha Soomaalida la Xayiro |
| SACB | Hay'adda Isku Xirka Kaalmooyinka ee Soomaaliya |
| SES | Sahanka Bulsho-Dhaqaale |
| SIA | Hawlo Tallaal oo Dheeri ah |
| SOWC | Xaaladda carruurta Adduunka |
| STIs | Cudurrada Galmoodka la Isugu Gudbiyo |
| TB | Qaaxada |
| TBA | Umulisooyinka Dhaqanka |
| TNG | Dawladda Ku-Meel gaarka ah ee Qaranka |
| UN | Qaramada Midoobay |
| UNCT | Kooxda Qaramada Midoobay ee Waddanka |
| UNDP | Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobay |
| UNEP | Barnaamijka Deegaanka ee Qaramada Midoobay |
| UNESCO | Hay'adda Waxbarashada, Culuunta iyo Dhaqanka ee Qaramada Midoobay |
| UNHABITAT | Barnaamijka Dejinta Dadka ee Qaramada Midoobay |
| UNHCR | Hay'adda Qaxootiga ee Qaramada Midoobay |
| UNICEF | Santuukha carruurta ee Qaramada Midoobay |
| UNIFEM | Santuukha Horumarinta Haweenka ee Qaramada Midoobay |
| UNOSOM | Hawlgalka Qaramada Midoobay ee Soomaaliya |
| US$ | Lacagta Doolarka Maraykanka |
| USA | Maraykanka |
| WFP | Barnaamijka Cuntada Adduunka |
| WHO | Ururka Caafimaadka Adduunka |
| VSAT | Qalab yar oo loo Isticmaalo Internetka |

# Soomaaliya: Xaaladda Horumarinta ee Jirta

In ka badan shan iyo toban sano waxaa dalka Soomaaliya harqiyay dagaal sokeeye, Ilaa markaana weixi kadambeeyeyna wxuu waddanku ku jiray xaalad sharci la'aan iyo qalqal siyaasadeed taas oo ku timid iyadoo aysan jirin waddanka dawlad dhexe mudaddaas aynu kor ku soo xusnay. Soomaaliya waxay ka mid tahay wadamada ugu saboolsan adduunka. Burburka uu keenay dagaalka ahliga ahi waa mid qoto dheer. Hay'adihii dhaqaalaha iyo siyaasaddu waa dumeen. Dagaalku wuxuu keenay baaba'a naf oo balaaran oo aan horay loo arag taasoo saameyn xun ku yeelatay isku xirnaanta bulshada. Qax iyo barakac wadanka gudihiisa iyo dibadiisa ahi wuxuu horseeday xaalufin maskaxeed, iyo inay daciifaan xirfadihii asaasiga ahaa ee dadka ee lama huraanka u ahaa dib-u-dhiska waddanka. - Ilaa imminka dadka gudaha dalka ku bara-kacay waxa lagu qiyaasaa 370,000- 400,000, kuwaas oo xaaladdoda nololeed aad u liidato.

Jawiga siyaasadeed waa mid aan deganayn sida ay muujinayso xaalada daran ee miltari iyo siyaasadeed oo waddanka ka jirta. Colaad qoto dheer oo u dhaxaysa qabiilooyinka waxay sii hurisaa dagaal. Iyadoo aysan awalba jirin awood dhexe oo ururisa canshuur, wax mamnuucda, meelmarisa isla markaasa dejisa sharci, ayaa waxaa xaaladda nabadgelyo ee liiq liiqanaysay uga sii daray hubka ku soo qulqulaya waddanka. Inkastoo waddanku burburay, waxaa soo baxay qaabab maamul iyo xukun oo kala duwan si ay u buuxiyaan kaalinta bannaanaatay ee dawladnimo. Jamhuuriyadda Somaliland oo aysan bulshada caalamku aqoonsan ayaan la sameeyay 1991-kii, dawlad goboleedka Puntland ayaa laga sameeyay Waqooyi Bari sanadkii 1998-kii. Hase yeeshee, weli waa ay xaddidan tahay hawlgallada dhinaca gargarka ee lagu fuluin karo Bartamaha iyo koofurta Soomaliya. Dawlad Qaran oo Ku-Meelgaar ah ayaa iyana ka hawlgashay Muqdisho 2000. Dadaaladda dib-u-heshiisiinta ee socda oo ay horkacayso IGAD waxay ilaa iyo hadda ku guulaysteen in la dhiso Baarlamaan Qaran, lana doorto Guddomiye Baarlamaan iyo Madaxweyne. Dawlad Qaran oo Federaal ah ayaa la dhisay.

Deganaansho iyo nabadgelyo xaddidan ayaa ka jirta gobollada waqooyi, laakiin haddana colaado iyo rabshado ayaa kasii socda inta badan koofurta iyo bartamaha waddanka.

Ku xad-gudubka xuquuqda aadanaha waa iska joogto. Waxaana ka mid ah xad-gudubyadan dil, boob, burburinta hantida, oo dagaalka loo adeegsado, qafaal, takoorka dadka laga tirada badanyahay, cadaaladda oo la isu diido, jirdil, gudniinka dumarka iyo kufsiga. Dadka waaweyn waxay soo tebiyeen dhacdooyin kufsi, waxay soo tebiyeen in dhacdooyin shaqaaqo ee lagula kaco Carruurta iyo dadka waaweyn inuu iska noqday "wax aad u caadi ah ama caadi ah" labadaradle xad-gudubyada ka dhanka ah carruurta iyo Haweenka.

Hay'adaha caalamiga ah ee ka hawlgala Soomaaliya oo ay ku jirto Qaramada Midoobay waxay gacan ka geysteen horumarinta maamulka caddaaladda iyadoo la horumarinayo qaanuunka iyo kala dambaynta, la dhisayo xirfadaha hay'adaha sharci fulinta, korna loo qaadayo hirgelinta si siman loo hirgeliyo xuquuqda aadanaha. Waxaa arrintan sii kaalmeynaya iyadoo la dejiyay hannaan hawlgal oo lagu dhawrayo lagulana soconayo xaquuqda aadamaha, isla markaana lagu dhisayo xirfadaha xil qaadayaasha laguna xoojinayo jawiga ay ku badbaadi karaan dadku gaar ahaan haweenka iyo carruurta oo ka mid ah kooxaha ugu nugul bulshada.

Qiyaasta hawlgallada dhaqaalaha, marka Boqolley loo rogo, dadka dhaqaale ahaan xayiga ah, waxaa lagu qiyaasaa inay ka hooseeyaan 38.5% Magaalooyinka iyadoo 59.3%[1] lagu qiyaasay Reer Guuraaga/Miyiga. .Tani waxay tilmaamaysaa shaqo la'aan baahsan iyadoo ay aad u sarrayso ku tiirsasanaanta kaalmada. waxana lagama maarmaan ah in la xuso inyasan tirooyinkani ahayn kuwa loo qaadan karo hoosaynta shaqo helidda ama heer ku meel-gar ah, balse waxa looga qiyas qadan karaa tilmaamayal guud oo qiyaas ahaaneed.



UNDP/Victor

[1] Sahanka Dhaqaale-Bulsho ee UNDP Soomaaliya/Bangiga Adduunka, 2002

Saameynta xun ee dagaalka waxaa ka mid dhibaatada maskaxeed ee ka dhalata dhacdooyinka naxdinta leh iyo khalkhal soo gaaray dadka dhibaatooyinka colaaddu taabatay. qabatinka Qaad cuniddu waxay wax u dhimmaan qaabka jirku u shaqeeyo waxayna keenaan dhibaatooyin bulsho taas oo saameynaysa awooda wax soo saar ee in badan oo ragga ka mid ah. Haweenka waxa qasab ku noqotay inay bedelaan kaalintii lagu yaqaanay ee xanaanadda carruurta, waxayna u weecdeen in ay kaalin asaasi ah ka qaataan u soo xoojinta qoysaska iyadoo jawiga ay ku shaqeeyaanna uusan ahayn ammaan isla markaana bulshadu aysan horay u aqoon kaalintan cusub ee haweenka.

Ammaan xumida jirta waxay saameynaysaa sidoo kale hababka nolosha lagu xoogsado. Colaadda sii socotaa waxay Soomalida siyaabo badan uga hor istaagtay inay dhistaan hannaanki ay u maarayn lahayeen noloshooda. Beero qodoshada iyo goosashada dalagga oo liitaa waxay sababtay cunto yar ba'an, taas oo ay uga sii dartay roob yarida iyo cudurada ku dhaca dalagga. Ku dhawaad afar meelood saddex dadka Soomaaliyeed waa sabool, iyadoo kala bar wax waxyar ka yarna ay ku noolyihiin saboolnimo ba'an. Hababkii nolol helidda ee dabiiciga ahaa waxaa sii cakiray cunaqabataynta la saaray xoolaha laga soo dhoofsado Soomaaliya taasoo keentay saameyn daran maadaama xooluhu yihiin lafdhabarka dhaqaalaha Soomaalida.

Iyadoo ay awalba dadku si ba'an u haysatay cunto yari iyo iyagoon haysan biyo nadiif ah iyo adeegyada bulshada ee asaasiga, ayaa haddana waxaa qaybinta gargaarka bini'aadanimada hor istaagay nabadgelyo xumida.

Nidaamaka waxabarashada Soomaaliya isna sidoo kale wuu kala daatay ilaa uu gebi ahaanba shaqayn waayay bartamihii 1980-maadkii. Taas waxay keentay in waddanka ay ku dhacdo khasaaro aqooneed oo aan laga soo kaban karin waxaana ku dhacay waxa badanaa loogu yeero 'khasaarada labada jiil.' Dugsiyo badan waxaa ku dhacay burbur aan laga dayactiri karin, kuwo kaloo badanna waxay aad ugu baahanyihiin dib-u-dhis culus. Soomaaliya waxay uga jirtaa adduunka heerka ugu hooseeya ee diiwaangelinta ardayda dugsiyada iyo far qoris-akhrinta dadka waaweyn.

Adeeg caafimaad oo weyn ma jiro marka laga reebo goobo caafimaad oo ay sameysteen bulshooyinku iyo adeegyo caafimaad oo gaar loo leeyahay kuwaas oo aysan inta badan dadka saboolka ahi awoodi karayn. sida ay tilmantay daraasad ay samaysay hay'adda WHO ee Qaramada Midoobay uqaabilsan caafimaadka - Waqooyiga Soomaaliya , tusaale ahaan, tobankii cusbitaal hal ayaa imminka si fiican u shaqeeya. Intaas waxaa wehlisa in adeegyada caafimaadku ay ku koobanyihiin magaalooyinka ama meelaha magaalooyinka ku dhaw, taas oo micnaheedu yahay in adeegga caafimaad ee dadka miyigu heli karaan uu yaryahay.

Hay'adihii qaranka ee xog ururinta waxaa si xun u waxyeeleeyay dagaalka, taasoo keentay faraq xogeed oo weyn iyadoo aysan jirin xog istaatistiko dhamaystiran oo laga ambaqaado iyo xog ku saabsan dhaqaalaha dadban, iyadoo taasi dhib ka dhigtay in la sameeyo faaqidaad dhaqaale. Si kastaba ha ahaatee marka la eego dhinaca wanaagga, waxa jira hogaamiyayaal bulsho oo madax bannaan aadna u firfircoon, ururo wadani ah, kooxo aqoonyahano ah kuwaas oo ku hawlan inay wax ka qabtaan arrimaha bulshada, siyaasadda iyo dhaqalaha, waxayna kaalin wanaagsan ka ciyaareen sidii looga hortegi lahaa fikradda qaldan ee Soomaaliya laga haysto inay tahay waddan aan lahayn meel uu ciirsado.

Doorka soo kobcaya ee waxtarka leh ee qaybaha gaarka loo leeyahay waxuu gacan ka gestay sameynta maamulada wuxuuna dad badan u abuuray baraare dhaqaale. Houmarka deg degga ah oo xagga tiknoolajiyada isgaarsiinta ah ayaa la gaaray, waxayna shirkadaha isgaarsiinta Soomaaliya bixiyaan teleefanada ugu jaban uguna sahlan xagga helitaanka Afrika oo idil. Helitaanka taleefanadu wuxuu fududeeyay ganacsiga caaalmiga ah iyo isgaarsiinta.

Lacagaha ay soo xawilaan dadka dibadaha ku nool oo gaaraya inta u dhexeysa 750 milyan ilaa 1 bilyan ee doolar sanadkii waa isha ugu weyn ee Soomaaliya ka hesho lacagaha adag. Xawaaladdu wax weyn ayay u tartay dhaqaalaha waddanka oo ay u suurtageliso inuu alaab bannaanka ka soo gato isla markaana waxay dabooshaa xawaaladdu baahida loo qabo lacagaha adag, waxay sidoo kale u suuragelisaa dadka ka faa'idysta inay helaan badbaado cunto oo fiican iyo adeegyada bulsho ee ay u baahanyihiin. Ganacsiga dibaddu qayb yar ayuu ka yahay dhaqaalaha Soomaalida, marka la barbardhigo qiimaha xawaaladda ee sanadkii soo gasha Soomaaliya.

Si kastaba ha ahaatee, xaqiiqdu waxay tahay inuu weli jiro farqi weyn oo u dhexeeya adeegyada la heli karo iyo fursadaha dakhli abuuridda. QM iyo Hay'adaha gargaarka caalamiga ah ayaa weli waddanka u fidiya inta badan adeegyada bulshada oo wax ka tari doonta in la helo jawi lagu xaqiijin karo Ujeedooyinka Horumarinta Miliniyaamka.

Shirweynihii afar iyo tobnaad ee nabadaynta iyo dib-u-heshiisiinta ee lagu qabtay dalka Kenya 2002-2004, ayaa lagu

gaadhay dhismaha dawladda Federaalka Ku-meel-gaarka ah(TFG) ee shanta sano ee soo socota. waxaa la dhisay Barlamaanka Ku-meel gaarka ah bishii June 2004. waxaana la doortay madaxweynaha bishii Oktoober 2004, islamrkaana wuxuu magacabay Ra'iisul-wasaare bishii January 2005, isna soo dhisay golihii wasaaradda.Dawladda KMG ah waxay ka soo badbaaday hadimooyin fara badan oo aysan ka samata-bixin geeddi-socodyadii iyada ka horreyey. Wallow ay iyaduna la kulantay caqabado dhawr ah, waxayna ka shaqaysay dib-u-heshiisiinta gudaha iyo aqoonsiga dhismaha maamullada degmooyinka, islamarkanawaxay ka qaybgashay kulammo heer gobol iyo heer caalami ah.

Dawladda KMG ah waxay ka soo badbaaday hadimooyin fara badan oo aysan ka samata-bixin geeddi-socodyadii iyada ka horreyey. Wallow ay iyaduna la kulantay caqabado dhawr ah, waxayna ka shaqaysay dib-u-heshiisiinta gudaha iyo aqoonsiga dhismaha maamullada degmooyinka, islamarkanawaxay ka qaybgashay kulammo heer gobol iyo her caalami ah.

Inkasto ay rajo horumar leh ka muuqatay "waaga cusub" ee u baryey waddanka hadimooyinka dagaallada sokeeye ay aafeeyeen, haddana weli waxaa muuqata rajo nabad iyo xasilooni lagau soo dabbaalayo dalka. Hay'adihii Federaalka ku-meel-gaarka ah(TFIs) ee markii hore lagu dhisayNairobi, ayaa laoo rarayJowhar Bishii June 2005.

Wada-xaajood dheer kaddibana waxaa Hay'adaha (TFIs) loo warreejiyey Baidoa Bishii February 2006, halkaas oo kal-fadhiggii ugu horreyey ay Xildhibaannada Golaha Barlaanku kuyeeshaan ciidda Soomaliya oo ku qabsoomay. DFKMG ah, waxaa la soogudboonaaday caqabado dhexdeeda ah iyo sidii ay u wejjihilahayd dib-u-heshiisiinta dalka,taas oo sida caadada ah uu la ulmi karo maamul laga hirgelinayo dal muddo dheer colaad ku soo jiray. Bishii august 2006, ayaa ra'iisul wasaaruhu isku shaan-dheeyey dawladdiisa, isagoo yareeyey tirada wasaaradaha, si uu sare ugu qaado tayada dawladda.

Waxa markiibasii if-baxay xaaldo deg-deg ah oo dagaallo qabaa'il ku dhisani ay ku dhexmarayeen sidii ay ku hanan lahayeen dhaqaalaha iyo goobaha ganacsiga, kuwaas oo markii dambe isu rogay dagaallo calculus oo dhexmaray Midowga maxaakimta Islaamiga ah (ICU) iyo Hoggaamiye-kooxeedyadii hoos-tegeyey dalladdii la magac-baxday isbahaysiga badbaadada nabadda iyo la dagaalanka Argagixisada (ARPCT). Tani waxay dhaxalsiisay in laga adkaado isbahaysigii APRCT dabadeedna ay Maxaakimta(ICU) ay ku sii baahan gacan ku haysnta Bartamaha iyo Kofurta Soomaaliya, iyagoo horumar ka sameeyey nabadda goobaha qaarkood. Si kastaba h ahaatee, xiisado aya ka dhex qarxay ICU iyo TFG, kasoo si tar-tiib-tar-tiib ah u sii baahayey, kaasoo ugu dambayntii colaad weyn horseeday, kaddibna ay dawladda KMG ah ay la wareegtay maamulka Moqdishu iyadoo haatan ku hawlan sidii ay rasmi ahaan goobtaas ugu guuri lahayd.

Qaramada Midoobay ayaa kaalin muhiim ah ka qaadanysa taageerada DFKMG ah oo ah Maamulka Sharciga ah ee dlka soomaaliya, iyadoo islamarkaana gacan siinaysa dadaallada ay horseedka ka yihiin la hawlgalayaashaku danaynaya xallinta khilafaadka u dhexeeya TFG iyo ICU. Mudnaanta ay leeyihiin dhaqdhaqaaqyada aan rabshadaha ku dhisnay ee lagu xallin karo khilaafaadka gudaha ka jira ayaan marxalidihii hore si habboon loo maaraynin.

Marka loo eego hawlgallada Soomaaliya iyo Beesha caalamkaba, dawladda FKMG ah, si xayi ah ayey uga qaybqaadatay daraasadaha Baahida wadajirka ah, geeddi-socodka lagu xaqiijinaye baahida mudnaanta leh ee dalka marxaladda hore inta lagu guda jiro shanta sano. Qorshaha xaqiijinta, dib-u-dhiska iyo qaab-hawleedka Horumarinta, iyadoo fursadaasi ay leeyihiin mudnaan xasasi u ah dhaqaalaha iyo dib-u-soo-noolayta adeegyada bulshada islamarkaana Ummadda Somaaliyeed loo horseedayo nolol aayatiin leh.

Horumarka dalka Soomaaliya, wuxuu ku kala duwan yahay min Gobol ilaa Gobol, taas oo macnheedu yahay; hadba sida loom eel-mariyo bartilmaameedyada HHM-ka, kuwaas oo aan u muuqan karin qaab heer qaran waafaqsan. Qaabab fara badan oo xaqiiqo ku dhisan ayaa laga gaari karaa Himiliyooyinkaas marka loo eego heerar-qarameed-hoosaadka, goobahas oo ay nabadgelyo iyo degenaansho ka jiraan.

**Santuukha 1.2 Saameynta Colaadda iyo jewiga deganaan la'aantu ku leeyahay MDGs**

In la gaari waayo bartilmaameedyada Himilooyinka Horumarinta Miliniyaamka waxaa ka mas'uul ah xaaladda nabadgelyo xumidda jirta taas oo ay astaan u tahay iyadoo aysan jirin hay'ado xukun iyo kuwo maamul dhaqaale, kaabayaashii dhaqaale iyo bulsho oo burburay, tiro badan oo dad ah oo barakacay, iyo fursadaha dhaqaale helidda oo gaabis ah.Arrimahaan oo wada socdaa waxay joogteeyeen dagaalka hubaysan iyo shaqaaqooyinka. Nabad iyo ammaan ayaa loo baahanyahay si loo gaaro bartilmaameedyada Himilooyinka Horumarinta Miliniyaamka kuwaas oo haddii la waayana colaaddu sii soconayso.

*(Waxaa laga soo qaatay shabakadda internetka ee MDG-crrp-net Global Discussion, "shaqaaqooyinka iyo horumarka, xiriirka ka dhexeeyaMDGs-ka, dagaallada iyo xaaladaha musiibooyinka - 3Luuliyo 2004)*


# MDGs iyo Xaaladda Soomaaliya

Marka la eego xaaladda horumar ee Soomaaliya, in la xaqiijiyo bartilmaameedyada Himilooyinka Horumarinta Miliniyaamka ee caalamiga ah ma ahan arrin suurtagal ah, sidaa darteed bartilmaameedyo dhab ah oo la socon kara xaaladda gudaha ee waddanka ayaa la dejiyay si loo gaaro himilooyinka. Dhibaatooyinka Soomaaliya ka jiraa waxay u baahanyihiin in la waafajiyo MDGs-ka qaybaha ay is qaadan karaan ee istiraatijiyadda nabad dhisida, iyo qorshaha dib-u-dhiska iyo horumarinta Soomaaliya iyadoo maskaxda lagu hayo xiriirka ay la leeyihiin colaadaha tegay iyo kuwa taaganiba arrimaha ay ka mid yihiin ku herdanka khayraadka iyo dhaqaalo doonka. Colaadaha noocaan ahi waxay ugu danbaynta keenaan saboolnimo, deegaanka oo xaalufa, hoos u dhac caafimaad iyo khayraadka xirfadeed ee dadka oo hoos u dhaca.

Waxaa muhiim ah in la aqoonsado in jawiga horumarineed ee gobolladu kala duwanyihiin taas oo saameyneysa sida looga hirgelinayo MDGs-ka Soomaaliya. Nabadgelyada iyo deganaanshada ka jirta goboladda qaarkood waxay abuurtay jawi suuragelinaya koboc dhaqaale, bulsho iyo horumar. Tusaale ahaan jaantuska hoose waxuu tilmaamaysaa siday gobolladu ugu kala duwanyihiin dakhliga fardiga soo gala. Gobollada xasiloonidu ka jirta ayaa ah kuwa dhaqaale ahaan ladan. Sidaa darteed, nabadda iyo ammaanku waxay ka mid yihiin shuruudaha lama huraanka u ah in la gaaro MDGs-ka.

Sidaa daraadeed, suurgal ahaanshada in la xaqiijiyo Himilooyinka Hourmarinta Miliniyaamka ee la tiigsanyo way ku kala duwanyihiin gobolladu iyadoo taas ay ku xirantahay hadba heerka nabadgelyada iyo deganaanshada ka jirta gobolka wax laga hirgelinayo. In la dejiyo bartilmaameedyo horumarineed iyo waxyaabaha mudnaanta u ah deegaan kasta iyo kooxaha bulshada ee heer hoose ayaa loo baahanyahay si loola socdo hadba horumarka lagu talaabsaday si loo gaaro bartilmaameedyada MDGs-ka sannadka 2015.

Jaantuska A: Sida Dakhli Helidda Farqiga Loogu Kala Duwanyahay Gobolladda ($)



### Shaxda A:  Halbeegyada asaasiga ah ee bulsho-dhaqaale Soomaaliya

| Halbeegga | Tirada | Sannadka/Xogtii u dambaysay |
|---|---|---|
| Saamiga dadka ku nool saboolnimada daran (dakhliga qofka ee ka yar $1 doolar marka loo fiiriyo waxa qofku ku gadan karo halka doolar oo lacagta waddanka loo rogay) | 43.2% | (2002) Sahanka Dhaqaale-Bulsho ee UNDP iyo Bangiga Aduunka |
| Dadka qaybta ku nool saboolnimo guud (qofku uu helo dakhli ka yar $2 marka loo fiiriyo waxa uu ku gadan karo $2 doolar oo loo rogay lacagta waddanka) | 73.4% | (2002) Sahanka Dhaqaale-Bulsho ee UNDP iyo Bangiga Adduunka |
| Saamiga boqolkiiba 20-ka dadka ugu faqiirsani ka helaan dakhliga waddanka | 5.6% | (2002) Sahanka Dhaqaale-Bulsho ee UNDP iyo Bangiga Adduunka |
| Saamiga ta 5 sano ka yar ee culeyskoodu hooseeyo | 26% | (2001) Sahanka dhinacyada badan ee UNICEF |
| Saamiga dadka cuna cunta leh tamartii loo baahnaa wax ka yar | 71% | (2003) FAO xaaladda cunta yari eeadduunka |
| Tirada guud ee ka diiwaangashan waxbarashada asaasiga ah | 18% | (2003/4) UNICEF PSS |
| Saamiga gabdhaha iyo wiilasha dhigta waxbarashada asaasiga ah | 54% | (2003/4) UNICEF PSS |
| Saamiga dadka waaweyn ee wax akhriya waxna qora | 19.2% | (2002) Sahanka Dhaqaale-Bulsho eeUNDP iyo Bangiga Aduunka |
| Saamiga dumarka waaweyn ee wax akhriya waxna qora marka loo fiiriyo heerka ragga waaweyn | 52.2% | (2002) Sahanka Dhaqaale-Bulsho ee UNDP iyo Bangiga Adduunka |
| Heerka ka qaybgalka dumarka ee baarlamaannada : | | (2003) Waraaqda istiratijiyadda jinsiga iyo xuquuqul insaanka ee SACB |
| Maamulka Somaliland(Golaha Odayaasha Guurtida) | 0/82 | |
| Maamulka Puntland(Golaha Isimada) | 5/68 | |
| Dawaladda Federaalka ee Ku-meel-gaarka ah | 23/275 | |
| Heerka Dhimashada ta ka yar 5 sano (ee 1,000-kii nolol ku dhalataba) | 224 | (2001) Sahanka dhinacyada badan ee UNICEF |
| Heerka Dhimashda dhallaanka dhab ku jirka ah (1,0000-kii nolol ku dhalataba) | 132 | (2001) Sahanka dhinacyada badan ee UNICEF |
| Tirada carruurta 1 sano jirkaa ee hesha tallaalka jadeecada | 45% | (2004) UNICEF SOWC |
| Xaddiga dhimashada hooyada (marka loo eego 100,000 ee carruur nolol ku dhalataba) | 1,100 | (2003) UNICEF SOWC |
| Saamiga dadka waaweyn ee da'doodu u dhaxayso 1-49 ee sida cudurka HIV/AIDS-ka | <1% | (2002) Laanta Qaramada Midoobay uqaabilsan AIDS-ka iyo UNICEF |
| Inta dhiig deeqayaasha qabta cudurka HIV/AIDS-ka | 0.8-1.1% | (2003) Istiraatijiyadda ka hortagga iyo xakamenyta cudurka HIV/AIDS-ka iyo cudurada galmoodka la isugugudbiyo |
| Qiyaasta Xaaladaha duumada ee Soomaaliya | 1,851 | (2003) Warbixinta sannadka ee WHO |
| Xaddiga Ogaanshaha Qaaxada | 42% | (2003) WHO - Global Fund Proposal |
| Saamiga dhulka kaymaha ah ee Soomaaliya | 12% | (2003) UNDP HDR |
| Xaddiga dadka isticmaala shidaalka adag | 98.5% | (2003) MDG Sectoral Paper onEnvironment |
| Saamiga dadka heli kara biyo nadiif ah | 23% | (2001) UNICEF MICS |
| Saamiga dadka heli kara fayo dhawr wanaagsan | 49.8% | (2002) UNDP Somalia/World Bank Socio-Economic Survey |
| Inta dadka haysata taleefanka dhulka 1,000-kii qofba | 8.4 | (2001) UNDP Somalia HDR |
| Inta dadka haysata taleefanka gacanta 1,000-kii qofba | 14 | (2005) Sahanka Shirkadaha Is-gaarsiinta Soomaaliya |
| Inta computer isticmaali karta 1,000-kii qof | 0.5% | (2002) UNDP Somalia/World Bank Socio-Economic Survey |
| Tirada Dadka | 6.8Million | (2002) UNDP Somalia/World Bank Socio-Economic Survey |
| Sannadaha rajada nololeed laga bilaabo marka dhalashada | 47 years | (2002) UNDP Somalia/World Bank Socio-Economic Survey |
| Dakhliga qofka uga soo aada wax soo saarka oo loo rogay (PPP US$-waxa doolarku ka gooyo waddanka) | 795 | (2001) UNDP Somalia HDR |
| Heerka Soomaliya ee Horumarka Aadamiga | 0.299 | (2002) UNDP Somalia/World Bank Socio-Economic Survey |

## Shaxda B: Milicsiga Xaaladda HHM-ka Soomaaliya

| Himilada | Bartilmaameed | Halbeegyada (1990) | Xogta ugu dambays (2002-2004) | Bartilmaameedka (2015) | | Ma loo xaqiijin karaa himilida(si xayi ah, aan sugnayn, xog la'aan) | Xaalad Jawi taageero (xoog, caadi ah, liidata,laakiin hagaagaysa, liidata) |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | Caalamka | Soomaaliya | | |
| Himilada 1: Ciribtirka Saboolnimada daran iyo gaajada | Bartimaameed1:In kala bar la dhimo inta u dhaxaysa 1990-2015, dadka qiyaastii dakhligoodu ka yar yahay hal maalintii(%) | Xog ma leh | 43.2 | 21.6 | 21.6 | Si xayi ah | Liidata balse kobcaysa |
| | Bartimaameedka 2: In la dhimo kala bar dadka gaajadu hayso inta u dhexeysa 1990-2015 | | | | | | |
| | Carruurta shan sano ka yar oo culayskoodu Hooseeyo (%) | Xog ma leh | 26 | 13 | 13 | Si xayi ah | Liidata balse kobcaysa |
| | Saamiga dadka cuna cunto leh wax ka hooseeya tamartii loo baahnaa (1,600Kcal/maalintii)(%) | Xog ma leh | 71(oo keliya ayaa hela heer ugu yar ama ugu hooseeya) | 21.6 | 21.6 | Si xayi ah | Liidata balse kobcaysa |
| Himilada 2: In la xaqiijiyo Waxbarashada Asaasiga ah in caalamka laga wada helo | Bartimaameedka 3: In la xaqiijiyo in Waxbarashada Asaasiga ah la wada helo caalamka oo dhan In sannadka 2015 lana hubiyo in gabdho iyo wiilal si isku mid ah ay awood ugu helaan dhammaystirka waxbarashada asaasiga ah oo buuxda | | | | | | |
| | Diiwangelinta guud ee waxbarashada asaasiga ah, gabdho iyo wiilal , iyo isku darkoodaba fasalka 1-5(%) | 35 | 45 | 100 | 80 | Si xayi ah | Liidata balse kobcaysa |
| | Tirada ardayda billowda fasalka koowaad ee gaara fasalka 1-8(%), gabdho iyo willal iyo isku darkoodaba | 15 | 18 | 100 | 71 | Si xayi ah | Liidata balse kobcaysa |
| Himilada 3: In sare loo qaado isku-dheellitirka dheddig-laboodka iyo kaalinta haweenka | Bartimaameedka 4: In la ciribtiro farqiyada u dhexeeya Dugsiyada hoose iyo sare 2005, iyadoo dhammaan heerarka tacliinta la midaynayo 2015 | | | | | | |
| | Saamiga dheddig ee dugsiyada hoose ku biiraya inta ay ka le'eg yihiin (%) saamiga lab | Xog ma leh | 54 | 100 | 100 | Aan sugnayn | Liidata balse kobcaysa |
| | Saamiga dheddig ee dugsi sare ku biiraya inta ay ka le'eg yihiin(%) saamiga lab | Xog ma leh | 27 | 100 | 100 | Aan sugnayn | Liidata balse kobcaysa |
| | Saamiga dheddig ee tacliinta sare ku biiraya inta ay ka le'eg yihiin(%) saamiga lab | 22 | 18 | 100 | 100 | Aan sugnayn | Liidata balse kobcaysa |

Shaxda B: Milicsiga Xaaladda HHM-ka Soomaaliya

| Himilada | Bartilmaameed | Halbeegyada (1990) | Xogta ugu dambays (2002-2004) | Bartilmaameedka (2015) | | Ma loo xaqiijin karaa himilida(si xayi ah, aan sugnayn, xog la'aan) | Xaalad Jawi taageero (xoog, caadi ah, liidata,laakiin hagaagaysa, liidata) |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | Caalamka | Soomaaliya | | |
| | Saamiga wax-qoris-akhriska ee dheddigga waaweyn (%) ee saamiga labka waaweyn ee dhiggooda ah | 38 | 52 | 100 | 100 | Aan sugnayn | Liidata balse kobcaysa |
| Himilada 4: In la yareey xaddiga dhimashada dhallaanka | Bartimaameedka 5: In la dhimo xaddiga dhimashada carruurta 5-ta sano ka yar inta u dhaxaysa 1990 ilaa 2015 qiyaastii saddex meelood laba meel | | | | | | |
| | Xaddiga Dhimashada carruurta 5-ta sano ka yar, 1,000 nolol ku dhalata(dhimashada dhallaanka) | 275 | 224 | 92 | 92 | Si xayi ah | Liidata balse kobcaysa |
| | Xaddiga dhimashada dhallaanka, 1,000 nolol ku dhalata | 152 | 132 | 51 | 51 | Si xayi ah | Liidata balse kobcaysa |
| | Saamiga carruurta 1 sano jirka ah oo si buuxda u hela tallaalka jadeecada(%) | 30 | 45 | 100 | 100 | Aan sugnayn | Liidata,balse kobcaysa |
| Himilada 5 : in la horumarinyo caafimaadka hooyada | Bartimaameed 6: In hoos loo dhigo afar-meelood seddex meel xaddiga dhimashada hooyada inta u dhaxaysa 1990-2015 | | | | | | |
| | Xaddiga dhimashada hooyada uurka leh, 1,000 nolo ku dhala | 1,600 | 1,100 | 400 | 400 | Si xayi ah | Liidata balse kobcaysa |
| | Qiyaasta Hooyooyinka ay ka umuliyaan shaqaale xirfad leh(%) | Xog ma leh | 25 | 100 | 100 | Aan sugnayn | Liidata balse kobcaysa |
| Himilada 6: Dagaalka ka dhanka ah HIV/AIDS-ka,Duumada iyo Cudurrada kale: | Bartimaameed 7: In la hakiyo 2015, iyadoo dib loo celinayo xawliga HIV/AIDS-ka | | | | | | |
| | Dadka HIV-ga ka qaada dhiig-ku-deeqista | Xog ma leh | 0.8-1.1 | | | | Liidata balse kobcaysa |
| | Hooyooyinka uurka leh ee da'doodu u dhaxayso 15-24 ee HIV-ga qaba | Xog ma leh | Xog ma leh | | | | Liidata balse kobcaysa |
| | Xaddiga isticmaala cinjirka galmada/xaddiga | Xog ma leh | Xog ma leh | | | | Liidata balse kobcaysa |
| | Tirada carruurta HIV/AIDS agoontimeeyey | Xog ma leh | Xog ma leh | | | | Waa Liidata |
| | Bartilmaameed 8: In la hakiyo 2015 iyadoo dib loo celinayo qaadista Duumada iyo cudurrada culculs ee kale | | | | | | |

Shaxda B: Milicsiga Xaaladda HHM-ka Soomaaliya

| Himilada | Bartilmaameed | Halbeegyada (1990) | Xogta ugu dambays (2002-2004) | Bartilmaameedka (2015) | | Ma loo xaqiijin karaa himilida(si xayi ah, aan sugnayn, xog la'aan) | Xaalad Jawi taageero (xoog, caadi ah, liidata,laakiin hagaagaysa, liidata) |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | Caalamka | Soomaaliya | | |
| | Dhacdooyinka Duumada qiyaas ahaan 100,000 qofba | Xog ma leh | Bukaannada Rugaha caafimaadka -205 | 0 | 0 | Aan sugnayn | Liidata balse kobcaysa |
| | Xaddiga Dhimashada Duumada la xiriirta 100,000 qof | Xog ma leh | 81 dhimasho | 0 | 0 | Aan sugnayn | Liidata balse kobcaysa |
| | Qiyaasta goobaha khatarta Duumada ugu badan carruurta shanta sano ka yar ee adeegsada qaababka rasmiga ah ee ka hortagga iyo daaweynta(%) | Xog ma leh | 16 qof ayaa seexata sariirro sansayeeri leh, halka o ay seexdaan sariiro sansayeeri daaweysan | 100 | 100 | Aan sugnayn | Liidata balse kobcaysa |
| | Xaddiga dhacdooyinka Qaaxada(TB) la xiriira ee qiyaastii 100,000 qof | Xog ma leh | 107 | 0 | 0 | Aan sugnayn | Liidata balse kobcaysa |
| | Xaddiga dhacdooyinka sida tooska ah looga taxadaray,ee bukaannada TB-da qaba, iyadoo la adeegsanayo daaweynta muddada gaaban(DOTs) (%) | Xog ma leh | Xog ma leh | 0 | 0 | Aan sugnayn | Liidata balse kobcaysa |
| | Dhacdooyinka toganaha ah ee cudurrada faafa qiyaastii laga helo 100,000 qofba | Xog ma leh | 162 | 0 | 0 | Si xayi ah | Liidata balse kobcaysa |
| | Xaddiga daaweynta lagu guulaystay(%) | Xog ma leh | 80 | 100 | 100 | Si xayi ah | Liidata balse kobcaysa |
| Himilada 7 : in la Xaqiijiyo Taabbagalinta Deegaanka | Bartimaameed 9: in la is-waafajiyo Barnaamijyada siyaasadda dalka iyo qawaaniinta horumarinta iyo dib-u-soo-kabashada khasaaraha ilaha dabiiciga ah | | | | | | |
| | Saamiga qiyaasta goobaha ee ay keymuhu daboolaan(%) | 13 | Xog ma leh | 10 | | | Waa liidataa |
| | Saamiga gooaha dhawrista wax soo saarka Baayo-lojiyeed ee oogada dhulka(%) | Xog ma leh | 0.01 | | | | Waa liidataa |
| | Qiyaasta hawada carbon dioxide-ka ee ay soo daayaan nooluhu iyo isticmaalka yaraynta walxaha kiimikaad(ozone-depleting Chlorofluorocarbons) | Xog ma leh | 0 | | | | Waa liidataa |
| | Qiyaasta dadka isticmaala shidaalka adag(%) | Xog ma leh | 98.5 | | | | Waa Liidata |
| | Qiyaasta unugga isticmaalka Tamarta DGP | Xog ma leh | Xog ma leh | | | | Waa liidataa |


Shaxda B: Milicsiga Xaaladda HHM-ka Soomaaliya

| Himilada | Bartilmaameed | Halbeegyada (1990) | Xogta ugu dambays (2002-2004) | Bartilmaameedka (2015) | | Ma loo xaqiijin karaa himilida(si xayi ah, aan sugnayn, xog la'aan) | Xaalad Jawi taageero (xoog, caadi ah, liidata,laakiin hagaagaysa, liidata) |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | Caalamka | Soomaaliya | | |
| | Bartimaameedka 10: In kala bar la dhimo 2015 qiyaasta dadka aan heli Karin fursadaha biyo nadiif (%) | Xog ma leh | 77 | 38.5 | 38.5 | Si xayi ah | Liidata balse kobcaysa |
| | In kala bar la dhimo 2015 qiyaasta dadka aan heli Karin fursadaha faya-dhaw tayeysan (%) | Xog ma leh | 49.8 | 25 | 25 | Si xayi ah | Liidata balse kobcaysa |
| | Bartilmaameed 11: in la gaarsiiyo horumar taam ah nolosha ugu yaraan 100 milyan dadka xaafadaha isku-raranta ( xaaladda dadka baracay ee Soomaliya) | | | | | | |
| | Qiyaaasta dadka heli kara deegaan-dhuleed oo nabad ah | Xog ma leh | Xog ma leh | | | | |
| Himilada 8: Dhismaha isbahaysiga Horumarinta Caalamiga ah | Bartimaamed12: In la hirgeliyo ganacsi xor ah iyo nidaam maaliyadeed sharci hufan oo aan fuquuq ku dhisnayn | | | | | Aan sugnayn | Liidata balse kobcaysa |
| | Bartimaameed 12: In la soo bandhigo ugu yaraan baahida gaarka ah ee waddamad hore-u-maray | | | | | | |
| | Bartimaameed 13: In la soo bandhigo Baahida asaasiga ah waddamada horumarka yar sameeyey, Wadarta guud ee dakhliga deeq-bixiyayaashu ay boqolkiiba dhaqaalaha qaranka ku kabaan iyadoo waaxda deeqaha dibadda ODA ilaa waddamada saboolka ah( LDCs) taas oo qiyaasta waaxyaay kaalmada u qooneeyaan ODA iyo OECD/DAC ee kaalmooyinka asaasiga ah ayna ka mid yihiin; caafimaaka asaasiga ah(waxbarashada asaasiga ah iyo faya-dhawrka) oo qiyaas ahaan waafaqsan heshiisyada labada dhinac ee ODA iyo OECD?DAC ee midaynta deeqaha | Xog ma leh/raadna ma leh | Xog ma leh/raadna ma leh | | | | Liidata balse kobcaysa |

| Himilada | Bartilmaameed | Halbeegyada (1990) | Xogta ugu dambays (2002-2004) | Bartilmaameedka (2015) | | Ma loo xaqiijin karaa himilida(si xayi ah, aan sugnayn, xog la'aan) | Xaalad Jawi taageero (xoog, caadi ah, liidata,laakiin hagaagaysa, liidata) |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | Caalamka | Soomaaliya | | |
| | Bartilmaameed14:in la soo bandhigo baahida waddamada soo koraya ee aan badaha lahayn iyo Jasiiraha yar yar ee dalalka soo-koraya | Raad ma leh | | | | | |
| | Bartimaameed15:In si qoto dheer looga xaajoodo deymaha culayska ku haya waddamada soo koraya si lagu taabbageliyo waqti dheer | | | | | | |
| | In adeegyada deymaha la waafajiyo boqolkiiba adeegyada badeecadaha iyo dhoofitaanka dibadda | Xog ma leh/raadna ma leh | | | | | |
| | Bartilmaameed16:In la xoojiyo istaratiijiyadda awoodda wax soo saarka dhallinyarada | Istaratiijiyad ma leh | Istaratiijiyad ma leh | | Istaratiijiyad la horumaiyey lana meel mariyey | Si xayi ah | Liidata balse kobcaysa |
| | Qiyaasta dhallinyarada aan shaqayn ee da'doodu u dhxayso 15-24 , jinsi kasta iyo wadarta guud | Xog ma leh | | | | | |
| | Bartilmaameed17:In iskaashi dhexmaro Shirkadaha daawooyinka soo saara si ay bukaanka ugu sahlaan helitaanka daawooyin tayo leh oo ay awoodaan | | | | | | |
| | Dadka heli kara daawooyin tayo leh oo si joogto ah ay u isticmaali karaan | Xog ma leh | | | | | |
| | Bartilmaameed18:In iskaashi dhexmaro waaxyaha gaarka ah, si dadweynuhu uga faa'iidaystaan Tiknolojiyada casriga ah, labadaraadle warbaahinta iyo is-gaarsiinta | | | | | | |
| | Dadka heli kara telefoonka dhulka 1,000 qofba | Xog ma leh | 8.4 | | | | Xoog leh |
| | Dadka heli kara telefoonka gacanta 1,000 qofba | Xog ma leh | 1.6 | | | | Xoog leh |
| | Dadka heli kara isticmaalka Computer-ka 1,000 qofba | Xog ma leh | 0.5 | | | | Caadi |
| | Khadka shabakadaha Internet-ka | Ma jiraan | 4,500 | | | | Caadi |

# Himilada 1aad:

# In la dabargooyo Saboolnimada Daran iyo Gaajada



UNICEF/SOM96-18/Pirozzi

## Bartilmaameedka 1aad:

## In inta u dhaxaysa 1990 iyo 2015-ta la dhimo kala bar tirada dadka dakhligoodu ka hooseeyo 1 doolar maalintii

Shaxda 1.1 Milicsiga Xaaladda Dakhli iyo Saboolnimo Soomaaliya

| Halbeegga Caalamiga ah | Xogta Bilowga (1987-1990) | Xogtii u Dambaysay (2000-2002) | 2015 (Himilada HHM) |
|---|---|---|---|
| Saboolnimada Daran Dadka dakhligoodu maalintii ka yaryahay US $1 Maraykanka oo loo badalay (PPP) % | Xog lama hayo | 43.2 (53.4% - ree miyi iyo reer guura, iyo 23.5% magaalka) | 21.6 |
| Saboolnimada Guud Qiyaasta dadka hela maalintii wax ka yar US $2 oo loo badalay(PPP)(%) | Xog lama hayo | 73.4 (79.9 - reer miyi iyo ree guura, iyo 60.7% magaalka) | 36.7 |
| Saamiga Dadka ugu saboolsan ay ka isticmaalaan waddanka(%) | Xog lama hayo | 5.6 | 8.4 |

*Isha: UNICEF Somali, Sahanka gebegebada toban sano ee tilmaamayaasha kooxaha isku-dhafan, warbixinta farsamada Soomaaliya ee buuxda 2001; FOA, Sahanka Dhaqaale-Bulsho ee UNDP Somaliya/Bangiga Adduunka, 2002*

### Xaaladdu Sida ay tahay iyo Isbedellada socda

Soomaliya waxay ka mid tagay wadamada ugu saboolsan wadamada ka hooseeya saxaaraha iyadoo dakhliga qofka uga soo aada wax soo saarka dalka sannadkii uu yahay 200 doolar-kaas oo in yar uun kordhay ilaa markii xogta bilowga ah la qaaday (1985-1990)[6] markaas oo uu ahaa 170 doolar. Marka la eego heerka caalamiga ah, dakhliga qofka Soomaaliga waxuu ka mid yahay kan ugu hooseeya adduunka. Saboolnimada waxaa muujinaya hoos u dhaca sii socda ee heerka horumarka aadamiga (HDI); 1990kii wuxuu ahaa 0.2 iyadoo Soomaaliya ka gashay kaalinta 123aad 130 waddan[2] oo heerka horumarkooda la tibaaxay. 1992-kii heerka horumarka Soomaaliya wuxuu ahaa 0.217 iyadoo kaalinta 165aad ka gasahay 173-ka waddan ee lagu tilmaamay warbixinta. Warbixinta waddanka ee Horumarka Aadamiga waxay Soomaaliya ku tilmaantay inay ka mid tahay waddamada adduunka ugu saboolsan. Tilmaamaha jiraa waxay tibaaxayaan in weli Soomaaliya ka mid tahay kuwa adduunka ugu saboolsan iyo kuwa ugu hooseeya xagga horumarka. Soomaaliya kama muuqan todobadii sano ee la soo dhaafay tusmada caalamiga ah ee wadamada loogu kala sooco heerka horumarka Aadamiga.

### Saboolnimo

Sannadka bilowga xogta ma jiraan qiyaaso cayiman oo tilmaamaya tirada dadka ku nool saboolnimada ba'an, hase yeeshe qiyaasta ugu dhaw waa 60% inay ku noolyiniin saboolnimo dhammaystiran (tiradani ma ahan mid u dhiganta saboolinmada aad u daran). Sanadkii 2002, inta dadka ku nool saboolnimo guud waxay ahayd 73.4%, inta ku nool saboolnimada aad u darana waxaa lagu qiyaasay 43.2%. In ka badan kala bar dadka saboolka ahi(ka hooseeya 2 Doolar Maalintiiba)waxaana lagu qiyaasaa 73.4%. Waxayna ku urursanyihiin miyiga iyo dhulka reer guuraaga iyadoo afar meelood meelna ay ku noolyihiin magaalooyinka(53.4% iyo 23.5%). Dhab ahaan, tan micnaheedu waxaa weeye in dad dhan 2.94 milyan ay ku noolyihiin saboolnimo daran, 0.54 milyan (ama 18%) oo ka mid ah dadkani waxay ku noolyihiin magaalooyinka, 2.4 milyan am (82%) waxay ku noolyihiin miyiga iyo baadiyaha. In la dhimo dadka ku nool saboolnimada ba'an kala bar sannadka 2015 waxaa micnaheedu yahay in dadka magaalooyinka iyo miyiga ku nool ee saboolnimada darani hayso laga dhimo 21.6%, kuwa ku nool saboolnimada caadiga ahna laga dhimo 36.7%.

### Waxyaabaha Taabbagalay

- Waxaa jira dhul aan la qodan ama intii loo baahnaa ka yar la qoto oo la ballaarin karo si loo kobciyo wax soo saarka dalagga.
- Waxaa jira khayraad macaadin sida yuraaniyam iyo kaydad duugan oo aan la taaban sida Ayroon Oor, tiin, gibsam, boksayt, kobbar, iyo cusbo.
- Waxaa jira ganacsiga gaarka loo leeyahay oo leh awood dakhli iyo fursado shaqo abuurid.
- Ururrada bulshada iyo ganacsatadu waxay door muhiim ah

[2] Sahanka Dhaqaale-Bulsho ee UNDP Somaliya/Bangiga Adduunka, 2002



UNICEF Somalia

ka ciyaarayaan fidinta adeegyada bulshada iyo in la qaabeeyo horumarka si loo hagaajiyo nolol kasbashada.

- Lacagaha xawaaladda ee dadku dibaduhu soo diraan waa il dhaqaale oo muhiim ah waxayna wax ka tartaa dakhliga qoyska iyo maalgelinta.
- Waxaa la wadaa dadaal dib loogu dejinayo qaxootiga ku barakacay waddanka gudihiisa iyo dibaddisaba,iyo barnaamijyo loogu abuurayo ilo dhaqaale joogta ah dadka dan yarta ah gacana looga geysanayo in la balaariyo fursadaha soo jireenka ah ee dadku noloshooda ku helaan.
- Waxaa la abuurayaa meelo lagu barto xirfado si loo daboolo baahida loo qabo xirfado iyadoo taasi ka mid tahay istiraatijiyado lagu abuurayo shaqo, lagu horumarinayo hawalaha dakhli helidda, laguna kobcinayo qaybaha gaarka loo leeyahay. Kaabayaasha saameyta tooska ah ku leh wax soo saarka dallagga ayaa lagu hayaa dayactir si loo yareeyo halista haysata dadka saboolka ah.
- Hay'adda Horn Relief waxay waddaa barnaamijka soo kabashada hab nololeedka kaa soo ujeeddadiisu tahay in la dayactiro kaabayaasha iyo deegaanka si dadku u helaan habab kala duwan oo raaga oo ay noloshooda ku maaraystaan.
- Mashaariicda ay waddo Hay'adda Cuntada iyo Beeraha ee FAO waxay beegsanayaan in la horumariyo tacabka beeraha, suuqgeynta iyo warshadeynta. Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta Beeraha (IFAD) waxay iyaduna xoogga saartay inay caawiso dadka ku soo noqonayamiyiga iyo bulshooyinka beera qodotada saboolka ah si looga gudbo habka cunto siinta looguna gudbo horumarka aadamiga oo raaga.

## Caqabadaha


- Colaadda iyo nabadgelyo xumida ka jirta meelo badan oo Soomaliya ka mid ah waxay saameynaysaa nolol raadsiga dadka. Colaadda sii socotaa waxay siyaabo badan uga hortaagantahay Soomaalida inay dib-u-abuurtaan habab ay noloshooda ku maareystaan.
- Kaabayaasha wax soo saarku waa liitaan waana burbursanyihiin, hay'adaha maamulka iyo maareynta dhaqaaluhuna ma laha karti aqooneed.
- Waxaa caqabad Soomaalida ku ah tartanka sii kordhaya ee lagula jiro kana socda suuqyada ay Soomalidu wax soo saarkooda u dhoofsan jireen, gaar ahaan xayiraada lagu soo rogay xoolaha Soomaalida iyo siyaasadaha caalamiyeynta oo aysan Soomaalidu la jaan qaadi karin aysanna hirgelin karin waa caqabad haysta Soomaalida.
- Waxaa ciriiri ah aqoonta iyo xirfadaha dadka.
- Cunida qaadku waxay ka weecisaa hantida in loo isticmaalo baahida asaasiga ah. Sidoo kale qaad cunidu waxay si xun u saameysaa shaqada jirka iyo dhaqamada bulshada, waxay kaloona keentaa cunto qaadasho la'aanta muddo dheer.
- Dadka danyart ah gaar ahaan kuwa barakacay iyo qaxootiga ma laha qaab is caawineed ama habab ay kula tacaalaan duruufaha haysta taasoo ka dhigaysa dad sabool ah.
- Iyadoo ay xadidantahay helidda kaalmo caalami ah iyo deeq dhaqaale.

## Talooyin


Meel-marinta qaab-hawleedyada Barnaamijyada isku-dhafan ee horumarinta iyo dib-u-dhiska waxay yarayn karaan saboolnimda Soomaaliya. sidoo kale, wxay qayb ka qaadankaraan khariidaynta hoos-u-dhigidda saboolnimada iyo sidii loo taabbagalin lahaa arrimha saldhigga u ah xaalada soo noq-noqonaya ee heer qaran iyoheer gobolba saamaynya[3].

[3] Sahanka Dhaqaale-Bulsho ee UNDP Somaliya/Bangiga Adduunka, 2002

Jaantuska 1.1: Saamiga Dadka Hela Wax Ka Yar 1 Doolar Maalintii




Jaantuska 1. 2: Saamiga Dadka Hela Wax Ka Yar 1$ iyo 2$ Doolar Maalintii



Seddexdan arrimood ayaa ugu muhiimsan istraatiijiyadda lagu xoojin karo hawlgallada loo baahan yahay:

A. Barnaamij baaxad weyn oo horumarineed oo oo dib loogu dhisayo qaybo kala duwan ayaa wax ka tari kara in saboolnimda ka jirta gobollada dadka saboolka ahi degganyihiin si weyn loo dhimo.
B. Waxaa kaloo muhiim ah in la naqshadeeyo saboolnimada gacanna laga geysto in la abuuro hab lagula socdo saboolnimada laguna faaqido taas oo la socon karta duruufaha iyo caqabadaha jira.
C. Waxaa loo baahanyahay dib-u-dayactirka awooddii wax soo saarka ee ku burburtay dagaalka ahliga ah iyo colaadihii daba yiilay, gaar ahaan kaabayaasha beeraha iyo xoolaha.

- In kor loo qaado dibna loo soo celiyo ganacsigii iyo suuqgeynta xoolaha Soomaalida iyadoo la dejinayo siyaasado iyo tabo lagu hubinayo tayada xoolaha, lagu ogaanayo cuduradooda suuqna loogu raadinayo.
- Abuuridda fursado kala duwan oo dhaqaale sida warshadeynta wax soo saarka xoolaha lagu warshadeeyo waddanka gudihiisa iyo dhoofinta wax soo saarkoodu waxay kordhinaysaa furasada si joogta ah shaqo iyo dakhli lagu heli karo.
- Waxaa loo baahanyahay In la sii xoojiyo nidaamka maamulka dhaqaalaha si looga faa'ideysto caalamiyeynta socota loona caawiyo nolosha qoysaska iyo hababka ay noloshooda ku soo saartaan.
- In la taageero hababka soo jireenka ah ee nolol xoogsiga.
- In la dejiyo barnaamijyo lagu yareynayo saboolnimada kuwaas oo ku wajahan kooxo gaar ah (deegaan wada degan, isku meel ka hawlgala, isku qayb bulshana ah).
- Dejinta barnaamijyo lagu tababarayo dadka xirfado heer kasta ah.
- In loo fidiyo dadka danyarta ah deymo yar yar iyo adeeg lacageed lana taageero wixii fududeyn lahaa arrimahaas.

## Bartilmaameedka 2aad:

## In Inta u Dhaxaysa 1990-Ka iyo 2015-Ka la Dhimo Xaddiga Dadka ay Gaajadu Hayso

Shaxda 1.2 Milicsiga Xaaladda Gaajada Soomaaliya

| Halbeegga Caalamiga ah | Xogta Bilowga (1987-1990) | Xogtii u Dambaysay (2000-2002) | 2015 (Himilada MDG) |
|---|---|---|---|
| Saamiga carruurta 5 sano ka yare e culyaskoodu hooseeyo | Xog lama hayo | 26% | 13% |
| Saamiga dadka cuna cunto leh wax ka yar tamarta jirku u baahanyahay (oo dhan 1,600 kilo colarie/day) | 68 | 65% waxay helaan oo kaliya 1600 Kcal maalintii | 21.6 |

*Isha: UNICEF Somalia, Warbixinta sahanka tilmaamayaasha dhammaadka kooxaynta tobonkii sano. waxbixinta Farsamo ee buuxda ee Soomaaliya.*
*FAO, Xaaladda Badbaado la'aanta Cuntada Adduunka, 2003*


### Nafaqada

Xaaladda nafaqada ee Soomaaliya waxay maraysaa heer aan gebi ahaanba la aqbali karin marka la fiiriyo halbeegyada caalamiga ah. Halka wadamada kale ee gobolka ku yaalla ay ka jirto nafaqo daro wax ka hooseeya 10% (marka la isu fiiriyo dhririrka iyo culayska - 2.00), gobollada Soomaaliya way ku kala duwanyihiin xaddiga nafaqo darida. Sida ay tilmaamayso xogta la hayo, waqtiyada cunto heliddu caadi tahay, waqooyiga Soomaaliya heerka nafaqa darida darani waxay u dhexeeysa 5% ilaa 10% (marka la isticmaalo qiyaasta dhririrka iyo culayska - 2.00), halka koonfurta Soomaaliya ay u dhaxayso 15% ilaa 19.9%[4]. Qiyaasta nafaqo darrada sarraysa ee Soomaliya waxaa is-biirsaday arrimaha ay ka midka yihiin, Saboolnimada,Masi ibooyinka dabiiciga ah iyo dagaallada. Tani waxay qeexaysaa in qiyaas dadweynaha ka mid ah oo xaddigoodu sarreeyo ay helaan wax ka yar heeka baahida tamarta jirkoodu u baahan yahay 71%[5],iyadoo tasi ay ka sarrayso qiyaastti saboolnimad xad-dhaafkaah. saboonimada xad-dhaafka ahi waxay gaarsiisan tahay 1 doolar maalintii taasi oo aan ahayn mid macne ku dhisan, haddii aysan ku salaysnayn qiyaasta macquulka ah ee baahida asaasiga ah ee Nafaqada. marka lala xiriiriyo labo arrimood waxay noqon kartaa mid lagu wejahayo bartilmaameedka cirib-tirka Gaajada heer Qaran taasi oo ku qotonta bartilmaameedka Dakhliga Saboolinimada, iyadoo labadaba lagu qiyaasay 216% sannadka, sida ku xusan shaxdan hoos ku qoran. In ka badan 15 sano oo deganaan la'aan bulsho iyo burbur ku dhacay kaabayaashii dhaqaaluhu waxay sii kordhisay nafaqo xumida jirta, dhimashada dhallaanka iyo dhaawac is-biirsaday oo gaara caafimaadka qofka.



UNICEF/SOM01-131/Taylor

Jaantuska 1:3 Boqolkiiba Dadka Cuna Cunto Leh Wax'Ka Yar Tamartii Jirku u Baahnaa(1,600 Kcal/ Maalintiiba)




[4] FSAU, Qiyaasta Nafaqaqo-xumida waxaa loo tixraacayaa in nafaqo- darro xumi jirtay, Disember 2004
[5] FAO, Xaaladda Badbaado la'aanta Cuntada Adduunka, 2003

**Waxyaabaha Taabbagalay**

- Hababka is caawinta oo qoysasku wax ugu tarayaan kuwooda tabaalaysan ayaa dib u soo ifabaxaya.
- Waxaa la abuuray xog ku saabsan nafaqada oo taya fiican oo waddanka oo dhan wada gaartay, waxaana jira isla shaqeyn iyo is-kaashi ka dhexeeya hay'adaha taas oo keentay in qorshe fiican lagu shaqeeyo waqtiyada dhibaatooyinku jiraan lana raaco tilmaamayaasha caalamiga ah, tusaale;( FAO,SACB iyo FEWS) marka la qorsheynayo lana fulinayo hawlgal nafaqaynta carruurta la xiriirta.
- Isla shaqeynta fiican ee u dhaxaysa ururrada aan dawliga ahayn oo ku shaqeeya qaab dallado kuwaas oo xoog leh iyo hawlgallada bulshada caalamku waxay kor u qaadayaan wacyiga, waxayna abuurayaan fursado barnaamijyo nafaqeyn iyo fursado dad badan shaqo ka helaan. Dadaalo ayaa jira lagu horumarinayo beera qodoshada is loogu dhiiigeliyo bulshada inay wax soo saarkooda kordhiyaan,ee ay xeebaha ee looga fa'iidaysanayo khayraadka kallumaysiga. Waxaa kaloo arrintaan gacan ka geysanaya iyadoo uu jiro nidaam war wadaag oo intii hore ka wanaagsan oo lagu sahminayo suuqyo wax loo iibgeeyo iyo warbixin ku saabsan sicirka.
- Deeqaha cuntada ee la helay waxay u suurtageliyaan Qaramada Midoobay iyo ururrada aan dawliga ahayn inay badbaadiyaan nolosha in badan oo dadka tabaalaysan ah iyadoo loo fidinayo taageero cunto, dayactir iyo hawlo kale oo bulshada lagu caawinayo.
- Isku-xirka Hay'adda Qaramada Midoobay iyo hay'adaha caalamiga ah, aya gacan ka gaystay kobcinta nafaqada, dhiirigelinta shaqalaha, hindisayasha horumarinta beeraha. tani waxay sii xoojinaysaa dadaalka dhinaca isgaarsiinta oo hore guulo ugu tallaabsaday sida; sare u qaadista shabakadaha isku-dhafan ee wax soo saarka dakhliga suuqgaynta iyo qiimaha xogta loo baahan yahay. Intaas waxa soo raaca, Hawlaha ururrada cuntada iyo beeraha ka shaqeeya ee gudaha waddanka ka shaqeeya waxay ku wajahanyihiin in la dhiirigeliyo inay waaraan miraha waxa la qabanayo, inay bulshadu iyadu wax qabsato iyo in haweenka laga qaybgeliyo hawsha.
- Waxaa jirta kaalmo farsamo oo ay bixinayaan hay'adda Cuntada iyo Beeraha ee FAO, Hay'adda Isku-xirka macaawinooyinka Soomaaliya ee SACB, Shabakadda ka digta cunta yarida ee FEWS si kor loogu qaado waxtarka hawlaha bini'aadanimada ee la fulinayo iyo qaabka saadaalinta masiibooyinka cunto yarida.
- Laanta badbaadada carruurta ee UNICEF iyo Hay'adda



UNICEF/HQ00-0474/Chalasani

Cuntada iyo Beeraha ee FAO waxay wadaan barnaamij quudin dheeraad ah si loo yareeyo nafaqo darrida haysata carruurta.

- Baraamijka cunto shaqo ku baddalashada ee Hay'adda Cuntada Adduunka ee WFP wuxuu isku dhinac wadaa in baahida dadka ee deg-dega ah wax laga qabto isla markaana ujeeddooyin horumarineed ee muddada fog bulshada agu xoojinayo la meelmariyo. Hawlgalladaan waxaa loola jeedaa in la hubiyo in dadka danyartaa helaan cunto leh nafaqada ugu yar ee jirkoodu u baahanyahay. Waxaa kaloo cunto lagu bixiyaa tababar dadka lagu tababarayo xirfado bartilmaameed ah, dadka waaweynna lagu barayo wax qorista iyo wax akhriska iyo xirfado lagu xoogsado dakhli fiican.
- Waxaa socda barnaamijka sugidda quudka reer miyiga oo ay waddo hay'adda QM iyo hay'adaha caalamiga ah ee aan dawliga ahayn oo bartilmaameedkiisu yahay hawlgallada kaabayaasha waraabka.

**Caqabadaha**

- Ammaan darrida, iyo wax soo saarka beeraha oo hooseeya
- Ma jiraan xog habaysan oo ku saabsan khayraadka dhulka iyo biyaha iyo maareyntooda.
- Iyadoo ay yar tahay maalgalinta iyo Kaabayaasha dhaqaalaha oo liita, waxay kamid noqotay caqabadaha hortaagan gaarsiinta raashinta dadka saboolka ah.
- Iyadoo aysan jirin Maaliyad iyo Xoogga shaqaalaha oo ku filan
- Meelaha qaarkood sida dhulka webiga ee Jilib[6] waxaa liita nidaamka is taakulaynta bulshada taas oo keenta dhibaatooyin waaweyn oo nafaqo darro iyo dhimashaba leh.
- Is-bedbedelka cimilada ee aan la saadalin karin waxay keentaa abaaro iyo fatahaad waxay wax yeelaysaa sugnaanta cuntada iyo wax soo saarka beeraha.


**Talooyin**

- In la horumariyo lana dhiirigeliyo ilaha wax soo saarka si lagu horumariyo adeegyada dhaqaalaha ee ku wejahan dhinaca kaabayaasha miyiga, mashariicda yar yar ee waraabka, reer guuraga iyo waddooyinka yar yar, si loogu fududeeyo fursadaha suuqgaynta iyo helitaanka biyaha.
- In la horumariyo Teknolojiyada biyaha, hoosna loo dhigo kharajka wax soo saarka beeraha, lana abuuro dhir fra badan oo abaaraha u adkaysan karta, lana siii xoojiyo xirfadaha dhinaca beeraha; iyadoo la sii horumarinayo maaraynta hawlgallada xoolaha nool iyo kobcinta dalagyada wax soo saarka dhinacyada kala duwan.
- In la raadiyo dhaqaale dheeraad ah si loo horumariyo loona kordhiyo hawlgallada quudinta dheeraadka ah.
- In la abuuro Nidaamka Digniinaha laga bixinayo sidii uu dadweynuhu ugu diyaar-garoobi lahaa ka hortagga Daadadka.
- In la abuuro xog maxalli ah,islamakaana la xoojiyo xogta la xiriirta uruurinta Joqraafiyeed iyo xogta dheddeig-laboodka ee kala geddisan, labadaradle heer degmo.
- Baahida nololeed ee danyarta in wax laga qabto ayaa loo baahanyahay.
- In la abuuro nidaamka digniinaha looga bixinayo, iaydoo la adeegsanayo farsamooyinka/ qiyaasta samafaleed ee lagu gargaarayo dib-u-soo-kabashada bulshada qaybeheeda ay colaadaha iyo masiibooyinka dabiiciga ahi ay waxyeeleeyeen.

[6] Sugitaanka xogta Nafaqada ee FSAU, Juun-Luulyo, 2004

# Himilada 2aad:

# In la Xaqiijiyo in Waxbarashada Asaasiga ahi Wada Gaarto Caalamka



UNICEF/SOM96-03/Pirozzi

**Bartilmaameedka 3aad:**

## In la hubiyo in Sannadka 2015-Ka ay dhammaan Carruurta, Gabdho Iyo Wiilalba, meelkastoo ay joogaanba, ay awood u heleen inay si buuxda u dhamaystirtaan Waxbarashada Asaasiga ah

### Xaaladda Jirta iyo Isbedellada Socda

Sahan ay UNICEFka samaysay Dugsiyada Hoose sannadihii 2003-2004kii ayaa warbixintu sheegaysaa in 1,172 Dugsiyada shaqeeya ay tirada guud ee ardaydu ka badan yihiin 285,574 carruur ah, taas oo lagu qiyaasay 19.9% saamiga guud ee ardayda dugsida ku biirtay(GER).[7] (qaar degmooyinkaka kofurta Soomaaliya mid ah ayan fursad loo helin, iyadoo ay xaalado nabadgelyo la'aan iyo daadad ay ka jireen). Goobaha oomaaliya ka tirsan. ayaa i waxay ka mid yihiin meelaha Adduunka ugu hooseeya saamiga ardayda Dugsiyada ku biiraysa.

Si kastaba h ahatee, waxa la xusi karaa horumar lixaad leh tirada Dugsiyada shaqeeya iyo ardayda ku soo biiraysa, inkastoo weli la daeemi karo culayska kajira Gobolka ee ku wejhan dhinacyada dhaqaale-bulsheedka, dhaqanka iyo arrimaha siyaasadda. Inta badan dugsiyadu waxay ku baahsan yihiin magaalooyinka iyo nawaaxigooda, iyadoo inta badan maalgelintu ka soo gasho dhinacyada kharajyada laga qaado ardayda iyo taageerada kale ee dhinaca waalidiinta laga helo iyo bulshada deegaanka, iyadoo ay jiraan dakhliyo laga helo qaar ka mid ah hay'adaha gargaarka dibadda.



UNDPSomaaliya

Miisaaniyadda taageerada dhinaca maamulka waxbarashada, a faya-dahwr habboon, musqulo iyo biyo galin, taas oo horseedaysa saamayn tabane ah oo dhinaca Ardayda iyo Macallimiintaba oo keliya ayaa Dugsiyada Musqulo ka leh). haan mid wax ku ool ah. dhismayaasha intooda badan waxaa lagu hirgeliyey taageerada hay'adaha caalamiga ah. macallimiintu waxay mushaaraadkaak helaan kharajyad waalidiintu ay carruurta ka bixiyaa, halka buugagta waxbarashada ay bixiso hay'adda UNICEF,islamaran tababarada macalimiinta ay gacan ka gaysato UNESCO. sidoo

Shaxda 2.1 Milicsiga Xaaladda Gaajada Soomaaliya

| Halbeegyda | Xogta Bilowga (1990) | | | Xaaldda Hadda 2003/2004 | | | 2015 | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | | | Himillada caalamiga ah | Bartilmaameedka Soomaaliya |
| | Lab | Dhed | Isku dar | Lab | Dhed | Isku dar | Isku dar | Isku dar |
| Diiwaangelinta Guud ee waxbarashada Asaasiga Fasalka 1-5 % | | | 35 | 51 | 36 | 45 | 100 | 80 |
| Diiwaangelinta Guud ee Fasalada 1-8 isku dar % | 20 | 10 | 15 | 24 | 13 | 18 | 100 | 71 |
| Heerka wax akhrisqoraal ee dadka waaweyn % | 36 | 14 | 24 | 25 | 13 | 19 | 100 | 50 |

*ISHA: Q.M. Soomaaliya, Qoraalka Istraatiijiyadda kooxda wabarashada ee soo jeedinta Qaab-hawleedka Istraatiijiyadda HHM 2004; Xaaladda Carruurta Adduunka ee UNICEF, 1994; Sahanka Dugsiyada hoose ee UNICEF 2004; Warbixinta horumarinta Bini'aadamka Soomaaliya ee 2001;UNDP Soomaaliya/ Bangiga Adduunka ee sahanka dhaqale-Bulsho, 2002*

[7] Maadama aysan jirin xog sugan oo la xiriirta saamiga Ardayda dugsiyada ku biirtay ee Soomaaliya,waxa la isticmalay Saamiga Tirada Guud

kale, jaaliyadaha Soomaaliyeed ee dibadda ayaa bixiya kaharajka waxbarasha ardayda(school fees).

Waddan uu dagaal aafeeyay sida Soomaaliya, in cunug kastaa helo waxbarasho asaasi ah waa arrin aad u adag. Waxbarashada asaasiga Soomaaliya oo buuxda waxay ka koobantahay 8 sano, dugsiyada carabiga ah waa 9 sagaal sano. Waxbarashada asaasiga ah waxay badanaa ka koobantahay 5-6 sano. Laba halbeeg ayaa la isticmaalaa si loola socdo bartilmaameedyada; diiwaangelinta guud ee carruurta da'doodu u dhaxayso 6-10 sano waxay u taagantahay fasallada 1aad ilaa 5aad, kuwa da'doodu u dhaxayso 6 ilaa 13 sanana waxay u taagantahay 1aad ilaa 8aad. Soomaaliya waxay ku jirtaa wadamada ugu hooseysa xagga diiwaangelinta ee dugsiyada.


Dugsiyo fara badan ayaa loo sameeyey dhismayaal aan rasmi ahayn iyadoo ay xaddidan tahay kaabayaasha la adeegsaday. Qiyaas ahaan 63% Dugsiyada Soomaaliya waxay leeyihiin fasallo dhismayaal joogto ah leh, halka 27.6% ay yihiin kuwo dhismayaal aan rasmi ahayn ama joogto ahayn leh. qaar badan ayaa laga dhisay deegaannada reer guuraaga ah, kuwaas oo intooda badan aan taabagalin,iyadoo ay sabab u tahay taageerada dawladda oo liidata islamarkan ayasan dakhli ahaan dabooli karin bulshada reer guuraaga ah. inta badan

Miisaaniyadda dhinaca maamulka waaxda waxbarashadu waa mid aan ku fillayn baahida jirta. Adeegyada dhismayaasha ayaa inta badan lagu Hirgeliyaa ama lagu dayactira Maalgelinta hay'adaha caalamiga ahi ay bixiyaan; macallimiintu waxay mushaaraadka ka helaan lacagaha ay waaliddiintu bixiyaan, iyadoo hay'adda UNICEF ay ka caawiso Buugaagta Daabacan iyo horumarinta Manhajka, iyadoo tababarro ay hay'adda UNESCO u fidiso macalimiinta. Jaaliyadaha Soomaalida eeDibadaha ku dhaqan aya iyaguna Qoysaskooda lacagaha ay u so diraan loo adeegsada dhinaca waxbarashada. Arrintan iyada ahi, waxay saamayn tabane ah ku yeelan kartaa mar kasta oo hay'adaha caalamiga ah ay joojiyaan maalgelinta waaxda waxbarashada.


### Tirada Guud ee Diiwaangelinta Waxbarashada Asaasiga ah

Marka laga soo bilaabo 1997-kii ilaa 2004, marka laga reebo deyrtii 1998dii, waxaa ka jiray Soomaaliya koror tirada carruurta dugsiyada hoose; 1997-kii waxay tiradu ahayd 151,085 waxayna kor ugu soo kacday 285,574[8] arday sanadkii

Jaantuska 2:1 Tirada Guud ee Ardayda D/Hoose Ka Diiwaangashan




Jaantuska 2:2 Inta Waxbarashada Asaasiga ah aada Aag Kasta





| | 1997/98 | 1998/99 | 2000/01 | 2001/02 | 2002/03 | 2003/04 |
|---|---|---|---|---|---|---|
| NEZ | 21,370 | 22,670 | 26,219 | 31,030 | 37,163 | 37,647 |
| NWZ | 36,615 | 47,434 | 73,997 | 84,484 | 97,198 | 108,870 |
| CSZ | 93,100 | 77,911 | 103,560 | 142,769 | 152,447 | 139,057 |

2003/4-taas oo ah koror dhan 90% waxaana loo tiirin kaaraa korarkan waxqabadka lagu guulaystay ee bulshada caalamku sameysay si loo dhiirigeliyo in carruurtu dugsiyada tagaan. Xog ku saabsan tirada ugu danbaynta soo harta ee waxbarashada dhameysata lama hayo maadaama da'da ardayda dugsiyada aaddaa sida ay u kala qaybsanyihiin aan la hayn. Tirada xaasilka ardayda waxbarashada dhammaysata waxaa laga yaabaa inay muujinayso tirada ugu hoosaysa dunida[9].

[8,9]Sahanka D/Hoose ee UNICEF Somaliya 2004

Jaantuska 2:3 Isku-dheellitirka Hannaanka Dhammaystirka waxbarashada Wiilasha iyo Gabdhaha 1997




**Santuukha 2.1 Labada Jiil ee Khasaartay**[39]

Soomaaliya waxaa soo waajahday ayaan-darro aan ku koobnayn hal jiil ee taabatay "laba jiil" oo aan lahayn haba yaraatee waxbarasho ama xirfad ay wax ku soo saartaan ama uga qaybgaalan hoggaaminta waddanka. Khasaaraha "raasumaalka aqooneed ee dadka" waxay qiimo weyn ugu kacday qoysaska iyo bulshada isku deyaysa inay dib-u-dhisaan dhaqaalihii iyo dawladnimadii ka burburtay. Waxay si weyn caqabad ku tahay dadaalka gudaha waddanka laga wado in hubka laga dhigo dhallinta hubaysan kuwaas oo aqoon la'aan darteed ay dhib tahay inay waqtiga nabadda xoogsadaan. Waxay tani caqabad ku tahay in la abuuro hannaan wanaagsan oo siyaasadeed oo laga wada qaybgalo, iyo in qof kastaa xaq u helo waxbarashada asaasiga ah iyo fursadaha laga helo waxbarashada.

*(Warbixinta Horumarinta Aadamiga ee UNDP Somaliya, 1998, 68)*

Inkastoo tirada guud ee ardayda dugsiyada tagtaa uu kordhay marka la barbardhigo intii ay ahayd dagaalka ka hor, haddana 11.8% kaliya ayay korartay intii u dhaxaysay 1997 iyo 2003/4 oo ay gaartay 18.0%, welina diiwaangelinta waxabarashada asaasiga ah waa heerka ugu hooseeya marka loo fiiriyo caalamka.

In ka badan 74% tirada guud ee diiwaangashan waxay ku jiraan heerka hoose ee wabarashada asaasiga ah (fasalka 1aad ilaa 4aad), 26% kaliya ayaa ku jirta heerka sare ee waxbarasahda asaasiga ah (fasalka 5aad ilaa 8aad).

### Qiyaasta Ardada Gaarta Fasalka 5aad

Waxaa lagu qiyaasa in 54% kaliya oo ka mid ah ardada loo diiwangeliyo fasalka koowaad ay u gudbaan fasalka 5aad. Arritaan waa iska caddahay; marka ardadu fasal ka gudbaan oo mid kale u sii gudbaanba in badan ayaa waxbarashada ka harta. Heerka ka haritaanka dugsiyada carabiga wax lagu barto way hooseysaa marka kuwa kale loo fiiriyo.

Diiwangelinta iyo sii wadashada waxbarashada waxaa u sababa arrimo badan; sida tas-hiilaadka, helitaanka awood dhaqaale iyo ammaanka. In ku dhaw 63% qoysaska ayaa sheegay in la heli karo waxbarasho asaasi ah laakiin 15% ayaa sheegay in la heli karo waxbarasho dugsi sare. Intaas waxaa wehlisa, in 58% ay sheegeen inay awoodi karaan waxbarashada asaasiga ah iyadoo in ka yar saddex meelood meel dadkaas ka mid ahina (14%) ay sheegeen inay awoodaan waxbarasho dugsi sare.


Masaafada dhex dhexaadka ah ee loo socdo dugsiga hoose (waa 0.8 kiilo mitir, halka dugsiga sare ay tahay 1.5 kiilo mitir)[10].

Nabadgelyo xumida ka jirta koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya waxay caqabad ku tahay in ardadu dugsiyda aadaan[11]. Heerka hoosaynta diiwaangelinta waxaa qayb ahaan loo aanaynayaa tas-hiilaad waxbarasho oo aan jirin gaar ahaan meelaha miyiga iyo iyo reer guuraaga.

### Heerka Wax Qoridda Iyo Wax Akhrinta Ragga Iyo Dumarka (15 Sano Iyo Wixii Ka Sarreeya)

Soomaaliya weli waxay kaga jirtaa caalamka meesha ugu hooseysa xagga wax qoridda iyo akhrinta. Iyadoo tirada dadka waxa qora waxna akhriya waddanka ay guud ahaan gaareyso 19.2%, tirada dadka waaweyn ee wax qora waxna akhriya way

Jaantus 2.4: Qiyaasta waxbarashada dadka waaweyn (15 sano ka sarreysa)




[10,11] Sahanka Dhaqaale-Bulsho ee UNDP Somaliya/Bangiga Adduunka,2002

ka yartahay meelaha magalooyinka ka baxsan.Tirada haweenka qaangaarka ah ee wax qora waxna akhriya miyiga iyo dhulka reer guuraaga aad ayay u hoosaysaa waana 6.7% kaliya.

### Waxyaabaha Taabbagalay

- Waxaa jira soo kobac fiican oo xagga kaabayaasha ah oo ay bulshadu caalamku suurtagelisay iyadoo la sameeyay dayactir qiimo jaban iyo qalabayn, dugsiyo cusubna la dhisay, iyadoo tayaynta waxbarashadu way kasoo raysay iyadoo manaahijta waxbarashada, buugaagta dugsiyada iyo imtixaanadaba la isla jaangooyay lana mideeyay, lana xoojiyey tababarrada macalimiinta.
- Ka hor dhismaha dawlad dhexe, dadweynaha Soomaaliyeed, waxay hirgeliyeen Guddiyada waxbarashada Bulshadu(CECs) inkastoo aysan u helin ilo dhaqaale oo ku habbooo
- Ka dib marka la isticmaalo agabka iyo awoodda dugsiyada jira hadda, waxaa loo baahanyahay in la dhiso dugsiyo kale si loo diiwaangeliyo tirada ardada oo sii badanaysa.
- Maadaama aysan jirin waxbarasho lacag la'aan ah ama la kabo, suurtagal ma aha in bartilmaameedyada la dejiyay la gaaro. Sidaa darteed waa in la dejiyo qaab dakhli ururin oo horumarsan loona qoondeeyo waxbarashada ugu yaraan 5% dakhliga soo gala waddanka ama maamulada lana sameeyo nidaam qarash wadaag oo tartiib tartiib ah si bulshada iyo maamulladu ugu danbaynta masuuuliyadda kobcinta iyo joogtaynta waxbarashada ay inteeda badan la wareegaan.

### Caqabadaha

- Ammaanka liiq liiqanaya iyo colaadda socotaa waxay xannibaysaa tegidda dugsiyada meelo badan,islamarkaana waxaa aad u hooseeya adeegyada waxbarashada-Qalabka waxbarashada iyo dhismayaashaba.
- Farqi weyn oo jinsi ayaa ka jira xagga diiwaangelinta ardada iyadoo tirada gabdhaha dugsiyada ka haraa ay aad u sarreyso. khariidadeynayo si loo ogaado waxna looga qabto farqiga jira.
- Ma jiraan macalimiin tababaran oo ka hawlgala dugsiyada hoose, mushaarka macalimiintu waa hooseeya.

### Talooyin


- Waxaa iyana la isla jaangooyay tababaridda macalimiinta si loo buuxiyo farqiga jira ee barayaashaislamarkaana la taabbagaliyo mugga iyo inta ay qaadi karaan dugsiyada jira waxay u baahantahay in la sahmiyo lana sameeyo qaab lagu meel-marayo nidaam waafaqsan dakhliga waxbarashada iyo maalgelin ku habboon, iyadoo lala kaashanayo qaababka kharaj-wadaagga ah ee lagu baahinayo hannanaka tacliinta,kuwaas oo sii kobcinaya heerka tayeynta waxbarashada guud ee dalka.
- In la hordhiyo Buugagta Daabacan ee waxbarashada loo adeegsado iyo Agabka waxbarashada.
- In sare loo qaado wacyigelinta dadka kaalimaha muhiimka ah ka cayaara kuna hawlan waxbarashada iyo bulshooyinka si ay u dareemaan qiimaha waxbarashada iyadoo xoogga la saarayo in goobta waxbarashadu noqoto mid munaasib u ah ardada labada jinsiba, kuna dhiirigelisa ku sii waaritaanka waxbarashada, lana kobcinayo heerka xaddiga Haweennka aqoonta sare leh ee macalimiinta noqonaya, sida ay xustay UNICEF Somalia sahankii ay ka samaysay (2004) taas oo 11.6% inay macalimiintu haystaan shahaado dugsi sare oo keliya, halka 4.7% ay ka hastan macallimiinta shahaado Jaamacadeed.
- In la xoojiyo olalayaasha dhiirigelinta bulshada ee mudnaansiinta waxbarashada.
- In sare loo qaado isku-dheellitirka dheddig-laboodka dhinaca waxbarashada, iyadoo mudnaan gaar ah la siinayo siyaasadda dhiirigelinta macalimiinta dheddigoodka ah.
- In laga sameeyo quudin dugsiyada si loo dhiirigeliyo is diiwangelinta ardayda dugsiyada asaasiga ah.
- In loo diyaariyo manhaj u gaar ah ardayda xoola-dhaqatada ah iyo bulshada reer guuraagga ah, si loo waafajiyo deegaanka iyo baahidooda.
- In fursado loo abuuro ardayda Dugsiyada ka saaqida, loona abaabulo waxbarashada dadka waaweyn iyo xirfadaha sahlan ee farsamada gacanta,kuwa dhaafay marxaladda ku biiritaanka dugsiyada hoose. iaydoo fursado dheeraad ah loo samaynayo dhallinyada iyo kooxaha hubaysan ee magalooyinka,loona fidiyo waxbarashada dadka waaweyn iyo tababarro la xiriira dhinaca farsamada gacanta, islamarkaana sare loo qaado heerka waxbarashada haweenka iyo guud ahaan daka waaweyn, iyadoo sare loo qaadayo shaqo siinta waaxyaha dadban.

**Waxaase aad u suurtagal ah in lagu dhawaado oo diiwangelinta la gaarsiiyo 71%, waxayse taasi ku xirantahay in kaalmo iyo adduun dheeraad ah oo u dhexeeya 300 ilaa 350[12] milyan oo doolar la helo si loo caawiyo kaabayaasha dhismo ee waxbarashada, loo tababaro macalimiinta mushaarna loogu helo, loona qaybiyo buugaagta waxbarashada uwm.**

[12] Warbixinta Q.M. ee Kooxda waxbarashada,2004

# Himilada 3aad:

# In kor loo Qaado Sinnaanta Jinsiga Awoodna la Siiyo Dumarka



UNICEF/SOM01-14/Pirozzi

## Bartilmaameedka 4aad:

## In meesha laga saaro farqiga u dhexeeya Labka iyo Dhedigga ee ka jira Waxbarashada Asaasiga iyo tan Dugsiyada Sare Sida habboon Sannadka 2005 iyo Heer Kasta Haddii la awoodo Sannadka 2015-Ka

### Xaaladda Jirta Iyo Isbedellada Socda

Kala mudnaan siinta jinsigu waxay salka ku haysaa caado dhaqaameedka bulshada Soomaalida waxayna xanibaad weyn ku tahay inay haweenku ka qaybgalaan go'aan gaarista iyo inay helaan hanti u gooniya oo ay ayagu maamushaan. Ka qaybgalka haweenka ee talada iyo dhawrista xuquuqdoodu way ka hooseeyaan heerka ay aqoonsanyihiin heshiisyada caalamiga ah sida kan Dabargoynta Dhammaan Noocyada Dumarka lagu Takoorka(CEDAW)[13] iyo Bayaanka iyo Qorsho hawleedka Beijing.[14]


UNICEF Somalia

HHM, waa tallaabo lagu xaqiijinayo awooodaynta Dhaddig-laboodka Soomaaliya. Arrintani waxay yarayn doontaa farqiga dheddig-laboodka, taas oo lala xiriirinayo Istraatiijiyadda Horumarinta qaranka, islamarkaana lagu yaraynayo siyaasadaha Saboolnimada la xiriira.

### Saamiga Gabdhaha Iyo Wiilasha Hela Waxbarashada Asaasiga Ah, Tan Sare Iyo Mid Jaamacadeed

Tirada gabdhuhu way sii yaraataa marka fasal kor loo sii kacaba; tusaale ahaan fasalka koowaad gabdhuhu waa 38% dugsiyada Soomaaliga (kuwa carabigana 41%) halka 26% ay yihiin gabdho fasalka 8aad (dugsiyada carabigana 32%). Guud ahaan 31% ayaa ah gabdho waxbarashada asaasiga ah heerkeeda sare halka 26% ay yihiihin gabdho ardada heerka hoose ee waxbarashada asaasiga ah (sannadka 2004).

Farqiga u dhexeeya labada jinsi ayaa sii kordhaya. Waxaana sii badanaya guurka xilliga hore ee gabdhaha iyo waqtiga Fasallada la gelayo oo maqnanshahoodu badan yahay, iyadoo dhaqaala xumidu ay gabdhaha u horseeday inay waxbarashada ka tagaan, ayna hoosayso tirada ardayda Dugsiyada sare iyo Tacliinta sare ku biiraya, mana jirto xog si fudud loo heli karo oo si gooniya u quseysa jinsiga.

Shaxda 3.1 Milicsiga Xaaladda Jinsiga Soomaaliya

| Halbeege | Xogta | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | Xogta Bilowga (1987-1990)% | Xogtii u dambaysay (2002-2003) | 2005 Bartilmaameedka | | 2005 Bartilmaameedka | |
| Inta dhedigah eek u soo aadaysa % labah ee dhigaba waxbarashda hoose | Xog lama hayo | 54 | 100 | 60 | 100 | 100 |
| Inta dhedigah eek u soo aadaysa % labah ee dhigaba waxbarashda dugsiga sare | Xog lama hayo | 27 | 100 | 30 | 100 | 100 |
| Inta dhedigah eek u soo aadaysa % labah ee dhigaba waxbarashda jaamasadeed | 22 | 18 | - | - | 100 | 100 |
| Inta dhedig qaangaarah ee wax qorta waxna akhrisa eek u soo aadysa % labah ee wax qora wax naakh riya | 38 | 52 | - | - | 100 | 100 |

*ISHA: WarbixintaUNDP ee Horumarinta Bini'aadmiga,2001, Somaliland tiro ahaan,2004; Puntland xaqiiq iyo tiro sugan,2005; Bartamaha iyo kofurta xaqiiq iyo tiro sugan,2005;sahanka dhaqaale-bulsheedka Soomaaliya ee UNDP Soomaaliya/Bangiga Adduunka*

[13] 1979kii ayuu Dhaqan-geliyey Goalaha Guud ee Q.M.
[14] Shirweynihii Afraad ee Caalamiga ahaa ee Haweenka ee Sebtember 1995

**Santuukha 3.1 Wax Qorista iyo Akhrinta Haweenka**

Wax qoris-akhrinta iyo waxbarashada asaasiga ahi waxay awood u siinaysaa haweenka inay ka qaybgalaan hawlaha nolol raadsiga iyo wax soo saarashada waxayna ka caawinaysaa in aan la dulmin si xunna loo adeegsan iyo in ay kaalin firfircoon ka ciyaaraan xallinta khilaafaadka.

*"Waxa laga soo qaatay shabakadda MDG-cprp-net Global Discussion" qulqulatooyinka la xariira horumarka, xaaladda MDG-ska ee meelaha dagaallada iyo jawiga musiibooyinku ka jiraan-3 Luulyo 2004)*

### Tirada Wax Qorta Waxna Akhrisa Marka La Isu Fiiriyo Dhedig Iyo Lab (15 sano iyo wixii ka sarreeya)

Tirada dhedigga ee wax qorta waxna akhrisa hoos ayay uga soo dhacday intii ay ahayd dagaalka ka hor oo ahayd 14% waxayna hoos ugu dhacday 13%[15] sannadka 2002.Tiro soo kordhaysa oo ah gabdho iyo dumar reer miyi ah iyo kuwa ka tirsan kooxo laga tirada badanyahay ayaa hadda heli kara waxbarasho dadban iyo barnaamijyo qoraalka farta iyo akhrinta lagu baranayo, hase yeeshee heerka haweenka wax qora waxna akhriya weli waa hooseeyaa, gaar haan dhulalka miyiga oo inta wax akhrisa waxay yihiin 6.7% .



UNICEF/SOM01-110/Taylor

### Saamiga Haweenka ka Helaan Shaqooyinka Mushaarka Bixiya

Waxaa sii kordhaya ka qayb qaadashada haweenka ee hawlaha dhaqaale raadsiga iyagoo la wareegay kaalinta u soo xoojinta qoysaska; haweenka garoobada ah ee laga dhintay ama la furay waxay kaligood la wareegeen masuuliyadda qoysaskooda. Haween badan waxay duruuftu ku qasabtay inay ka shaqeeyaan shaqooyin gaar ah oo dhib badan maadama ayna waxba akhrin karin waxna qori karin, tusaale ahan; inta badan waxay ka shaqaystaan Qaadka tafaariiqda ah ee suuqyada, taas oo ka xannibtay in ay helaan fursado shaqooyin xirafadeed sida tusaale ahaan inay ka shaqeeyaan shirkadaha xawaaladaha iyo kuwa isgaarsiinta. Badanaa waxay dumarku qabtaan shaqooyin looga sareeyo oo aysan iyagu madax ka ahayn.

[15]Sahanka D/Hoose ee UNICEF Somaliya, 2004

[16]Axdiga Federaalka ku-meel-gaarka ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya, Febraayo, 2004


### Ka Qaybgalka Baarlamaanka

Sida badan, ka qaybgalka haweenka ee nooc kasta oo dhisme siyaadeed ah waa hooseeyaa Soomaaliya. Laakin horumar yar ayaa laga sameeyay sidii haweenku uga qabygeli lahaayeen go'aan gaaridda[16]. Markii ugu horerysay, Somaliland waxaa jira laba dumar ah oo wasiiro ah iyo haweeney ah agaasime guud isayadoo maamulku ballan adag ku qaaday in haween laga qaybgaliyo Ururrada bulshada Rayidka , gaar ahaan, dalladaha haweenku waxay kaalin muhiim ah ka ciyaaraan bulshada daryeelkeeda iyagoo olole ugu jira in haweenku kaalin ku yeeshaan siyaasadda lana dhawro xuquuqdooda.

### Waxyaabaha Taabbagalay

- Haweenku waxay kaalin muhiim ah ka qaataan wax soo saarka qaybaha ugu ballaaran, gaar ahan dhinaca reer miyiga, islamarkaana waxay xoogga saaran hawlgallada heer-nololeedka ee suuqyada ganacsiga.
- Waxaa kale oo sare u kacay heerka go'aan qaadashada iyo abuuritaanka kharajyada qoysaska ee ay haweenku ku lugleeyihiin, iyagoo kaalin mug leh ka qaata maamulka maaliyadda, taas oo isbedel ku samaysay mas'uuliyadda dhaqaalaha bulshada ee kaalinta dheddig-laboodka, iyadoo la aqoonsaday doorka wax soo saarka ee ay haweenku la wadaagaan ragga. arrimahaas ayaa waxaa sii xoojiyey dhismaha shabakadaha Nabadda iyo Xuquuqda bini'aadmiga, kooxaha u ololeeya arrimaha shuruucda iyo hay'adaha an dawliga ahayn(NGOs) iyo Ururrada haweenka, kuwaas oo kaalin ku yeeshay isbedellada dib-u-soo-kabashada heer qaran, mashaariicda yar yar ee dhaqaale kobcinta iyo dhaqalaha lagu horumariyo qoysaska ee asaasiga ah.
- Ururrada caalamiga ah gaar ahaan UNDP/UNIFEM waxay sii wadaan inay gacan ka geystaan hawlaha awood siinta dumarka, iyagoo kor u qaadaya wacyiga ku saabsan xuquuqda dumarku leeyihiin una doodaya in laga qaybgeliyo maamulka iyo horumarka dhaqaalaha. Dhammaan barnaamijyada Qaramada Midoobay waxa lagu daray qayb dhextaal ah oo jinsiga quseysa.

Jaantus 3.1: Qiyaasta waxbarashada dadka waaweyn eed heddig




- Sannadkii 2006-da, waxa hal gabar ah ayaa ka qalin jabisay Kulliyadda Sharciga Hargaysa Somaliland, taas oo tirada Qareennada dheddig ka dhigaysa labo. dhawridda xuquuqda aadanaha.

## Caqabadaha

- Takooridda jinsigu waa caado soo jireen ah oo ku xididdaysatay dhaqanka bulshada Soomaaliyeed taas oo xanibaad ku ah inay haweenku ka qaybgalaan hababka rasmiga ah ee talada lagu gooyo iyo hay'adaha go'aan gaaridda, islamarkana ay sii kordhayaan farqig u dhexeeye dheddig-labood ee dhinaca dhaqaalaha.
- Haweenku awood yar ayay ku leeyihiin maamulka hantida qoyska, gaar ahan lahaanshada dhulka taas oo caqabad ku ah inay helaan hanti ay damiin ahaan u dhigtaan si ay u helaan deyn ay wax ku maalgashadaan una yeeshaan shirkado ganacsi waaweyn.
- Ma jirto fursado waxbarasho dadban oo ay ka faa'ideystaan gabdhaha qaangaarka ah ee dugsiyada ka haray, waxaana yar inta haweenka wax akhrisa waxna qorta, waxaana xaddidan fursadaha waxbarashada dadban ee haweenka.
- Xadgudubka haweenka lagula kacaa waa mid weli baahsan, iyadoo Gudbniinka Xubnaha taranku(FGM)uu weli sii soconayo.
- Halista ammaan la'aan waxay caqabad ku tahay fursadaha haweenka ee dhaqaalaha iyo ganacsiga ay uga qaybgeli karaan.
- Dumarku weli waa shibbanayaal qoyska gudihiisa inkastoo madax bannaanidooda dhaqaale korortay.
- Ururrinta xog kala dhig dhigan oo jinsiga quseysaa ma jirto, yaas oo caqabad ku noqotay darasadaha dhinaca dheddig-laboodka la xiriira.





## Talooyin

Waxaa jira baahi ku wejahan siyaasadda qaranka ee isku-dheellitirka dheddig-laboodka iyo awoodaynta Dumarka, taas oo xuddun u noqon doonta in la xoojiyo kalinta ay ku leeyihiin hannanka dawliga ah iyo barnaamijyada dhaqangelinta hawlgallada xasaasiga ah ee dhinaca dheddig-laboodka khuseeya. waxaana si gaar ah loo soo jeediyey arrimaha hoos ku qoran:

- Waxaa loo baahanyahay olole xoog lehoo dib-loogu-eegayo aragtida tabanaha ah,iyadoo la dhawrayo horumarinta xuquuqda carruurta gabdhaha ah iyo haweenka.
- Barnaamijyo tijaaba ah oo dugsiyo gabdhaha u gooniya lagu sameynayo ayaa loo baahanyahay.

Jaantus 3.2: Ka qeybgalka haweenka shaqada aan beeraha ahayn 2002





*Isha: Sahanka Dhaqaale-Bulsho ee UNDP Soomaaliya/Bangiga Adduunka, 2002*

- In la kordhiyo lana dhiirigeliyo arrimaha warbaahinta xasaasiga u ah ee dheddig-laboodka iyo is-gaasiinta(ICT).
- In la meelmariyo in si isle' eg haweenka iyo ragguba uga qaybgalaan gudiyada waxbarashda bulshada.
- In haweenku ka qaybgaalan qorshayna iyo maamulka khayraadka heerka bulshada, degmada, gobolka iyo heer qaranba.
- In barnaamijyada loo dejiyo hab ku dhisan xuquuq u adeegid si wax looga qabto sinnaan la'aanta jirta.
- In la dejiyo nidaam dhisan iyo awood farsamo oo lagu ururinayo xog kala dhig dhigan ee jinsi, lagulana soconayo laguna faaqidayo jinsiga si barnaamijyda horumarineed ee qaranka ama waaxeed ay uga tarjumaan sinnaanta jinsiga.
- In loo dhaqaaqo korna loo qaado wacyiga si ay haweenku u yeeshaan xuquuq sharci iyo mid bini'aadam, tusaale ahaan; labo xubnood oo ka tirsan xafiiska haweenka iyo dhallaanka oo imminka ka hawlgalaya hay'adda UNDP; iyo labo saldhig Booliis oo hargaysa ku yaalla. waxqabadka dhabta ahi, waa inay ka ilaaliyaan Gabdhaha xad-gudubyada Gudniinka FGM-ka.
- In sare loo qaado xirfadaha hay'daha iyo awoodaynta farsamada lagu soo uruurin karo, islamarkaana lagula soconayo xogta baahsan ee dheddig-laboodka islamarkaana celcelisyo lagu sameeyo barnaamijyada heer qaran iyo waaxyaha dalka ee la xiriira.rka iyo hawsha guriga oo ay masuul ka yihiin.
- In sare loo qaado kalsoonida iyo dhiirigelinta.
- In la xoojiyo awoodda wax akhrin iyo qoris ee haweenka.

# Himilada 4aad:

# In la Yareeyo Dhimashada Dhallaanka



UNICEF/SOM96-32/Pirozzi

## Bartilmaameedka 5aad:

## In saddex meelood laba meel la dhimo tirada dhimashada Carruurta Da'doodu ka hooseyso 5 Sano

### Xaaladda Jirta Iyo Isbedellada Socda

Soomaaliya waxay ka mid tahay wadamada ugu sarreeya xagga dhimashada carruurta.

### Dhimashada Dhallaanka

Sahanka kooxaynta tilmaamayaasha isku-dhafan(MICS) ee ay samaysay UNICEF sannadkii 2000, Dhimashada dhallaanka dhab ku jirkaa 132-dii ka mid ah 1,000 cunug ee nolol ku dhasha ayaa ka dhiman jirtay ka hor inta aysan gaadhin da'da sha sano iyadoo sidoo kale Dhallaanka ka hooseeye shanta sano(U-5MR) lagu qiyaaso 224-kii cunug ka mid ah 1,000-kii cunug ay iyaguna dhintaa ka hor inta aysan gaadhin shan sano). asoomaaliya xilligan, waxaa lagu tilmamaaa inay ku sugan tahay xaaladda ugu liidata caalamka marka loo eego daryeelka caafimaadka asaasiga ah ee ay Hooyada iyo dhallaanku u baahan yihiin.

In ka badan afar meelood meel dhimashada dhallaanku waxay dhacdaa usbuuca u horeeya noloshooda sababo la xiriira uurka, dhalida ama labadaba. Waxaa xaaladda ka sii daray xaaladda deegaanka oo liidata taas oo horseeda dhalmo aan bed qabin, fayo dhawr la'aan iyo tas-hiilaad daryeel caafimaad la'aan. Intaas waxaa sii wehlisa inaan laga heli karin tallaal xarumaha caafimaad ee deegaanada miyiga ama kuwa u dhaw dhaw taas oo sababta dhimasho badan. Kala duwanaansho jinsi ayaa jirta xagga dhimashada.

Waxaa jirta cadeymo isa soo taraya oo muujinaya in carruurta xanaanadooda la dayaco maadamaa qoysasku ay ku mashquulsanyihiin nolol goob si qoysku u noolaado. Marar badan masuuliyadda xannaanada carruurta waxaa lagu wareejiyaa carruurta yar yar ee la dhalatay kuwaas oo aqoon iyo xirfad yar u leh xannaanada hagaasan ee carruurta. Mid ka mid ah sababaha dhimashada dhallaanka dhabta ku jira waxaa weeyo nafaq xumida. Dhimashada dhallaanka wuxuu si toos ah ugu xiranyahay caafimaadka hooyada.


Nafaqada dhallaanka ayaa dhibaatooyin lixaad leh kala kulma Soomaaliya iyadoo 25% ay carruurta miisaankoodu hooseeyo( celcelis ahaan iyo xaalad ba'an). waxaa kale oo aad u hooseeya helitaanka fursadaha cuntada, taas oo inta badan ay saamayn ku yeesheen Abaraha iyo colaadaha, islamakana ay liidato tayada xaddiga noocyada kala duwan ee nafaqaa. Sidoo kale hababka quudinta iyo naas-nuujinta iyo maarayn la'aanta arrimaha qoyska, ayaa sii xumaynaysa halis badan oo xaaladda dhallanka barbaabrintooda la xiriirta. Waxayna dhibaatadu ugu badan tahay dadka tabaalaysan, sida; Dadka gudaha ku bara-

Shaxda 4.1 Milicsiga Xaaladda Badbaadada Dhallaanka Soomaaliya

| Halbeeg | Xogta | | | |
|---|---|---|---|---|
| | Xogta Bilowga (1987 - 1990) | 1995 | Xogtii u danbaysay (1997-2002) | 2015 (Himilada MDG) |
| Carruurta 5 sano ka yar ee dhimata 1,000-kii nolol ku dhalataba | 275 | 211 | 224 | 92 |
| Tirada dhallaanka dhinta 1,000-kii nolol ku dhalataba | 152 | 125 | 132 | 51 |
| Saamiga carruurta 1 sano jirka ah ee hesha tallaalka jadeecada (%) | 30 | Xog lama hayo | 45 | 100 |

*Isha: UNICEF Soomaaliya, celceliska xaaladda Carrurta iyo Haweenka Soomaliya, 1991; UNICEF, Xaaladda carruurta Adduunka 2004; UNICEF Soomaaliya Sahanka gebegebada toban sano ee tilmaamayashakooxaha isku-dhafan, Warbixin buuxda ee farsamo ee Soomaaliya 2001; Warbixinta Horumarinta Aadamiga ee UNDP Somaliya, 2001*

Jaantuska 4.1: SaamigaDhimashada ilmaha 5ta sano ka yar




kacay(IDPs), iyadoo cuntada noocyada ugu muhiimsan ee ay khudaarta cagaaraniyo caanuhu ay ka mid yihiin, kuwaas oo aad ugu yar, islamarkaana aysan awoodin gadashada noocyada cuntada nafaqada leh ee dibadda laga keeno oo aad qaali u ah.

Marka ay qoysasku ku mashquulsan yihiin dadalka la xiiira sidii ay nolosha ula halgami lahaayeen, waxaa mararka qaarkood mas'uuliyadda daryeelka caafimaadka carruurta la wareega dadka qaraabada ah, kuwaas oo aanaqoon wanaagsan u lahayn xilfadaha xannaanada iyo daryeelka ay dhallanku u bahan yihiin.

**Santuukha 4.1 "Xannaanada Hooyadu waa Xannaanada cunugga"**

Carruurta ka yar shan sano waxay boqolkiina boqol ku tiirsanyihiin hooyada. In laga xaqiijiyo caalamka oo dhan waxbarashada asaassiga ah , sinnaanta jinsiga iyo awood siinta haweenka waxay lama huraan u yihiin yaraynta dhimashada carruurta.

## Tallaalka Jadeecada ee Carruurta 1 sano jirkaa

Sahanka ay wadajir u sameeyeen WHO iyo UNICEF ayaa tilmaamaya in si joogto ah sannad walba ololaha tallaalka carruurta, siiba goobaha magaalooyinka, islamarkaana laga soouruuriyo xog la xiriirta cudurrada iyo noocyada cudurrda la is-qaadsiiyo sida; Qaaxada, HIV/AIDS-ka,Daacuunka iyo Tayfoodka. Ilaa 1997kii WHO iyo UNICEF waxay tallaaleen ugu yaraan Tirada carruurta gaaraysa 1.3 milyan oo laga tallaalay Cudurka dabaysha sanad walba, iyadoo loo qaybiyey Fitamiin A labo goor sanadkiiba, taas oo al xiriirta waxqabadka waafaqsan adeegyada lagu xoojinayo tallaalka carruurta(SIAs) iyo daryeelka xanuunka daran ee dhinac-wareenka ama dhinac-qalalka ee Barnaamijka ka hortagga.

## Waxyaabaha Taabbagalay

- Waalidiintu waxay qayb weyn ka qaateen wacyigelinta dadweynah, taas oo wax weyn ka tartay in xaaladda nafaqo ee dadka taagta daran ay ka soo rayso, lana horumariyo hawlgallada caafimaadka, saboolnimada baahsan si xal ugu helaan kharajyada daaweynta dhallaankooda.
- Barnamijyada y'adaha Caalamiga ah ee waxay hirgeliyeen barnaamijyo kaalmo cunto,Vitamins iyo nafaqayn lagu siinayo gaar ahaan dadka barakacay iyo dhaklIaanka tabaalaysan ee xeryaha qaxootiga ku jira.
- Sanadkii 2002, laba wareeg oo dardargelinta tallaalka dabaysha ah (EPI) ayaa laga sameeyay magaalooyinka waaweyn, waxayna hay'adda Isbahaysiga Caalamiga ee Tallaalka iyo Tallaaliddu (GAVI) Soomaaliya u ogolaatay kaalmo si loo horumariyo loona ballaariyo hawlaha tallaalka ee joogtada ah kor loogu qaado badbaadada tallaalka.
- Sannadki2006, hay'adaha gargaarku waxay sii kordhiyeen ololaha tallaalka Magaalada Muqdishu, kaddib markii horumar laga gaadhay dhinaca nabadgalyada.

## Caqabadaha

- Iyadoo ay aad u sarrayso qiimaha daawada iyo dadka heli kara adeeg caafimaad, taas oo caqaba weyn ku noqotay kobcinta daryeelka caafimaadka asaasiga ah.
  haweenka ay ka dhaliyaan shaqaale xirfad leh.
- Iyadoo ay aad u sarrayso dhimashada dhallanka goobaha reer miyiga ah, maadaama aysan si fudud ku heli karin fursadaha caafimaadka ama ay qaban nafaqo-darri ba'an.
- Guud ahaan waxaa aad u liita shaqaalaha xirfadaha leh ee Goobaha caafimaafka.
- Iyadoo ay aad u yar tahay hawlgallada xiriirinta tababarrada imminka jira.
- Iyadoo ay aa d u yar tahay wacyi-gelinta ololayaasha dhinaca tallaalka.

## Talooyin

- In xarumaha daryeelka iyo hooyada loo soo dhaweeyo dumarka si ay adeeg caafimaad uga helaan, loona yareeyo heerka dhimashada, lana xoojiyo istraatiijiyadda hagaajinta nadaafadda, faya-dhawrka iyo la dagaalanka HIV/AIDs-ka,

Duumada iyo cudurrada kale. Haddii ay Soomaaliya ay meel marinayso HHM-ka


- In la sii kordhiyo wacyigelinta nafaqaynta la siiyo hooyooyinka iyo daryeelayaasha carruurta si loo hagaajiyo hababka xanaanada carruurta.
- Waxaa muhiim ah in xoogga la saaro in la dejiyo hannaan isku dhafan oo isugu jira daryeelka caafimaadka hooyada iyo dhallaanka iyo nafaqayn laga sameeyo heerka bulshada iyadoo la adeegsanayo xarumaha dhallaanka iyo hooyada.
- In ololaha tallaallka la kordhiyo laguna dhiirigeliyo hooyooyinka inay is tallaalaan ubadkoodana tallaalaan.
- In la sii hagaajiyo faya dhawrka iyo helitaanka biyo nadiif ah oo la cabbo.
- In la sii kordhiyo barnaamijyada cuntada dheeriga ah lagu qaybinayo.
- In la sii horumariyo sida lagu maareeyo Nafaqaynta carruurta iyo Vitamiinada ay u bahan yihiin.laguna xakameeyo shubanka iyo cuduradda neef mareenka.
- In lagu baahiyo Tababarrada shaqaalaha cafimaadka Goobaha miyiga iyo dadka Xeebaha kudhaqan.
- In la horumariyo Hannaanka Dimuqraadiga iyo dawlad wanaaagga ee la xiriira hagaajinta arrimaha daryeelka caafimaadka dadweynaha.

**Santuukha 4.2 Dabaysha**

Bishii Oktoober 2002, Iyadoo lala jaanqaadayo dadaalka caalamiga ah ee lagu ciribtirayo Dabaysha,ayaa guulo waaweyn laga soo hooyey Soomaliya, mana jirin halista cudurka Dilaaga ah ee dabaysha- Si kastaba ha ahaatee, Nasiib-darro waxay ka timid markii cudurku ka dillaacay-ama laga soo waariday dalka YEMEN- kadibna ka dillaacay Gobolka Banaadir Luulyo 2005.Waqitigaas wixii ka dambeeyey Hay'adaha WHO iyo UNICEF waxay ololle lixaad leh ku qaadeen tallaalka , iyagoo isku dayayey inay dhammanba cirirbtir ku sameeyaan cudurkan.

# Himilada 5aad:

# In kor loo Qaado Caafimaadka Hooyada



UNCEF/SOM01-51/Pirozzi

## Bartilmaameedka 6aad:

## In la dhimo afar meelood seddex xaddiga dhimashada Hooyada inta u dhaxaysa 1990 ilaa 2015-Ka

### Xaaladda jirta iyo isbedellada Socda

Xaddiga dhimashada hooyada Soomaaliya waxa lagu qiyaasay 1,600 qofkiiba 100,000 qof, taas oo ka dhigaysa Soomaaliya meesha ugu sarraysa dhimashada hooyada uurka leh. Dhibabka sida dhiig baxa, foosha oo dheeraata, jeermiska iyo uuryaalku waa sababaha ugu waaweyn ee dhimashada waqtiga dhalmada. Dhiigyarida iyo gudniinka waxay saameyn xun ku yeeshaan caafimaadka hooyada. Daryeel xumida dhalmada ka hor, waqtiga dhalmada, iyo dhalmada ka dib iyo iyadoo gebi ahaanba aysan jirin xarun si degdeg ah loogu gudbiyo xaaladaha halista ah ee foosha la xariira waxay sii kordhisaa dhimashada iyo nugaylka. Arrintani waxay horseedaa in ka badan toban haween ahi inay maalintiiba dhintaan celcelis ahaan. taasoo ay sababaan caqabadaha uurka iyo dhalmada.[17].

Intaas waxaa sii dheer, in haweenku inta badan dhalaan iyagoon haysan tas-hiilaad caafimaad oo ku filan, ilaa 25% ka mid ah haweenk dhala ayaa hela dhakhatiir aqoon leh[18] . Iyadoo 88% carruurta (95% goobaha miyiga iyo 77% magaalooyinka) ay weli ku dhashaan guryaha, tani waxay xaddidaysaa adeegyada ay u baahan yihiin ee la xiriira dhakhaatiirtu inay wax ka qabtaan caqabadaha dhalmada. 9% oo keliya ayaa dhalmada ayaaa fursad u hela cusbitaallada iyo goobaha kale ee caafimaadka.

Inta badan dhalmada waxaa gacan ka geysta umulisooyinka dhaqanka(TBAs). 2% oo keliya ayaa hela gargaarka dhakhaatiir, halka 19% ay gacan siiyaan xubnaha qoyska, 23% Kalkaaliyaasha iyo umulisooyinka tababaran.



UNFPA Somalia

### Waxyaabaha Taabbagalay

- Dadaalka ay hay'adaha caalamiga iyo bulshooyinku ka wadaan waddanka gudihiisu wuxuu kor u qaadayaa baraarugga ku saabsan gudniinka iyo caafimaadka taranka
- Guurka hablaha ee goor hore la guursado wuxuu ahaa arrin (walwal weyn leh hooyooyinka da'da yar oo ay aad u yar tahay nafqada iyo waxbaabaha kale ee ay u bahanyihiin marka ay nuujinayan ama uurka leeyihiin) ayaa dib-loo-eegay.
- Darasadaha dhawan la qaaday ayaa muujinaya inay sii kordhayaan hablaha da'yarta ah ee la guuranayo
- Waxa soo badanaya xarumaha hay'adaha gaarka ah ee tababarka caafimaadka. Boosaaso oo Puntland ka tirsan,waxa ka jira Dugsiga Kalkaliyaasha caafimaadka oo ilaa 2000 ka hawlgalayey, waxaana lagu bartaa Umulisanimada, Farmashiiste iyo hawlgallada Nadaafadda. Wadarta guud ee ardayda ka qalin-jabisay ayaa gaaraysa ilaa 102 arday.

Shaxda 5.1 Milicsiga Xaaladda Caafimaadka Hooyada Soomaaliya

| Halbeed | Xogta | | |
|---|---|---|---|
| | Xogta Bilowga (1987 - 1990) | Xogtii u danbaysay (2000 - 2002) | 2015 (Himilada MDG) |
| Inta hooyo dhimata 100,000-kii carruur ah ee nolol ku dhalataba | 1,600 | 1.100 | 400 |
| Saamiga hooyooyinka ay shaqaale caafimaad ee xirfad lihi u adeegaan waqtiga dhalida(%) | Xog lama hayo | 25 | 100 |

[17] Prendville, N. Adeegyada caafimaadka hooyada ee Soomaaliya, 1999
[18] UNDP Soomaaliya/BA,sahanka Dhaqaale-bulsheedka,2002




UNDP Somalia

- Dafcaddii ugu horreysay muddo aad u dheer ayaa la filayaa inay ka soo qalin-jabiyaan Jaamacadda Camuud sannadka 2007.

## Caqabadaha

- Iyadoo aysan jiri guud ahaan siyaadda caafimaadka adadweynaha iyo daryeelka caafimaadka Hooyada(MCH), islamarkana aan la saadalin karin mustaqbalka dhinaca Maalgelinta waaxdaas.
- Helitaanka ay haweenku heli karaan daryeel waqtiga uurka, waaqtiga dhalamada, iyo dhalmada ka dib wuu xaddidanyahay gaar ahaan meelaha magaalooyinka ka baxsan.

Jaantus 5.1: Qiyaasta dhimashada hooyada/100,000 ee nolol ku dhasha




- Shaqaalaha caafimaad ee xirfadaha leh aad ayuu ugu yaryahay waddanka[19] taas oo xaddiday dadaalkii lagu tababari lahaa xirfadlayaasha caafimaadka.
- Haweenka qaaarkood oo aan aqoon ku filan u fahamka waraaqaha dhakhaatiirta awgeed, waxay caqab ku noqonaysaa ka hortagga iyo garashada qaabka iticmaalka daawooyinka.
- Iyadoo ay liidato helitaanka Cuntada nafaqasda leh ee ay hooyada uurk lihi u baahan tahay.

**Santuukha 5.1 Gudniinka Dumarka**

Soomaaliya Gudniinka dumarku wuxuu hortaagan yahay in caafimaadka la horumariyo wuxuuna dhab ahaan caqabad ku yahay horumarka 99% ayuu waddanka ku baahsanyahay waxaana gabdhaha inta badan lagu gudaa da'da u dhexeysa 4-11. Gudniinka midkiisa ugu xun oo Soomaaliya ku baahsan wuxuu u geystaa haweenka dhibaato jireed, maskaxeed iyo mid nafsi. Gudniinku hablaha yaryar gaar ahaan wuxuu horseedaa dhibaato caafimaad iyo weliba dhimasho. Sababaha ugu waaweyn ee jirada iyo dhimashada hooyadu waa dhiig baxa ka danbeeya dhalmada, culayska foosha dheeraata taas oo ka timaadda gudniinka. Waxaa la ogyahay in gudniinku kordhiyo dhimashada iyo jirada gabdhaha yar yar iyo haweenka dhiig baxa iyo jeermiska gudniinka ka dhasha awgeed. Dhibaatooyinka gudniinku u geysto caafimaadka hooyada waqtiga dhaw iyo kan dheerba si weyn ayaa loo ogaaday, wacyigelinta iyo baraarujinta ururrada caalamiga iyo kuwa waddaniga ahi arrintaas ka sameeyeen awgeed.

- In badan oo ka mid ah haweenka uurka leh waxay caafimaadkooda hubiyaan xilliyada danbe ee uurkooda. Inay hooyado hesho Daryeelka caafimaad saddexda bilood ee uurkeeda ugu horreya waa arrin xasaasi u ah caafimaadka cunuga iyo hooyadaba.
- Ugu dambayntii waxay adeegsadaan qaabka daaweynta dhaqameed ee soo jireenka, maadaama aysan haysan dhaqale ku habboon, laakiinse habkaasi ma ahan midlagu kalsoonaan karo.

## Talooyin

- Waxaa suurtagal ah in tas-hiilaad caafimaad oo tayo wanaagsan la sii marsiiyo ururrada bulshada si ay ugu fududaato haweenka gaar ahaan kuwa miyigu inay helaan daryeelka caafimaad ee ay u baahanyihiin. Waxaa hawl weyn u baahan sidii daryeelka caafimaad loo baahin lahaa si dadka u baahan loogu soo dhaweeyo intii suurtagal ah.
- Xarumaha caafimaad waxay u baahanyihiin in shaqaale baahida tababareed ee shaqaalaha inta aysan shaqo gelin ka hor iyo ka dibba waa in wax laga qabtaa waana in lagu


[19] Warbixin-waaxeedka, UNICEF Soomaaliya, HIV/AIDS

kormeeraa shaqaalaha caafimaadka shaqadooda si loo helo xirfadaha maamul, shaybaar iyo kormeer ee ay u baahantahay xarunta caafimaadka.

- Kartida aqooneed ee haweenka dhaqanka ee wax umuliya waa in la xoojiyo si ay adeeg ugu fidiyaan si toos ah haweenka dhalmo sugayaasha ah (bulshaduna ay u dalbato adeeggooda markay u baahdaan) isla markaana ay u gartaan xaaladaha u baahan in hooyada loo gudbiyo xarumo caafimaad ee horumarsan.
- Waxaa loo baahanyahay in la dejiyo nidaam waxtar leh sibulshada loo gaarsiiyo adeegyada, loona sameeyo kormee iyo maarayn hufan. Iyadoo iskaashi lala yeelanayo hay'aaha,hay'adaha dhiggooda ah ee dawladda iyo Machadyada tababarrada. tani waxay keeni doontaa in adeegyada loo xaqiijiyo hab-raacyo tusaalooyin ku habboon. Intaas waxaa dheer, in Hab-maamuuskala waafajiyo hannaanka joogtada ah ee daryeelka hooyada uurkaleh iyo hababka loo xaliyo caqabadaha xaaladaha deg-degta ah ee dhalmada.
- Waxaa loo baahanyahay dhaq-dhaqaaq dheeraad ah si kor loogu qaado tayada adeegga caafimaad ee la xariira caafimaadka taranka lagana dhigo xuquuq asaasi ah oo dumarku leeyihiin, iyadoo la hordhinayo nidaamka madax-bannanida adeegyada, siay deegaannada kala duwan fursad ugu helaan fursadaha caafimaadka hooyada iyo dhallaanka, labadaraadle,goobaha miyiga.
- In la heli hannanka taabbagal ah oo waafaqsan nidaamka oo iku-xiraya baahida hooyada uurka leh ee guriga ilaa adeegyada ku salaysan deegaanka bulshada iyo cisbitaallada heer gobol.
- In la kordhiyo macluumaadka ay heli karaan haweenka aan wax akhrin iyo kuwa wax akhriya labaduba ee ku saabsan badbaadidda hooyada, ka hortagga cudurka, nafaqada, HIV/AIDS-ka iyo qorshaynta qoyska ayaa loo baahanyahay.
- In loo ololeeyo sare u qadista tayada ka dheeraynta dhalmada, taas oo ka mid ah xuquuqda asaasiga ah ee bini'aadminimada ay haweenku leeyihiin;
- Waana in la aqoonsadaa kaalinta ragga lagana qaybgeliyaa caafimaadka taranka haweenka maadama raggu talada gooyaan iinta badan, qayb muhiim ahna ka qaataan go'aanada caafimaadka dumarka la xariira.

# Himilada 6aad:

# In lala Dagaalamo HIV/AIDS-ka, Duumada iyo Cudurrada Kale



UNICEF/SOM01-103/Taylor

## Bartilmaameedka 7aad:

## In la hakiyo lana xakameeyo faafidda Cudurka HIV/AIDS-ka Sannadka 2015-ka

### Xaaladda HIV/AIDS-ka Soomaaliya

Soomaaliya ma jirto xog caafimaad oo loo isku halayn karo, oo la xiriirta Dulinka HIV- ga hasa yeeshee waxaa soo baxaya tilmaamo muujinaya jiritaankiisa sida uu tilmaamayo sahankii WHO ee sannadkii 2004 iyo cudurrada faafa(STI) baaritaanno lagu sameeyey, taas oo qiyaastii gaaraysa 0.9% seddaxda aag ee Soomaaliya. Kuwaas oo kala ah, Koofurta-bartamaha Soomaaliya oo ah goobta ugu hoosaysa ayaa lagu qiyaasay 0.6%; Puntland aya tilmaamaysa 0.9%; iyo Somaliland oo gaaraysa 1.4%. Jiritaanka HIV iyo cudurrada kale ee I is-qaadsiiyo iyo Bukaannada Qaaxada ayaa gaaraya ilaa 4.3% iyo 4.5% qiyaas ahaan. Xaaladaha dhaqanka(KAPB) iyo wacyi-gelinta aysan ahayn kuwa is-waafaqaya, waxana muuqata faham la'aan arrintaas la xiriirta, sida sahankani tilmaamayo[20] iyadoo ay meesha ka maqan tahay farsamooyinka ka hortagga loo adeegsado ee dadweynaha Soomaalida. Si kastaba ha ahaatee, waxaan shaki ku jirin in xaaladdu si deg-deg ah uga sii dari karto marka la eego tirada dadka cudurka qabo oo la soo tabinayo inay ku sii kordhayso wadamada deriska ah, dhaqdhaqaaqa dadkooda oo badan, soohdimaha wadanka oo iska baylah ah, iyo tirada dadka kasoo noqonaya wadamada deriska oo sii kordhaysa, islamarkaana la go'doominayo bukaanka. Baahsanaanta cudurrada kale ee galmada la isugu gudbiyo ay ku baahsanyihiin Soomaliya awgeed waxaa jirta halis dheeraad ah inuu fido dulinka HIV-gu. Heerka Wacyiga oo hooseeya iyo qulqulka loo qulqulayo magaaloyinka oo fursado dhaqaale laga raadsanayo waxay iyaduna sii kordhinaysaa tirada dadka halista ugu jira cudurka HIV/AIDS-ka. Dadka barakacay siibahaweenka iyo gabdhaha waxay si gooniya ugu nugulyihiin. Dhiigga aan badbadada lahayn, Gudniinka FGM-ka, isticm dulinka HIV.aalka qaadka, Gogol-dhaafka, Darawallada Gaadiidka waaweyn iyo xamuulka qaada ee masaafooyinka dhaadheer iskaga gudba.[21]

### Dulmarka guud ee Jawaab-celinta Soomaaliya


Ururrada caalamiga ah iyo kuwa wadaniga ah ee aan dawliga ahayn waxay ka wada shaqeynayaan in kor loo qaado wacyiga dadka iyo in la kiciyo dareenka siyaasadeed si loo taageero talaabooyinka looga hortegayo laguna xakameynayo cudurka[96]. Iyadoo la adeegsanyo guddi hawleedka hay'adda isku-dubaridka kaalmada Soomaaliya(SACB) ugu xilsaaran HIV/AIDS-ka, waxaa horumar fiican laga sameeyay sidii loo dejin lahaa qorshe wada xiriir iyo isla socosho si loo kobciyo helitaanka xog dhab ah oo ku saabsan faafidda cudurka HIV/AIDS-ka iyo ka hortagistiisa lana badbaadiyo haweenka oo heerka aqoontoodu si gaar ah u hooseyso. Sannadkii 2003, Santuukha caalamiga ah ee la dagaallanka AIDS-ka, (GFATM), iyadoo qaab-guud ay iskaga kaashanayaan hay'adaha ay ka mid yihiin; QM, iyo la wadagayaasha(DfID oo ay taageerto UNAIDS Somalia) iyadoo dhanka kale, la sii xoojinayo ka hortagga daaweynta iyo Qorshaha QM ee ee la socoshada iyo meelmarinta(IPTCS) ee qiimayn joogta ah ku samaynayaan; GFATM, QM iyo hay'ado kale. Tallaabooyinka la qaadayo xilliga dhow waxay xoogga saarayaan in la yareeyo cuqdada laga qabo dadka qaba cudurka iyo in aan la takoorin, in wax laga qabto nugaylka iyo dhibaatooyinka ka dhasha colaadda, shaqaaqada iyo dhaqamada halista badan keena, iyo in weliba la diyaariyo barnaamij dhamamystiran si ugu yaraan intii suurtagal loogu adeegayo bulshada Soomaaliyeed. Tani waxay wafaqsan tahay baaqa caalamiga ah ee jawaab-celinta hawlgalladas ee sannadka 2010.

Isticmaalka cinjirka galmada aad ayuu u hooseeya, waxaana laga heli karaa oo kaliya farmashiyayaal iyo goobo caafimaad oo kooban. Guud ahaan dhaqanka Soomalidu uma furfurna isticmaalka cinjirka galmada. Ma jirto xog sugan oo ku saabsan tirada carruurta uu agoonteeyay HIV/AIDS-ku maadama aan

Shaxda 6.1 Milicsiga Xaaladda Caafimaadka Hooyada Soomaaliya

| Halbeed | Xogta | |
|---|---|---|
| | Xogta Bilowga (1987 - 1990) | Xogtii u danbaysay (2000 - 2002) |
| Dhiig deeqayaasha qaba cudurka HIV | Xog lama hayo | 0.8-1.1 |

[20] UNDP Soomaaliya, warbixinta horumarinta bini'aadmiga 2001
[21] Sahanka Gebegebada tobanka sano Koox-hawleedka ee warbixinta Farsmada ee Soomaaliya ee UNICEF Soomaaliya, 2001



UNICEF/SOM01-10/Pirozzi

kala hufid iyo baaritaanno lagu ogaanayo dadka cudurka qaba aan laga sameyn cusbitaallada iyo goobaha daryeelka hooyada iyo dhallaanka, markaana aqoonta loo leeyahay xaaladaha cudurku ay badanaa ku saleysantahay tuhun iyo malo oo aysan xaqiiqo ku dhisnayn. Hay'adaha QM ee taagera barnaamijyada aya waxa ka mid ah; Qorshayaasha meel-marinta himilooyina sida; (UNISP) oo ay dusha kala soconaysa hawlgallada IPTCS ee jawaab-celinta farsamada ee ka madaxbannaan siyaasadda.

**Waxyaabaha Taabbagalay**

Tallabooyin muhiim ah ayey qaaday hay'adda GTATM marka la eego jawaab-celinta la dagaallanka AIDS-ka, iyadoo hirgelinteedana sannadka labaad ay hay'adda GFATM ku hawlan tahay. Sannadkii 2006, run ahaantii maaliaydda waa la baahiyey 100%, iyadoo hawlgallo baaxad leh oo kalana ay jadwalka ku jiraan. waxaa kaloo barbar socda hay'adda GFATM, iyana DfID oo hore u maalgelin jirtay, iyadoo si joogto ahna QM ay gacan u siiso hawlgalkan, kuwaas oo tallabooyin meel mar ah ka qaaday dhinaca fahamka iyo xaaladda dhabta ah ee Soomaaliya, islmarkaana si cad u qeexaya, cabbiraadda imminka suuragal ka dhigaysa jawaab-celin sax ah in la helo oo waqtiga waafaqsan. Hawlgalladii sannad iyo labo ka hor la qabtay ayaa imminka saldhig u noqday bartilmaameedyada iyo istratiijiyadda la higsanayo, taas oo la xiriirta hirgelinta Qorshaha IPTCS ee Soomaliya. Waxaa kaloo la jiheeyey Baaqa caalamiga ah khariidaynta, isku-dhafka hawlgallada, daaweynta, daryeelka bukaanka iyo sidii taageero loogu fidin lahaa kuwa iyagu u baahan gargaarka.

**Taag-darrida**

Arrimaha muhiimka ah ayaa waxaa ka mid ah hirglinta hay'adaha dawladda ee qaabilsan jawaab-celinta; bartilmaameeyada barnaamijyada inta badan ku wejahan dadka tabaalaysan ama khatarta ku sugan, ayna ka mid yihiin; Agoonta, hallinyada, haweenka,adeegyada isku-eg, dadweynaha guur-guura, dadka barakcay(IDPs) iyo qaxootiga;in la hagaajiyo fursadaha xogta istaatiijiyadeed kooxan iyaga ah; iyo barnaamijyada dadka qaba cudurka HIV-ga.

**Caqabadaha**

- Ma jiraan tas-hiilaad baaritaan oo ku filan waddanka iyo adeeg caafimaad oo la kari karo lana gaari karo, taasina waa caqabad weyn oo u baahan in laga gudbo, iyadoo inta badan aan xoogga la saarin dhinacyada shaqaalaha, gaadiidka, ciidamada, haweenka iyo gabdhaha, dadka barakacay(IDPs) Qaxootiga iyo dadka dibadda ka soo laabanaya. Dhanka kale, lweli looma hawlgalin taageeradii ay mudnaayeen; dadkataagta daran ee caqabadaha isku-dhafan ay la soo gudboonaadeen, oo ay ka mid yihiin; iyadoo jawaab-celinta caalamiga ahi aysan helin bararuggii loo baahnaa. Waxaana jira tallabooyin rafa badan oo ku habboon Soomaaliya in laga hirgeliyo. Waxaana lagama maarmaan ah in la dhiirigeliyo goobaha HIV-ga ka jiro, lana yareeyo farqiga u dhexeeya dheddig-laboodka, lona ololeeyo xuquuqda bini'aadmiga,adeegyada isku-eg,hoos-u-dhigidda dakhliga iyo sidii la isku waafajin lahaa caqabadaha soo wejahaya haweenka iyo hablaha.
- Ilaa intii ay burburtay dawladdii dhexe ee Soomaaliya waxay saamayn lixaad leh ku yeelatay daryeelkii caafimaadka oo markii horeba aad u liitay. dhammaan adeegyada caafimaadka waxay noqdeen mid ahaan kuwa burburay ama goobihii la degay, tas oo u keentaya dadweynaha caqabado xoog leh oo dhinaca adaryeelka caafimaadka la xiriira.
- Qoxootinnimada xilliga dagaalka awgeed, waxaa oo sii korodhayey dad badan dibadaha u cararaya, siiba dadka

aqoonta iyo xirfadaha caafimaad leh, kuwas oo gacan ka gaysan laha xakmaynta hawlgllada udurka HIV/AIDS-ka.

- Soomaaliya ma jiraan ha'ado maamula iyo daawooyinka lagula tacaalo cudurka HIV/AIDS-ka (anti-retroviral), waxayna ku tiirsan tahay kaalmada deeq-bixiyayaasha.
- Waxaa Soomaaliya ka jira seddex qaab oo isku-xidhan oo la xiriira arrimaha dulinka HIV-ga. Tani waxay horseeday inay adkaato meelmarinta hindisayaasha seddexda weji leh in laga maamulo hal gole iyo hal nidaam oo la xiriira qiimayn iyo la socosho joogto ah.
- Xaaladda siyaasadda iyo nabadgelyo darrida awgeed qaybo Soomaliya ka mid ah ayaa qiimo aad u sarreya ku baxayaa barnamijyadaas, iyadoo ay aad u sii adkaanayso adeegyada imminka ka jiraa inay u adeegaan dadka baahida u qaba gargaarka.
- Iyadoo ay jiraan cuqdad iyo faquuq ka dhan ah dadka qaba cudurka HIV/AIDS-ka. Tani waxay niyad jab ku abuuraysaa dadka qaba cudurka dilaaga ah ee (PLWHIV) ee ku nool Soomaaliya.
- Ma jiraan hawlgallo dhinac daaweynta iyo wacyi-gelinta oo ay toos u maamulaan hay'adaha maalliga h, sida wasaaradda caafimaadka, taasi oo horseeday inay deeq-bixiyayaashu gacanta ku hayaan maamulka barnaamijyadas iyaga ah.

### Talooyin

Waxaa loo baahan doonaa in laga hawlgalo qaybaha soo socda, haddii ay Soomaliaya doonayso inay meel mariso HHM iyadoo la adeegsanayo bartilmameedyada fursadaha caalamiga ah.

- in la soo bandhigo hannanka aqooneed ee dhibaatooyinka bini'aadmiga haysta.
- in laga qaybgalayoCuluma'udiinka jawaab-celinta la xiriirta xakamaynta HIV/AIDS-ka iyadoo lala kaashanayo istaratiijiyadda iyo qaababka gaar ahaaneed ee waafaqsan xaaaladda heer gobol.
- In loo aqoonsado waxda gaarka ah ee Soomaaliya kaalinta ay jawaab-celinta ka qaadan karto.
- In la taageero hannaanka taabbagalinta daaweynta nooca (ART), cudurrada la is-qaad-siiyo(STI) iyo cudurrada lama filaanka ah(OI) iyo qiimaha daawooyinka kale iyadoo lala soconayo saamaynta ay yeelan karaan isticmaalkooda, islamarkaana la yaraynayo qiimaha wejiga labaad e daawooyinka nooca(ARV).

**Santuukha 6.1 Ballan-qaadka Afrika ee 2015-ka**

"In aan si kastaba isaga badbaadiyo kana badbaadiyo inta kale qaadista iyo gudbinta cudurka AIDS-ka"

## Bartilmaameedka 8a:

## In la joojiyo lana xakameeyo faafidda cudurka duumada sannadka 2015

### Xaaladda jirta iyo Isbedellada Socda

Duumadu waxay weli ka mid tahay sababaha ugu waaweyn dhibaatooyinka caafimaad ee jira. Ilaa 80% Waxyeellada duumadu waxay ku badanyahay meelaha wabiyada Shabelle iyo Jubba u dhaw iyo deegaannada leh waraha macmalka ah halkaas oo sannadka oo dhan is qaadsiinta cudurku taaganyahay, kuwaas oo xilliga sannadka oo dhan ay duumada ka dilaacdo. Ka sakow deegaannada duumadu ay qabatintay, waxaa lagu qiyaasaa in 87% Soomalidu ay halis ugu jiraan inay qaadaan cudurka[22].

### Waxyaabaha Taabbagalay

- Ilaa 1999kii hay'adaha WHo iyo UNICEF, waxay dadweynaha deegaannada u qaybiyeen Sansayeediyaasha daaweysay(ITNs).
- Waxaa qaybo dalka ka mid ah laga hirgelieyey qorshayaal lagu xakamaynayo taranka Kaneecada, iaydoo goobah biyah lagu beeray nooca kallunka ee loo yaqaan(Larvivorous) ee cuna ugxanta kaneecada si loo ciribtiro tarankeeda[23].
- Dawooyinka iyo qalabka lama huraanka u ah daaweynta asaasiga ah ayaa loo qaybiyay in ka badan 400 xarumo caafimaad oo ay ku jiraan cusbitaallada, xarumaha dhallaanka iyo hooyada iyo bukaan-socod- eegtooyin dhammaan dalka Soomaaliya

### Caqabadaha

- Adeegyada cafimaadka oo xaddidan, Saboolnimada xad-dhaafka ah, iyo daawooyinka loo isctimaalo Duumada oo noqday kuwa ay Kaneecadu adkaysi u yeelatay.

[22] WHO Somaliya, Soo jeedinta Santuukha caalamiga ah ee Duumada iyo Xakamaynta Qaaxada Culus ah iyo hawlgallada Gurmadka ah ee Soomaaliya 2003-2005

[23] Warbixin-Sannadeedka WHO Soomaaliya, 2002

**Talooyin**

- Waxaa kaloo loo baahanyahay in la xoojiyo wax ka qabashada cudurka iyadoo la adeegsanayo baraarujin la iskuna dayo in cudurka la garto goor hore, goobaha caafimaadkuna ay si fiican u daaweeyaan xaaladaha duumada oo dhan.
- Nidaamka xogta caafimaadka waa in la sii xoojiyo si xog ururin ka fiican kana saxsan intii hore loo sameeyo.
- In la kordhiyo dhaqaalaha lagu kobcinayo cilmi-baarista dawooyinka lagu xakameeyo Duumada.
- Hanti dheeraad ah ayaa loo baahanyahay si cilm-baaris loogu sameeyo iska caabbinta duumada ee daawooyinka isla markaana habab kale oo duumada looga hortago la raadiyo.
- In la meelmariyo lana hirgeliyo siyaasadda daawooyinka lagula dagaallamo duumada.
- In laga dhiso Unugyada Xarumaha Dhexe ee Duumada Dhammaan magalooyinka waaweyn ee Soomaaliya.
- In la ballaariyo qaybinta Nooca Kalluunka lagu xakameeyo taranka Kaneecada ee loo yaqaan (Larvivorous), iyadoo lagu ridayo goobaha ay ka mid ka yihiin; ceelasha, biyo-bixeennada, iyo berkadaha.



UNICEF/HQ00-0500/Chalasani

## Bartilmaameedka 8b:

## In la hakiyo lana xakameeyo faafidda cudurka qaaxada sannadka 2015-ka

**Xaaladda jirta iyo sida wax u Socdaan**

Inkastoo aan xog sugan laga haynin, Soomaaliya waxay ku jirtaa meelaha adduunka tirada ugu badan cudurka Duumada. Iyadoo ay xad-dhaaf yihiin tirada dadka ku jira xeryaha dadka barakacay(IDPs); mana jiraan agabka dawooyinka; tayada daawooyinka oo liita; iyo nafaqo-darrida oo sii xumaysay in Qaaxadu noqoto mid ka mid ah cudurrada ugu ba'an ee dilaaga ah ee dalka.

Waxana lagu qiyaasayo in 270-kii qofba qof ka mid ah qabo cudurka Qaaxada, iyadoo qiyaas ahaan sanadkii la arkaa ilaa 25,000 xaaladood.

**Waxyaabaha Taabbagalay**

- Waxaa dib loo keciyay barnaamijkii qaaxada Soomaaliya sanadkii 1995tii. Xilligan la joogo 18 urur oo caalami ah, iyo laba maamul oo waddanka ka jirta ayaa waxay kaalmeeyaan oo ay hawlgaliyaan 31 xarumo qaaxo oo ku baahsan 18-ka gobol ee waddanka[24].
- Laga soo bilaabo Janaayo 2003. Waxaa kaloo iskaashi lala sameeyay WFP uu suurtageliyay in dhammaan xarumaha qaaxada la siiyo raashin Dhammaan xarumaha Qaaxada iyo cusbitaallada la xiriira.
- Adeegga shaybaarada iyagana waa la casriyeeyay si adeeg baaritaan oo wax tar ah loo bixiyo. Ololayaasha Tallalka Qaaxada oo ay weheliyaan hindisayaasha bulshada ayaa iyagana si togane ah loogu hawlgalay.

Shaxda 6.2 Milicsiga Xaaladda Duumada Soomaaliya

| Halbeed | Xogta | | |
|---|---|---|---|
| | Xogta Bilowga (1987 - 1990) | Xogtii u danbaysay (2000 - 2002) | 2015 (Himilada MDG) % |
| Heerka faafida jirrooyinka duumada lala xiriiriyo | Xog lama hayo | Xaaladaha la baaray - 205 | 0 |
| Dhimashada la xiriirta duumada ee 100,000 ee dhimashaba | Xog lama hayo | 81 deaths | 0 |
| Saamiga carruurta 5 sano ka yar ee ku nool meelaha halista duumadu ka jirto ee isticmaala ka hortag iyo daaweyn waxtar leh | Xog lama hayo | 16% shabaq kaneeco hoos seexda 0% shabaq la daaweeyay hoos seexda | 100 |

*Isha: UNICEF Somalia, Qaab-hawleedka istraatiijiyadda ka hortagga HIV/AIDS-ka 2003-2008 iyo STIs, 2003*

[24] Warbixin-Sannadeedka WHO Soomaaliya, 2002

**Caqabadaha**

- Ballaarinta barnaamijka daaweynta lala socdo ee qaaaxada (DOTS) wuxuu ku xiranyahay in nabad iyo xasilooni la helo, nabadgelyo xumidu waxay hortaagantahay in la balaariyo adeegyada qaaxada si dadku u soo gaaraan.
- Ma jirto cid xukunta ama ruqso sii dadka iskood wax u daaweeya, siiba Qaxada. Daaweyntu ma nidaamsana mana loo kala aabayeelo.
- Ma jiro nidaam iyo tilmaamo degsan oo lagu hubiyo tayada daawada.
- Mashaariicda qaaxada waxaa wada ururro aan haysan maalgelin sugan kuna qasban in ay ugu danbaynta dhimaan hawlaha lagu xakameynayo cudurka marka ay maalgelintu ka go'do.
- In la xakameeyo cudurka Qaxada, way adagtahay maadaama daaweynta muddadeedu dheertahay. In daawada la dhammaysto sidoo kale way adagtahay inta xaalado colaadeed oo yareynaysa dhaqdhaqaaqu ay jirto.

**Talooyin**

- Tas-hiilaadka daaweynta qaaxada ee sida tooska loola socda waxay u baahantahay in la kordhiyo, tayada daryeelka bukaanka qaaxadana la horumariyo.
- Waxaa kaloo loo baahanyahay in la xoojiya adeegyada ay ka mid yihiin; Daaweynta(DOTS) , noocyada tallaalka dhallaanka markaaasi dhashay(BCG).
- Xoojinta Wada shaqeynta heerarka kala duwan ee rugaha caafimaadka si loo hubiyo in la sii wado xarumaha daryeelka qaaxada waddanka oo dhan.
- Waxaa loo baahanyahay in awoodda maamul iyo xirfadeed lana xoojiyo iskaashiga ururradu la sameystaan maamullada caafimaad gaarka loo leeyahay ee soo ifbaxaya si loo fududeeyo in dawladdu yeelato door isa soo tara ayna hanato barnaamijyada xakameynta qaaxada ugu danbaynta.
- In la horumariyo barnaamijka heer qaran ee qaaxada iyo tusaalooyinka la xiriira.
- Waxaa sidoo kale loo baahanyahay in la dejiyo hannaan la wada wadaago oo lagu wada shaqeeyo kaas oo ay ka wada qaybgalaan kuwa shaqada lala wadaago, bulshooyinka iyadoo daawo gadayaasha madaxa bannaan iyo xakamaynta TB-daadoo gacan lagu siinayo barnaamijyada dawladda ee horumarinta caafimaadka.
- In la baraarujiyo ololayaasha xakamaynta caafimaadka ee Qaaxada lana gaarsiiyo heer tuulo iyo heer beel.


Waxaa iska cad in barnaamijyada qaaxada ee Soomaaliya ay ku dhawyihiin ama ay gaareen heerkii ugu sarreeyay ee hantida la haytsaa suurtagelin karto. Inkastoo Ururka Caafimaadka Adduunka ee WHO uu saadaalinayo in heerka adeegga hadda la fidiyo uu labalaabmo sannadka 2008, haddana weli ma muuqato in bartilmaameedka 2015-ka la haleeli karo.

Si loogu fidiyo adeeg dad dheeraad ah loona gaaro bartilmaameedyo dhawr ah waxay ku xirantahay in la ballaariyo awoodda ay qaabili karaan xarumaha jiraa iyo in la furo kuwa cusub oo u baahan shaqaale, kaabayaal, qalab iyo sahay.

Shaxda 6.3 Milicsiga Xaaladda Qaaxada Soomaaliya

| Halbeed | Xogta | | | |
|---|---|---|---|---|
| | Xogta Bilowga (1987 - 1990) | Xogtii u danbaysay (2000 - 2002) | 2015 (Himilada HHM) % | Bartilmaameedka Soomaaliya % |
| Xaddiga jirrooyinka qaaxada la xariira | Xog lama hayo | 107 | 0 | |
| Heera ogaashada qaaxada lagu ogaado daaweynta tooska ah ee lala socda ee mudada gaaban(%) | Xog lama hayo | Guud ahaan - 42% Waqooyi Galbeed - 87% Waqooyi Bari - 29% Bartamaha - 27% Koofurta - 50% | 100 | 70 |
| Heerka qaaxada candhuufta laga helo 100,000 ee xaaladoodba | Xog lama hayo | 162 | 0 | 139 sannadka 2008 (sanadkiiba 3% hoos loo |
| Heerka ku guulaysigadaweynta(%) | Xog lama hayo | 80 | 100 | 90 |

*Isha: Warbixin-sannadeedka WHO Soomaaliya2002 iyo WHO Soomaaliya, Santuukha soo jeedinta caalamiga ah Duumada iyo Qaaxada, iyo xakamaynta waxyeellada saarraysa iyo gurmadka culus ee Soomaaliya, 2003-2005*



# Himilada 7aad:

# In la Hubiyo Waaritaanka Deegaanka lana Dhaqaaleeyo

UNICEF/HQ00-0503/Chalasani

**Bartilmaameedka 9aad:**

## In Siyaasadda Wadanka iyo Barnaamijyadiisa lagu daro Mabaadi'da Dhawridda Deegaanka iyo in la Xakameeyo Khasaaraha Khayraadka Deegaanka

**Khayraadka Dabiiciga ah**

**Xaaladda Jirta iyo Isbedellada Socda**

Baaxadda dhulka Soomaaliya waa 637,657 kiilo mitir oo isku wareeg ah, xeebaha waddanka dhirarkooduna waa 3,300 kilo mitir. Ilaa iyo markii dagaalku qarxay Soomaaliya waxa ka socday dhaqdhaqaaq ballaaran ee qaxootiga, dadka soo noqonaya iyo in badan oo waddanka gudihiisa ku barakacday kaas oo dhibaatooyin bin'aadanimo oo qoto dheer reebay. Marka meelaha kale loo fiiriyo, dhaqaalaynta deegaanka Soomaaliya waa la dayacay mana jirto u danqasho. Waxaa kaloo saameeyay Soomaaliya dhibaatooyin cimilada iyo musiibooyin dabiici ah sida daadadka, abaaraha iyo bacaadka soo rogmaday. Inkastoo aysan caadi u ahayn Soomaaliya Dhul-gariirka iyo tsunami, haddna weli waxay u muuqataa inay khatar u tahay masiibooyinkaas. tsunami-ga Badweynah India, ayaa ku dhftay xeebta Soomaliya toddobaadkii ugu dambeeyey ee sannadkii 2004. Waqooyiga bari ee Soomaliya ayaa waxyeelo lixaad leh ay ka soo gaareen maasaafo gaaraysa 650kms ee u dhaxaysa Xaafuun iyo Garacad. waxa kaloo tsunami-gu uu caqabad weyn ku noqday xaaladihii gargaarkla aadamig ahaa ee Puntland, halkaas oo ay horey ula soo gudboonaadeen dhacdooyin walaac leh oo ay ka mid ahayeen; abaaro seddex sano oo xiriir ah, daadad, Roobab dhaxan badan xambaarsan, iyadoo ay weli sii socoto xayiraadda xoolaha nool iyo xiisadaha colaadeed e gudaha ka jira. Waxayna waxyeelada tsunami-gu saameeyeen dad gaaraya 44,000 ruux(oo ay ka mid yihiiin; dadka barakacay iyo dadka dib-u-soo-noqonaya), taas oo dhaalsiisay in dadweynuhu ay u kala qaybsamaan dabaqado heer-nooleedkooda la xiriira, halka dad badani ay ku dhinteen, iyadoo uu deegaankana waxyeelo ka soo gareen, sida waddooyinka, guryaha, burbur la soo dersay ilaha biyaha, iyo khasare lixaad leh oo la soo gudboonaaday hantida ma guurtada ah ee nolosha dadweynaha.

**Xaalufinta iyo Geedo Jaridda**

Dhulkii hawdka iyo kaymaha ahaa ee Soomaaliya hoos ayuu u dhacay sanadihii la soo dhaafay, soo kabashada kaymaha dabiiciga ahina waa gaabis maadaama dhulka Soomaaliya uu yahay dhul qallallan. Jarida dhirta loo jaro ganacsiga dhuxushu wuxuu saameeyay noolihii ku dhex jiray, daboolkii dhulka iyo daaqii. Dhuxusha waxaa laga jaraa geedaha quraca- taas oo nolosha xoola-dhaqatu ay ku tiirsan tahay dhirka iyo goobaha daaqsinta leh, Dhuxusha oo ah khayraad shidaal, waxay noqotay waxyaabaha Soomaalida dhoofsato kuwa ugu muhiimsan ka dib markii xoolaha ay xayiraad saareen wadamada khaliijku iaydoo ay korodhay tirada Kiintaallada dhuxusha ah ee dibadda



UNDP/Sonya Green

Shaxda 7.1 Milicsiga Xaaladda Deegaanka Soomaliya

| Halbeed | Xogta | |
|---|---|---|
| | Xogta Bilowga (1985 - 1990) | Xogtii u danbaysay (1999 - 2003) |
| Xaddiga dhulka kaymuhu ku daboolanyihiin (%) | 13 | 12 |
| Xaddiga dhulka la badbaadiyay sii loo dhawro noolaha dushiisa ku nool(%) | Xog lama hayo | 0.01 |
| Inta qof kasta qashinka (Carbon dioxide) ku daayo hawada iyo isticmaalka maadada (chlorofluorocarbons) ee fallaarha qoraxda celiya wax yeelaysa | Xog lama hayo | 0 |
| Xaddiga dadka isticmaala shidaalka adag (%) | Xog lama hayo | 98.5 |

*Isha: Warbixita Horumarinta UNDP, 2003*

**Santuuqa 7.1 Dhibaatooyinka Deegaanka ee ugu Waaweyn**

- *Ma jiro nidaam maamul lehna hannaan siyaasadeed degsan oo qaada mas'uuliydda deegaanka awoodna u leh inuu kormeero tayada iyo sida looga faa'iideysanayo khayraadka deegaanka Soomaaliya.*
- *Ma jirto dawladdhexe, ammaanka dadkuna halis ayuu ku jiraa taas oo keenaysa in dadka iyo xooluhu barakcaan aadna loogu hertamo khayraadka ay ka mid yihiin biyaha, dhulka daaqa, dhulka la qoto iyo kan deegaankuba. Culayska dadka iyo ku xadgudubka dhulka kaymahu wuxuu keenayaa in deegaanka xaalufo.*
- *Ma jirto awood farsamo oo lagu sahmiyo xaaladaha deegaanka iyo sida wax u socdaan si go'aamo dhaxal gala looga gaaro maareynta deegaanka.*
- *Daaqidda xad dhafka ah iyo abaaraha waxay keenaan halis biya yari iyo xaalufinta deegaanka oo sii socota.*
- *Soomaaliya way ka go'doonsantahay caalamka cid danaheeda uga matasha adduunkana ma jirto.*
- *Dhibaatooyinka aan wax laga qaban karin sida mamnuucidda xoolaha waxay sii siyaadiyeen isticmaalka masuuliyad darida ah ee khayraadka dabiiciga sida jarida dhirta oo dhuxul laga dhiganayo taasoo deegaanka xaalufinaysa.*

loo dhoofiyo, sidawaxbixintu sheegtay sannadkii 2000kii, waxaana lagu qiyaasay 700,000 ilaa 1.2 Milyanoo Kiintaal la ga dhoofiyey Dekedda Magaalada Kismayu ee koofurta Soomaaliya. Saameynta fog ee dhuxul jaridda waxaa ka mid ah kheyraadka kaydka ahaa oo gura, tamarta oo ciriiri gasha iyo qiimaha shidaalkuna kaco.dbayaqadii 2006, waxaa dhoofinta dhuxushu ayaa laga mabnuucay goobihii koofurta iyo bartamaha Soomaaliya ee ay gacanta ku hayeen Maxaakimtii Islaamiga ahyad(IUC).



UNDP

## Aagga Badaha

Xeebta Soomaaliya waxay ka mid tahay kuwa ugu dheer ee badweynta Hindiya. Waxay Hodan ku tahay kalluun badan. Daraasad lagu sameeyay kaydadka kalluun ee biyaha Soomaaliya waxay tilmaamaysa in eebbe ku manaystay khayraad dbiici ah oolixaad leh, balse u baahan iyo si habboon looga manaafacaadsado, si hoos loogu dhigo saboolnida. Sida ay xustay watrbixinta Hay'adda Qm ee Cuntafa iyo Beeraha(FAO), waxa badaha dhex-jiira kalluun laguqiyaasay 200,000 tonnes, iyadoo ugu yaraan laga soo saari karo 40,000 tonnes sannadkiiba, kuwaas oo laga kalluumaysan karo iyadoon wax dhibaato ah loo gaysanin khyraadka badda ku jira.

## Magaalowga

Magaalowga xawli ayuu ku socdaa dadka miyiga kasoo qulqulaya oo magaalooyinka u soo haajiraya iyo dad badan oo bannaanka kasoo laabanaya oo degaya magaalooyinka awgeed. Abaaraha ayaa iyaguna saamayn ku yeeshay kororka magaalowga qaybo ka mid ah dalka sida; Puntland, taas oo abaarihii ka dhacay 2004, ay dadka xoolo-dhaqatada ahi ay ku xoolo-beeleen, kaddibna ay dantu ku khasabtay inay u guuraan tuulooyinka goobaha magaalooyinka ku dhaw-dhaw. Hababka loo maareeyo dhibaatooyinka deegaanka ee sii kordhaya sida ururinta qashinka iyo faya-dhawrku lama socdaan koboca magaalooyinka.

## Culayska Daaqsinta Iyo Qodashada

Kororka degida dadku degayo agagaarka ilaha biyaha waxay keenayaan beero qodosho iyo daaqsin xad dhaaf ah, carro guur iyo nafaqada oo dhulka ka dhammaata. Kaymaha oo aan sida caadiga ah la isticmaali jirin xilliyada qaar sababo biyo la'aaneed awgeed ayaa hadda la isticmaalaa sannadka oo dhan taas oo caqabad ku ah soo kabashada daaqa iyo dhirta noloshu ku xirantahay.

## Waxyaabaha Taabaggalay

Waxa jira dadaallo togane oo lagu badbaadinayo deegaanka. Sanadkii 2000, dawlad goboleedka Puntland waxay mamnuucday dhoofinta dhuxusha; hirgelinta xayiraadani waxay hoos u dhigtay 80% dhoofkii dhuxusha Intaa waxaa wehlisa, in soo looga saaro meesha baahida loo qabo dhuxusha, lagu dhiirigeliyay dadka inay isticmaalaan qalabka wax lagu karsado ee tamarta ileyska ku shaqeeya. Somaliland waxay meel marisay sharciga kaymaha si loo badbaadiyo kaydka dabiiciga ah ee kaymaha loona abuuro seerayaal kayd ah oo marar gaar ah la daaqo, waxaa kaloo la sameeyay kayd

abaareed[25] iyo isku badalka daaqsinta xoolaha si loola tacaalo abaaraha, waxaana la abuuray haya'ad maareysa deegaanka, waxaa kaloo Dawladda Federaalka ku-meel-gaarka ah e Soomaaliya ay dhistay wasaradda Deegaanka. Ururka Shaqalaha Qaramada Midoobay(ILO) waxay abuuraysaa shaqooyin lagu taageerayo dadka qashika ka uruurinaya Magaalooyinka Muqdishu iyo Baydhabo.

**Caqabadaha**

- Badbaadada deegaanku uma muuqato mid mudnaan la siinayo, marka loo eego, maadama ay dadku tixgeliyan sida ay ku heli lahaayeen cunto ay quutaan, kaddib markii ay culays fara badan kala kulmeen heer-nololeedkooda iyo sidii ay qoysaskooda nolo ugu abuuri lahaayeen. Way adagtahay in la helo ilo kale oo shidaal ahan loo isticmaalo, maadaama ay dad badan u aqoonsan yihiin heer qaali ku ah dhaqalahooda, kuwaas oo aan sahlanayn inay helaan.
- Iyadoo ay xaddidan tahay awoodda dawladda dhexe ee xakamaynta khasaaraha soo loo gaysanayo ku-xad-gudubka iyo ugaarsiga khayraadka dalka, waxyeelaynta deegaanka iyo Kalluumaysiga aan sharciyaysnayn wuxuu khasaare lixaad leh ku keeni karaa khayraadka biyaha iyo kala duwanaanshaha kalluunka. Shirkado ajnabi ah ayaa si sharci darro ah uga kalluumaysta xeebaha Soomaaliya oo ay adagtaahy in ammankkooda la sugo.
- Heerka wacyi-gelinta badbaadada deegaanka ayaa aad u hoosaysa, islamarkana ma jirto nidaamka bixinta digniinaha hore ee looga hortagayo masiibooyinka dabiiciga ah sida; Dadaadka webiyada, Duufaannada roobabka, tsunami iyo abaaraha.

- Isticmaalka Bacda wax lagu qaato, ayaa si weyn dalka oo dhan ugu baahday. Sikastaba ha ahaatee, ma jiraan hannaan ku habboon oo dib-loogu soo uruuriyoa kaddibka la siticmaalo, sidaas darteed, waxaa lgu daadiyaa mgaalooyinka iyo dhulka miyiga kuwaas oo sababa khasaare lixaad leh oo deegaanka soo gaara.

**Talooyin**

- In si buuxda loo taabbagaliyo khayraadka dabiciga ah ee isk-dhafka Xayaanka iyo dhirta, hagaajinta deegaanka, dhirynta keymaha iyo horumarinta goobaha deegaanka, iyadoo la tixgelinayo dhaqaal-bulsheedka dadka Soomaalida.
- In la xaqiijiyo in la meelmariyo hababka sare loogu qaadayo dhinacyada kala duwan ilaha wax soo saarka cuntada iyo abuuritanka dakhliga. Tani, waxay yarayn doontaa ku tiirsadan heer-nololeedka wax soo saarka dhuxusha.
- In la kobciyo wacyi-gelinta iyo xoojinta xirfadaha awoodaynta
- Iyadoo la tixgelinayo xaaladda siyaaso bulsho iyo dhaqaale ee dadka waa in la sameeya qaab dhammeystiran oo lagu maareynayo khayraadka dabiiciga ah, kuwas oo lagu dhiirigelinayo haweenka iyo carruurta; lana meel mariyo qorshaha mashaariicdaas iyag ah.
- In la sameeyo sahan badeed si lagu ogaado baaxadda khayraadka kalluumaysiga dalka. Intaas waxa soo raaca iyadoo la abuurayo ciidamada ilaalinta xeebaha Soomaliya.
- Waxaa loo baahanyahay in qaybaha gaarka ah ay ka qaybgalaan kalluumaysiga iyagoo sameysanaya iskaashatooyin iyo shirkado.
- Ilo kale oo tamareed waa in la raadiyaa sida isticmaalka digada xoolaha iyo tamarta dabaysha oo loo isticmaalo biyo soo saarida.
- In laga abuuro Xarumaha fidinta dhiraynta gobollada kala duawan, ugu yaraan waxaa lagama maar maan ah in la hirgeliyo qorshe waqti gaaban.
- In la sameeyo daraasadaha khariidadaynta Goobaha wasakhada lagu daadiyey badaha qaranka.
- Waxaa kaloo loo baahanyahay in la soo nooleeyo xirfadda kalluumaysiga si looga faa'iideysto khayraadka kalluun ee dhulka iyo xeebaha iyadoo la raacayo nimaad xadeysan oo kalluumaysi oon gurinayn khayraadka.


UNICEF/HQ00-0492/Chalasani

[25] Cilmi-baarista IUCN ee Dabeecadda ee Dooxooyinka Xeebaha Waqooyi-Galbeed ee Soomaliya

## Bartilmaameedka 10aad:

## In Sannadka 2015 la dhimo kala bar Dadka aan si joogta ah u helin Biyo la Cabbo oo nadiif ah iyo Faya-dhawr

### Helidda Biyo Nadiif ah iyo Faya-dhawrka

### Biyo Nadiif ah

fursadaha helitaanka biyaha way xaddidan yihiin dadweynaha Soomaaliya kuwaas oo qiyaastii gaaraya ilaa 23%, balse way ku kala duwan yihiin gobollada dalka. Waqooyi-galbeed wxaa ka jirafursado gaaraya ilaa 31% helitaanka biyaha dadweynaha, marka la barbar-dhigo Waqooyi-bari o gaarayaillaa 26% halka 18% lagu qiyaasay Gobollda Bartmaha iyo Kofurta Soomaaliya. Marka dadku sii bataba waxaa sii badanaya wasakhaysanka biyaha dhulka dushiisa. Magaalooyinka ku dhawaad saddex meelood meel ayaa dadku heli kara biyaha tubada laga cabo, halka meelaha magaalooyinka ka baxsana 3.8% kaliya ay heli karaan biyaha qasabadaha.

**Santuuqa 7.2 Biyo la'aanta**

iyadoo laga duulayo adeegsiga xaddidnaanta biyo la'aanta lagu qiyaasay 1,000 $m^3$ sannadkiiba, biyaha la heli karay sannakii 1990kii ayaa lagu tilmaamay"xaalad qalafsan" taas oo wax yar ka sarraysay 1,000 $m^3$ qofkiiba sannadkiiba. Hab-qiyaaseedkaasi wuxuu muujinaya in sannadkimarka uu gaado 2025 ay xaaladda biyo la'aant aya la saadaalinaya inay ka sii dari doonto ilaa qiyaastii 500$m^3$ baahida qofkii sannadkiiba.taasina waxay saamayn kuyeelanaysaa kororka dadka xad-dhaafka ah iyo is-bedellada cimilada iyo roobabka.

*Warbixinta is-bedellada Cimilada UNEP ee hay'adda Graphics Afrika-saamaynta is-bedellada Cimilada, 2002,17(isha: UNECA-muuqaalka Deegaanka Caalamka)*

Hay'adda UNICEF waxay xiriir wanaagsan la leedahay hay'adaha, Golayaasha bulshada, kooxaha iskood isku-xilsaaray iyo waaxda gaarka ah, ururada bulshada heer deegaan iyo Urrurrada aan dawliga ahayn ee ku hawlan dhammaan adeegayada biyaha iyo faya-dhawrka Deegaanka. Mashaariicda hay'adda UNICEF ee dhinacyada Biyo-gelinta, Nadaafadda iyo Faya-dhawrka Deegaanka waxay gacan ka gaystaan dhibaatooyinka cudurrada dulinka biyaha ku dhasha sida Daacuunka. waxay taageero ka gaystaan sidii ay ku tabbagalin lahaayeen biyo-gelin iyo nidaamka gaarsiinta Miyiga iyo goobaha magaalada, iyadoo islamarkaana la xaqiijinayo inay fursad u heli karaan dadka tabaalaysan ee dadka saboolka ah ee Bulshada ka tirsan.Goobaha waxbarashada Bulshada, ayaa iyagana u baahan abaabul gaar ahaaneed oo la xiriira wacyi-gelinta nadaafadda. Ardayda waxaa lagu barbaarinayaa farsamooyinka nadaafadda cagmo-dhaqashada iyo sida ugu badbaado wanaagsan ee loo keydsan karo biyaha qoyska.

Uruurka Sayed ee saldhigiisu yahay dalka Isku-tagga Imaaraadka Carabta, ayaa Soomaaliya ugu deeqay US$ 2 milyan, si loo horumariyo ilaha biyaha Dalka.Tani waxay gacan ka gaysatay sidii wax looga qaban lahaa baahida deg-degta ah ee jirta, waxayna sidoo kale, qayb weyn ka qaadatay sii horumarinta iyo ballaarinta isku-xidhka hay'adaha iyo kooxaha kala duwan, Hay'adaha aan dawliga ah ee maxaliga ah(NGOs) iyo waaxyadaha guud iyo kuwa gaar ahaaneed oo iskaashanaya. Waxay kaloo arrintani wax ka tartay xoojinta xirfadaha hawlgallada deegaannada, sidii ay ku heli lahaayeen nidaamka biyo joogto ah, islamarkaana hore loo sii marinayo lahaanshaha.

### Baahida Faya-dhawr ee Asaasiga ah

In ka yar 50% ayaa dadka Soomaaliyeed ku nool guryo leh hab saxarada la isaga fogeeyo. Intaas waxaa dheer, QiimahaBiyaha wax nidaam ah ma leh, cidna xukunto, iyadoo guud ahaanna aysan sugnayn ilaha biyaha joogtada ah laga heli karo, taas ooay sabab u tahay xaaladda Joqraafiyeed iyo is-bedellada Cimilada.

### Talooyin


- Waxaa jira xiriir sugan oo u dhexeeya caqabadaha biyaha iyo Faya-dhawrka dalka Soomaaliya, kuwaas oo sii xumaynaya xaaladaha caafimaadka, islamarkaana sii xoojinaya fiditaanka cudurrada ka jira Soomaaliya. Sidaas awgeed, waxa loo baahan yahay xaqiijinta hawlgallada lagu maaraynayo nidaamka siyaaasadda jaan-goynta qiimaha biyaha, iyadoo

Jaantus 7.1: Boqolkiiba Dadka Fursad u Hela Inay Ka Cabbaan Ilo Biyo Nadiif ah




*Isha: Sahanka Gebegebada tobanka sano Koox-hawleedka ee warbixinta Farsamada ee Soomaaliya ee UNICEF Soomaaliya,*

Jaantus 7.2: Boqolkii dadka nadaafadda ku nool




la fulinayo sahminta qaababka farsamo ee loogu isticmaalo qorshaynta mashaariicda biyaha lana saadaaliyo saamaynta mudada fog ee taabbagalinta biyaha, islamarkaana meeshana laga saaro isku-dheellititr la'aanta culayska ku haysa waaxda ugu saboolsan dadweynaha.

- In la hubiyo inay biyuhu waaraan meeshana looga saaro sinnaan la'aanta saameynaysa dadka saboolka ah ee bulshada, waa in loo sameeyo nidaam maamul oo hufan, siyaasad sicir goyn, iyo nidaam lagu hagayo biyaha iyo dhawrista Deegaanka.
- In la dhiirigeliyo in qashinka la warshadeeyo oo dib looga faa'ideysto.
- In la diyaariyo manhaj waxbarasho ee faya dhawrka iyo aqoonta nadaafadda.

Waxaa lagama maarmaan ah in la hagaajiyo faya-dhawrka

- In la soo rogo nidaamka biyo gurashada (qoondayn waqtiyada la dhaansanayo), islamarkaana in qaybaha gaarka ah (ganacsatada) laga qeybgeliyo adeega biyaha iyo qashin ururrinta, hase yeeshee waa inysan taasi abuurin farqi biyo-dhaamiska la xiriira.

**Santuuqa 7.3 Saameynta Abaarta**

Afar sano oo isku xiga oo abaar ah oo ka dhacday waqooyiga Soomaaliya dabayaaqadii 2003/4 waxay horseeday xoolaha oo baaba'a taas oo sabool ka dhigtay 200,000 oo qoysas xoolo dhaqato ah kuwaas oo ku tiirsan dhaqaalaha kasoo gala gadida xoolaha iyo caanahooda. Sicirka cuntada iyo biyuhu way kaceen waxayna gaareen heer aysan qoysasku awoodin inay gataan waxyaabaha daruuriga ah sida cuntada iyo

**Bartilmaameedka 11aad:**

## In la Xaqiijiyo Sannadka 2002 in Horumar Weyn la Gaarsiiyo Nolosha Ugu Yaraan 100 Milyan oo ah Dadka ku Nool Xaafadaha Saboolka ee Isku Raranta

Shaxda 7.2 Milicsiga Xaaladda Deegaanka Soomaliya

| Halbeed | Xogta | |
|---|---|---|
| | Xogta Bilowga (1990-1996) | Xogtii u danbaysay (2000-2004) |
| Tirada qoysaska deggan dhismayaal joogta ah (%) | Xog lama hayo | 24.1 (60.3 magaalo: 6.0 miyi) |
| Tirada qoysaska inta qoya ee hoy leh (%) | Xog lama hayo | 80.4 (58.3 magaalo: 91.5 miyi) |
| Tirada qoysaska kireysta hoy (%) | Xog lama hayo | 10.4 (23.6 magaalo: 3.8 miyi) |
| Tirada qoysaska ku nool guryo dawladeed (%) | Xog lama hayo | 1.3 (2.6 magaalo: 0.6 miyi) |
| Tirada qoysaska ku jira guri lacag la'aan ah (%) | Xog lama hayo | 5.8 (9.6 magaalo: 3.9 miyi) |
| Tirada qoysaska kunool guryo maran (%) | Xog lama hayo | 2.1 (5.8 magaalo: 0.2 miyi) |

### Xaafadaha Saboolka ee Isku Raranta

Soomaliya dhibaato weyn ayaa ka jirta xeryaha ay ku jiraan dadka waddanka gudihiisa ku barakacay iyo kuwa soo laabtay. Waxay ku noolyihiin doqoshyo ku meel gaar ah oo aan lahayn wax tas-hiilaad fayo dhawr(Platics, qalab-duug ah iyo tiirar dhirta laga soo guray) waxayna u nugulyihiin cudurrada la is-qaadsiiyo nadaafad-dridda awgeed.

Dhanka kale, 24% oo keliya ayaa tirada guud heli kara guryo adag (60% magaalooyinka iyo 6% goobaha reer miyaga).

Intaas waxaa soo raaca, iyadoo aysan jirin dhul iyo guryo la isku hallayn karo, dadka barakacay iyo kuwa soo noqonayaa markay ku soo laabataan tuulooyinkoodii waxay u yimaadaan guryahoodii oo la degay ama la burburiyay taas oo ku qasabta inay ku laabtaan xeryihii. Dadka saboolka waxa haysata hubaal la'aan, iyagoo halis joogtaa ugu jira in laga bixiyo meelaha ay degganyihiin. Sidaas darteedna ma heli karaan amaah taas oo wax u dhimaysa niyadda ay u hayaan inay maalgelin ku sameeyaan sidii ay dib ugu hagaajisan lahaayeen guryahooda iyo deegaanka ku hareeraysan.

### Talooyin

- In la soo rogo qaab bulshada guryo loogu dhisayo lana raadiyo habab cusub oo ay dadka saboolka ah ku heli karaan sugnaan dhul ay kari karaan inay gataan.
- Waa in loo dejiyaa xaafadaha isku-raranta iyo xeryaha dadka barakacay(IDP) nidaam furfuran oo dhulka lagu maammulo laguna maareeyo. Dhinacyada jinsiga waa in laga fakaraa oo



UNICEF/SOM9619/Piirozzi


- In la isku-dhafo dheddig-laboodka arrimaha la xiriira lana darso Xuquuqda dhulka ee ay haweenku leeyihiin.
- In la tageero xuquuqda dhulka ee imminka jirta, lana dejiyo olole warbaahin ee heer qaran oo ku saabsan xuquuqda dadka ee dhulka.
- In la abuuro iskaashi wadajir ah oo u dhexeeya waaxyaha dawladda iyo waaxd gaarka ah iyo bulshada rayidka ah, iyadoo islamarkaana la sii amba-qaadayo min taageerada beesha caaalamka, taasi oo mudnaan gaa ah la siinayo hindisayaasha lagama maarmaanka ah ee hab-raacyada taabbagalinta horumarinta ee waafaqsan qaabka loo meel marin karin qiimaynta Dhaqaalaha Soomaaliya iyo sidii loogu guulasan lahaa HHM-ka baabi'inta waxyaabaha dabiiciga ah iyo isticmaalka aan haboonayn ee aan xakameysnayn xad-gudubyada khayraadka.

**Talooyin**

- Dhisidda wacyigu waxay horseedaysaa in habab fudud oo lagu balaariyo ka faa'ideysiga khayraadka deegaanka la helo. Waxaa kaloo loo baahanyahay in kartida maamul la xoojiyo si loo dejiyo loona hirgeliyo mashaariic ay ka qaybgalaan dumarka iyo carruurtu marka la qorsheynayo isticmaalka khayraadka.
- In lagu daro maamul dhisidda qayb qaabilsan maareynta deegaanka oo metesha waxyaabaha deegaanka quseeya.
- In la diyaariyo manhaj waxbarasho ee faya-dhawrka iyo aqoonta nadaafadda.
- Si loo hubiyo inay biyuhu waaraan meeshana looga saaro sinnaan la'aanta saameynaysa dadka saboolka ah ee bulshada, waa in loo sameeyo nidaam maamul oo hufan, siyaasad sicir goyn, iyo nidaam lagu hagayo biyaha iyo dhawrista Deegaanka.
- In la soo rogo nidaamka biyo-beekhaamintan (qoondayn waqtiyada la dhaansanayo).
- In qaybaha gaarka ah (ganacsatada) laga qeybgeliyo adeegga biyaha iyo qashin ururrinta.

Himilada 8aad:

# Dhismaha Iskaashiga Horumarinta Caalamiga ah



# Dhismaha Iskaashiga Horumarinta

**Xaaladda Jirta Iyo Isbedellada Socda**

Si loo Kobciyo Qaab-hawleedka Dib-u-dhiska iyo Horumarinta(RDF) ee Soomaaliya, waxay hay'adda Daraasaadka Baahida wadajrka ah ay bilowday 2005, baaritaanno la xiriira baahida mudnaanta leh e dalka ka jirta, iyadoo ay dhinacahoggaaminta la wadaagaysay Qaramada Midoobay iyo Bangiga Adduunka iyo qaybaha kale oo muhiim ah oo ka socday Jaaliyadaha Soomaaliyeed ee dibadda ku dhaqan iyo hay'adaha la-wadaagayaasha hawlgallada.Qaab-hawleedka Dib-u-dhiska iyo Horumarinta(RDF)- kaas oo la soo af-jaray sannadkii 2006-dii. - kaas oo saldhig dukumenti ahaaneed u noqon doona qaab-hawleedka hay'adaha deeqda bixiya, bulshada rayidka ah iyo Ururrada caalamiga ah si ay u meel-mariyaan kaalintooda dhinaca horumarinta. maaliiyadda marxaladda ku meel-gaarka ah waxa hore u qoon-deysay QM, taas oo waafaqsan awoodaynta qaabka dhismeedka dawladda iyo waaxyada aan dawliga ahayn ee dhinaca dhammaystirka qaab-hawleedka dib-u-dhiska iyo horumarinat iyo sidii loo taageeri lahaa dhismaha iyo taabbagalinta nabadda iyo mudnaanta kowaad ee dhinaca geeddi-socodka dib-u-heshiisiinta.

kaddib shirkii DFKMG ah iyo Beesha caalamka ee Stockholm 2004, kaas oo lagu dhisay Guddiga isku-xidhka iyo la socoshada(CMC) ee la abuuray ebruary 2005, si uu u fududeeyo, u xoojiyo, iskugu xidho islamarkaana ula socdo taageerada caalamiga ah ee lagu dhammaystirayo axdiga Federaalka ku-meel-gaarka ah iyo sidii ay taabbagalin lhaayeen hay'adaha federaalka ku-meel-gaarka ah(TFIs) . Guddiga CMC waxay shir-guddoonka la wadaagi doonaan DFKMG ah iyo QM isku-xidhka Siyaasadda iyo Barnaamijyadaba. xilka guddiga CMC waxaa aka mid ah sidii sare looguqaadi lahaa jawaab-celinta xiriirinta caalamiga ah ee dhinaca baahida muhiimka ah iyo caqabadaha hortaagan geweddi-socodka dawladda ku-meel-gaarka ah. Si kastaba ha ahaatee, xaaladda dalka Soomaaliya xilligan ku sugan yahay, mar loo eego, guddiga CMC weli k ahan mid si hufan u gudan kara waxqabadkiisa.

Mashruuca taageerada hay'adaha Soomaaliya ee UNDP ee marka la soo gaabiyo loo yaqaan(SISP)l ayaa u xilsaaran taageerada deeq-bixiyayaasha ee ku wejahan" maaliyadda dib-u-hawlgalinta caalamiga ah" taas oo awood u siinaysa hay'adaha federaalka ku-meel-gaarka ah inay ka qayb qaataan tahay Maamullada Soomaalida ee ku wejahan dhinacyad kulammada caalamiga ah iyop booqashooyinka dawladda, sidaas awgeed, DFKMG ahi waxay arrintan Mucaahado heshiis kala saxiixatay Golaha reer Yurub bishii Maarso 2006. kaddib markii uu saxiixay Guddoomiyaha Midowga urub,Jose Manuel Barroso, kaas oo u xaqiijiyey taageero niyadsami ku dheehan a "siyaasadda iyo taageerada qalabka iyo Agabka", isagoo intaas raaciyey; in Goluhu sida ugu dhaqsiyaha badan ugu boorin doono dawladaha xubnaha ka ah Midowga Yurub inay ugu deeqaan Soomaaliya 70 Milyan oo lacagta euros una dhiganta(USD 84 Milyan) , intaas waxaa sooraaca 200 milyan euros oo hore loogu dammaanad qaaday, iyadoo inteeda badan la sii marinayey hay'adaha QM.

Intaas waxaa dheer, Maaliyadda fududaynta safarrada Edgadii Soomaalida uga qaybgashay Kal-fadhigii 60-aad ee Golaha Guud ee QM ee September 2005; ka qaybgalkii Afhayeenka Barlamanka shirweynihii labaad ee caalamiga ahaa ee Afhayeennada Baarlamaannada ee New York ee dalka Maraykanka; Ergadii ka qaybgashay kulankii Waddamada Jaamacadda Carabta ee ku saabsanaa sii xoojinta xiriirka Soomaaliya iyo Dawladaha Carabta, iyadoo sidoo kale, soo jeedinta fursadaha ugu macquulsan ee lagu heli karo dhaqaale; iyo ka qaybgalkii hay'adaha Federaalka ku-meel-gaarka ah Shir-sannadeedkii 2005 ee Hay'adda Lacagta Adduunka(IMF) iyo Bangiga Adduunka.

Dhinaca heer gobol, waxay durbadiiba Dawladda FKMG ah heshiisyo arrimo la xiriira dhaqaalaha la saxiiixatay waddamada Jabuuti, Ethiopia iyo Kenya, iyadoo xubin muhiim ah ka noqotay Ururka Midowga Afrika, Urur-goboleedka Horumarinta waddamada IGAD iyo Ururka Jaamacadda Carabta. Wuxuu kaloo dalku ka qaybgalay markii ugu horreysay qaar ka kid ah kullamadda heer gobol ee arrimaha ay ka jidka yihiin; Kalluumaysiga iyo Nidaamka Digniinaha looga hortagayo tsunamis-ka.

In ka badan hal milyan oo Soomaali ah ayaa dibadaha ku dhaqan, kuwaas oo dhammaan qaaradaha adduunka ku baahsan, iyagoo qaarkood ay ka hawlgaleen Daraasaadka Baahida Wadajirka ah si loo Jaangooyo Qaab-hawleedka Horumarinta Dib-u-dhiska(RDF). Waxaana jira door muhiim ah oo ay Jaaliyadaha Soomaaliyeed ee dibadda ku dhaqani ka qaadan karaan Dib-u-dhiska, deg-deg-u-soo-kabashada iyo sidii ay heer-nololeedka Dunida ula saan-qaadi lahaayeen marxaladda dagaalka kadib.

## Bartilmaameedka 12aad:


## In la sii Horumariyo Ganacsi iyo Nidaam Lacageed oo Furan Sharci ku Dhisan, la saadaalin karo oo aan Takoorid ku Dhisnayn

### Ganacsiga iyo Nidaamka Maaliyadda

Qaybaha gaarka loo leeyahay ayay Soomaaliya ku taagnayd afar iyo tobankii sano ee lasoo dhaafay oo aysan jirin dawlad dhexe oo shaqeynaysa.[26] Ilaa intii dagaallada Sokeeye dalka ka bilowdeen, heerka hawlaha adeegga bulshda sida waxbarashada, caafimaadka, isgaarsiinta iyo adeegga lacagta qayb ahaan ama gebi ahaanba waxay ku hawlagayeen iyadoo aysan jirin golayaal nidaamsan oo ay hoos tagaan. Kobaca qaybaha gaarka ahi wuxuu la socdaa nidaamka caalamiyeynta. Qaybaha gaarka ah ayaa horumarka wada. Horumarka waxaa riixaya suuqa ee dawladi ma hoggaamiso sidii dagaalka ka hor xaalku ahaan jiray. Wax dhoofinta iyo soo dejinta Soomaaliya waxaa inta badan gacanta ku haya dad madax-bannaan. Adeegyada lacageed iyaduna waxay gacanta ugu jiirtaa shirkado madax bannaan. Marka la fiiriyo xaaladda colaadeed ee jirta, arrintani waa hanti abuurid lala dhaco oo ay sameeyeen dad karti ganacsi leh. Laakin faa'iidada koboca dhaqaaluhu si siman looma wadaago, waxaa jira farqi dhaqaale ee u dhexeeya waqooyiga iyo koofurta, magaalooyinka iyo miyiga iyo kooxaha dhaqaale-bulsho.

Soomalida waxaa 'qasab ku ah inay ka gataan adeegyda bulshada dadka madaxa-bannaan. Awoodda wax iibsiga ee dadka saboolka ahi aad ayay u hooseeysaa iyadoo Dhaqaaluhu ku jiray waqti adag iyo sicir barar ilaa intii dagaalka ahliga ahi billowday

Jaantus 8.1: Goobaha mudnaanta u ah kaalmada deeq bixiyayaasha sannadka 2003




[26]War-saxaafadeedkii UNDP
[27]Warbixinta Horumarinta Aadamiga ee UNDP

taas oo ay uga sii dartay lacagaha beenta ah ee waddanka la soo geliyay.

Lacagta ay soo xawilaan Soomaalida dibadda ku nool ayaa ah muuqaalka ugu weyn ee dhaqaalaha Soomaalidu ku dhisanyahay. Shirkadaha xawaaladuhu waa kuwa kaliya ee lacagta kasoo waarida dibadda, waana habka lacagta adagi waddanka ku soo gasho uguna baxdo. Lacagaha lasoo xawilaa waxay gacan ka geysataa ganacsiga dibadda iyo maalgashiga[27]

Marka lala barbar dhigo xajmiga ganancsiga dibada iyo xaawaaladaha, kaalmada dibadu wax yar unbay ka tartaa dhaqaalaha Soomaalida. Sanadkii 2004, hay'adahaGargaarka caalmaiga ah(ODA) wax wwaxay gacan ka gaysteen dhinaca dhaqaalaha iyagoo u fidiyay dadka kaalmo deg deg ah oo gaaraysay US$ 222 milyan,taas oo adduun garaya US$ 142 milyan lagu helay iskaashiga deeq-bixiiyayaasha,iyadoo si lixaad leh ay uga korodhay ilaa min US$99.2 milyan heerkii 2001.

Lacagta ay soo xawilaan Soomaalida dibadda ku nool ayaa lagu qiyaasaa US$ 1 billion Sannadkiiba u soo diraan Soomaalya, waana muuqaalka ugu weyn ee dhaqaalaha Soomaalidu ku dhisanyahay. Tani waa saldhigga dhaqaalaha qoysasku ay ka helaan bahiada asaasiga ah ee heer-nololeedkooda, iyadoo sidoo kale ay saamayn lixaad leh ku yeelatay ganacsiga gudaha iyo kan caalamiga ah. inkastoo ay meesha ka maqan yihiin hay'adihii maaliyadda iyo Bunuugta dalka, walow ay si lixaad leh u kordheen shirkadaha madaxa-bannaan ee lacagaha iyo xawilaadaha ka shaqeeya,kuwaas oo ay gacan ka hela shirkado gaar loo leeyahay. Sidoo kale, waxaa si weyn dalka ugu hirgalay shirkado kuwas la mid ah oo kashaqeeya dhinacyada Is-gaarsiinta, Xoolahanool iyogancsiga hilibka.

Sanadihii1990-yadii Deeq bixiyayaashu waxay meel mariyaan fikrad lagu dhiirigelinayo meelaha nabadu ka jirto iyadoo kaalmada shuruud uga dhigay in la helo nabadgelyo iyo maamul taasina waxay keentay in dhulka siyaasad ahaan xasiloon ee waqooyigu uu ka badsado kaalmada gobollada koofurta iyo bartamaha Soomaaliya.

**Bartilmaameedka 15aad:**

## In si dhamaystiran wax looga qabto dhibaatada Deymaha Wadamada soo Koraya iyadoo la Qaadayo Tallaabooyin Caalami ah iyo kuwa Qaran si ay Muddada fog Deyn ay xamili karaan ama u heli Karaan

### Soomaaliya Deynta Dibadda Looga Leeyahay


Deymaha Dibadda ee Soomaliyawaxay sare u keceen min US$ 2.4 billion xilliuii dagaallada ka horreeyey ilaa US$ 2.6 billion muddada dagallada ka dambaysay. taas oo loga golleeyahay in Soomaaliya ay ka soo kabato dib-u-dhaca, kaddibna ay lugeheeda mar kale isku taagto. Nidaamka ay dejiyaan Hay'adaha Lacagta Adduunka iyo Bangiga Adduunka ee deymaha looga fududaynayo waddamada aad u qaameysan ee saboolka ah, wuxuu u fidiyaa waddamada aad u qaamaysan ee isla markaana wada barnaamijka isbadalladda, iyadoo la qorshaynayo in si qiyas ah looga fududeeyo deymaha ama laga dhaafo guud ahaanba, sida waafaqsan hannaanka Himilooyinka Horumarinta Millenium-ka(MDG).

Intaas waxaa soo raaca, gargaarka dhinaca maaliyadda ee baaxadda leh oo loo jiheeyo horumarinta khayradka dabiiciga- Xoolaha nool, kalluumaysiga iyo beeraha iyo macdanta- iyadoo ay lagama maarmaan tahay in Soomaaliya laga cawiyo sidii ay u meelmarin lahayd hawlgalladeeda dhinaca nidaamka maaliyadda caalamiga ah.


**Santuuqa 8.1 Xaqiijinta MDGs**

Himilooyinka horumarinta Miliniyaamka waa la xaqiijin karaa waqtiga loo qabtay ee sannadka 2015, laakiin waa haddii oo kaliya ay waddamada hodanka ah iyo kuwa saboolka ahi ay fulyaan waajibaadka ay wadaagaan ee ah in la diyaariyo siyaasadaha, nidaamka maamul, iyo hantida loo baahanyahay.

Jaantus 8.3: Kaalmada waddamadu toos u bixiyaan oo doolar ah 2000 ilaa 2003(Qiyaasta Milyan Doolar)




Jaantus 8.2: Kaalmada Dibadda ee Sannadka 2002-2003 (Qiyaasta Milyan ee Doolar)



**Bartilmaameedka 16aad:**

## Iyadoo lala Kaashanayo Waddamada soo koraya, la dejiyo, lana meel mariyo Istiraatijiyado Shaqooyin fiican ee wax soo saar loogu abuurayo Dhalinyarada

### Xaaladda Shaqo ee Dhallinyarada

Dagaalka sokeeye ka hor, fursado lixaad leh ayaa ka jiray dhinacyada horumarinta xoogsatada ee waaxyaha dawladda, iyadoo ay maalgelin ka heli jirtay waddamada dibadda ee dhiirigelinayey dhinacyada mashaariicda beeraha, xoolaha iyo shaqooyin ay dhallinyaradu ka heli jiren. In la helo shaqo fiican waa xuquuq asaasi ah oo wax ka taraysa in sharafta dadka la dhawro. Xogta la hayaa waxay tilmaamaysaa in ku dhawaad kala bar dadka shaqeyn kara ay shaqo la'aan yihiin. Dadka magaalada ee shaqayn karaa, boqolayda an shaqo haysan halka kuwa miyiga iyo reer guuraaga ay shaqo la'aan yihiin.

U haajiridda dadka wax yaqaanna iyo dhallinyaradu dibadaha u haajirayaan iyagoo raadsanaya nolol dhaanta midda waddanka waxay keenaysaa maskax guur iyo in raasumaalka aqooneed guro. In badan oo ka mid ah dhallinyarada ma helin waxbarasho toos ah dagaalka iyo barakaca awgiis, taasina waxay caqabad

weyn ku tahay in loo helo dhalinyarada fursado shaqo, waxaana duruufuhu ku qasbeen intooda badan in ay shaqooyin ku meel gaar ah ka raadsadan dhaqaalaha dadban. UNICEF waxay bilowday barnaamjka lagu horumarinayo dhallinyarada laguna barayo hugaamintooda si gacan loo siiyo kooxaha dhallinyarada ee iska heehaabaya suuqyada ee aan waxba hayn iyadoo la siinayo waxbarasho aan toos ahyn si loogu diyaariyo xirfado la xariira dhaqanka, isboortiga, horumarinta dhaqaalaha, nabad dhisidda iyo xallinta khilaafaadka. Intaas waxa wehliya barnaamij ay dhallinyaradu uga qaybgalayaan warbaahinta kaas oo in ka badan 200 dhallinyaro ahi ay codkooda ka dhiibanayaan soo saaridda iyo sii daynta barnaamijyada raadiyaha iyo fiidiyaha. Ururka Shaqaalaha Adduunku (ILO) wuxuu bilaabay mashaariic shaqooyin badan abuuri kara kaabayaasha lagu horumarinayo si loo caawiyo bulshooyinka collaaddu saameysay.

Waxay kaloo abuurayaan mashaariicdu dhammaan heerarkooda hirgelinta ee fursado shaqo oo deg deg ah iyo dhaqaale ay si isla mid ah uga faa'iideysan karaan ragga iyo dumarku sida ay qeexayso warbixinta UNDP Somaliya/Bangiga Adduunka ee Sahanka Dhaqale-Bulsheedka 2002[28]. Waxaa kaloo lagu tala jiraa waxqabad dheeraad ah oo loogu sameynayo xarumaha bulshda iyo dhalinyarada tiknoolajiyada casriga ah ee macluumaadka iyo isgaarsiinta (ICT) iyadoo lala shaqeynayo shirkadaha ganacsi ee heerka dhexe iyo ururrada bulshada rayidk ah.

dhanka kale, waxa lagama maarmaan ah hub-dhigista Maliishiyooyinka, taas oo aan si sahlan loo qiimayn karin, waayo waxay astaan u tahay geeddi-socodka nabadda iyo xasiloonida dalka. dhaqan-celinta dhallinyarada iyo sidii loogu abuuri lahaa xirfadaha shaqo iyo mashaariic ay dhaqaale ka helaan. Dhallinyarada Soomaalidu waxay u bahan yihiin; abaabul-ka-saar iyo sidii loogu diyaarin lahaa dib-u-dhiska iyo hormarinta dalka ka wada qaybgalaan.

**Santuuqa 8.2 Shaqada Dhallinyarada**

In loo helo dhallinyarada shaqooyin fiican oo wax soo saar leh waxay muhiim u tahay in nabadgelyadu waarto. Waxayna siinaysaa dhalinyarada xirfado iyo fursado ka celiya inay hub qaataan, waxayna u sahlaysaa inay ka qaybgalaan dib-u-dhiska dhaqaalaha, ayna daneeyaan in nabaddu waarto.

*(Waxaa laga soo qaatay doodda caalamiga ah ee MDGs-ka ee ciwaan-keedu yahay "dhibaatooyinka haysta horumarka, xaaladda MDGs-ka ee meelaha colaadaha iyo masiibooyinku ka jiraan - 3 Luuliyo 2004)*

[28] ILO 2003 Buug-yaraha in nabadda loo adeegsado shaqaalaynta ee Soomaaliya

## Bartilmaameedka 17aad:

### In iyadoo la Kaashanayo Shirkadaha Daawada Sameeya loo Sahlo Wadamada soo Karaya inay ku Helaan Daawooyinka Daruuriga ah Qiimo ay Awoodi Karan

**Helitaanka Daawooyinka Asaasiga Ah**

Dagaalka ka hor sahayda daawada waxay badanaa ahayd kaalmo dibadeed. Hadda farmiyayaal gaar loo leeyahay ayaa inta badan daawada laga helaa. Waxaa kaloo daawooyinka imminka laga helaa hay'adaha kala ah; ICRC/SRCS,UNICEF iyo WHO. Inta badan dadka reer magaalka ah waxay ka heli karaan adeeg caafimaad masaafo u dhaxaysa 1.3 Km qiyaastii 95% ilaa 2.4 km 60% qiyaastii 60% dadka reer miyiga ah.[29]

Shaxda 8.1 Milicsiga Xaaladda Helitaanka Dawooyinka Soomaaliya)

| Halbeed | Xogta | |
|---|---|---|
| | Xogta Bilowga (1987 - 1990) | Xogtii u danbaysay (1999) |
| Dadka inta awood u leh inay si joogta ah u hesho daawooyinka daruuriga ah | Xog lama hayo | Aadu Hoosays |

*Isha:Warbixinta Horumarinta Aadamiga ee UNDP, 2003*

Maadaama dadka in ku dhaw kala bar ay ku noolyihiin saboolnimo, helidaa daawadu waxay ka mid tahay waxyaabaha laga welwelo. Farmashiyayaalku wax xukuma ama ruqso shaqo siiyaa ma jiraan. Inkastoo farmashiyayaalka gaarka loo leeyahay ay kor u qaadeen helitaanka daaweynta magaalooyinka iyo miyigiba, haddana waxay qayb ka qaateen isticmaalka ballaaran ee qaldan ee daawada la iska bixiyo iyadoon dhakhtar qorin ama qofku isagu daawo isu qoro. Waxaa kaloo jirta halis ay leedahay daawooyinka tayadaoodu liidato iyadoo aysan jirin cid si cilmiyaysan u hubisa tayada daawooyinka suuqa yaal.



UNICEF/HQ00-0512/Chalasani

[29] Sahanka Dhaqaale-Bulsho ee UNDP Soomaaliya/Bangiga Adduunka, 2002

## Bartilmaamedka 18aad:

### In iyadoo lala kaashanayo qaybaha gaarka loo leeyahay, in Faa'iidada Tiknoolajiyada casriga ah, gaar ahaan macluumaadka iyo Isgaarsiinta laga dhigo mid la heli karo

**Macluumaadka iyo Is-gaarsiinta**

Kaaabayaasha Qalabka Is-gaarsiinta(ICT) Soomaliya waa ay burburreen xilligii dagalka sokeeye iyadoo aysan dawlad dhexe dalka ka jirin. In ka badan shan iyo toban sano, oo dagaalladu sababee inay dhamman maalgelintu istaagto ama joogsto, dhamman waaxda ICT ewaxay u baahan tahay in dib-u-habayn lagu sameeyo lana kobciyo maalgelinta is-gaarsiinta iyadoo loo dejinayo siyaasad horumarineed iyo nidaam ay ku shaqeyso. si loo abuuro jawi ku habboon horumarka tiknoolajiyadu iSoomaaliya suuragl kama noqon karto in laga hergeliyo barnamij tayo leh haddii oo waafaqsan nidaamka ICT-ga la xiriirta, haddii aan gacan looga helin beesha caalamka iyo hay'adaha hawlgallada la wadaaga.

Si loo helo kaabayaasha is-gaasiinta casriga ah ee Soomaaliya ee wafaqsan baahida asasiga ah ee bulshada , lanasaan-qaadysa horumarka dunida, waxa loo baahan yahay in la dhiirigeliyo kobcinta dhaqaalaha iyo sare uqaadista heer-nololeedka dadweynaha. Is-gaasiinta casriga ahi waxay mudnan dheeraad ah u leedahay sidii aas-aas wacan loogu samayn lahaa dalka Soomaliya hannan wax soo saar tayayesan ku dhisan. Inta badan, hawlaha Tiknolojiyada casriga ah ee is-gaarsiinta Soomaliya waxay ku jiraan gacanta waaxda gaarka loo leeyahay, taas oo faa'iidada ugu weyn ay ka soo burqatay horumarka dhinaca is-gaasiinta labadaraadle,telefoonnada gacanta iyo shabakadaha iyo xarumaha Interneyada loo adeegsado. Agabka is-gaarsiinta Tiknolojiyada waxay laf-dhabar u noqotay inta badan ee adeegyada kale ee ay ka mid yihiin; duulimaadyada hawada sare, xawiklaaadaha iyo ganacsiga, kuwaas oo ah waddada ugu muhiimsan ee adeegsiga is-gaarsiinta.

Waxaa aad u sii kordhaya dareenka Dawladda Soomaliya iyo beesha caalamkuba ay hayaan sidii loo horumarin lahaa siyaasdda Tiknolojiyada is-gaarsiinta(ICT) iyo adeegsiga Aaladaha Kumbiyutarada la xiriira,iyadoo UNDP ay imminka kaalin hormuudnimo kaga jirto hindisayaasha hawlgalladaas. Hawlgallada UNDP waxay sii horuamarin doontaa sidii faham dheeraad ah looga heli lahaa dejinta hannaanka geeddi-socodka siyaasadeed ee Tiknolojiyada is-gaarsiinta( ICT), iyadoo wejiga hore ee qaab-hawleedka dib-u-dhiska, islamarkaana soo jiidan doonta maalgelin dheeraad ah oo dhinaca Tiknolojiyada carsiga. ah la xiriirta. Sanadkii 2004, UNDP Soomaliya hay'adda horumarinta hawlgallada Mashaariicda (SICAD), taas oo gacan k gaysata tababarrada shaqalaha rayidka ah, iyadoo adeegsanaysaa farsamooyinka casriga ah ee (ICT).

Shaxda 8.2 Milicsiga Xaaladda Macluumaad Helidda iyo Isgaarsiinta Soomaaliya

| Halbeed | Xogta | |
|---|---|---|
| | Xogta bilowga (1987 - 1990) | Xogtii u danbaysay (2000 - 2002) |
| Inta khad taleefan ku soo aadaysaa 1,000-kii qofba | 2 | 8.4 |
| Inta haysta taleefan gacan 1,000-kii qofba | Xog lama hayo | 14 |
| Inta kombuter ku soo aadaysaa 1,000-kii qofba | Xog lama hayo | 1.4 magaalo; 0.5 guud ahaan Soomaaliya 1,000-kii qofba |
| Isticmaalayaasha internetka | Xog lama hayo | 97.3 |

*Isha: Sahanka Dhaqaale-Bulsho ee UNDP Soomaaliya/Bangiga Adduunka, 2002, iyo Warbixinta Horumarinta Aadamiga ee UNDP 2001*

Si loo horumariyo siyaasadda guud ee Tiknolojiyada dhaqaaluhu waxay dhiirigelin iyo tayo sarrayso oo fursado shaqaalaynta la iriira u samayn doontaa bulshada. Hindisayaasha Siyaasadeed ee Tiknolojiyadda carsiga ahi, waxay kaloo soo bandhigi sdoontaa arrimaha mustaqbalka lagu tallabsano jaan-gooyo waafaqsan qaabka loo wajahyo hawlgallada xaaladdaa dagaalka kaddib, oo ay ka mid yihiin; in si cad loo qeexo hawlgallada dawladda, iskaashiga waaxda gaarka ah(PPP),dawladda, bulshada rayidka iyo aqoonyahannada. Daraasad ay samaysay hay'adda horumarinta Tiknoljiyada is-gaarsiinta ee Gobolka carbeed(ICTDAR) sannadkii 2004, ayaa tilmaamaysa in xawilaaduhu ay sedex-jibbaar-meen sannadkii 1995tii, markaas oo si baahsan loo helay adegyada xagga Telefoonnada. Waxayna mar dambe, darasaddaasi tilmaantay, inay sii kordhay ilaa 10% dadka isticmaalayey is-garsiinta, halka 18% ay korodhay dhinaca xawilaadda iyadoo ay samayn ku yeelatay xawliga is-gaarsiinta, tas oo xaqiijinaysa inay isku-xiran yihiin horumarka xawilaadaha iyo is-gaarsiintu ku tallaabsadeen, uuna horumarkooda isla saan-qaadayo.

**Jawiga Fududeynaya Qaab-hawleedyada iskaashiga Horumarinta Caalamiga ah**

Dhismihii Hay'adaha FKMG ah(TFIs) waxay ahayd tallaabo togane ah oo hore loo qaaday, kuwaas oo deegaanka u horseedaya dadaal dib-u-dhiska Soomaaliya, idayoo loo sii marayo iskaashiga waddamada iyo kan caalamiga ah.

Golaha Ganacsatada Soomaaliyeed waxay ubaahan yihiin; in la isku xidho waaxda gaarka ah iyo hawlgalladda Beesha Caalamka, iyadoo meel la iskugu keenayo mudnaanta baahida iyo caqabadaha jira sidii looga gudbi lahaa, islamarkaana lala kaashanayo beesha caalamka. Waana in golaha ay xubno ka noqdaan qoonyahanno ku xeel-dheer nidaamka maaraynta iyo xirfadaha dib-u-soo-kabashada, iyagoo ka madax-bannanaanaya faragelinta dawladdakuna fulunya hawlgalladooda qaab hufan oo la iska dhex-arki karo noockasta oo la xiriira waxqabadkooda. Ganacsatada Soomaaliyeed waxaa ay ballanqaadeen inay sameeyaan Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha iyo inay ku garab istaagaan dawladda dhisantay cod iyo ficilba kobciyaanna isku xirka gobolka iyo caalamka si kor loogu qaado maalgashiga.

**Waxqabadka**

- Waxaa la abuuray urur ay leeyhiin shirkadaha is-gaarsiinta iyo taleefannada (STA) ka shaqeeya kaas oo xiriir wada shaqeyn la sameystay UNDP iyo Ururka Isgaarsiinta Caalamiga ah si loo siiyo khibrad aqooneed oo farsamo iyo tababbaro isla markaana sharci loogu dejiya isgaarsiinta waqtiga dawlad la'aantu jirto.
- Waxaa la abuuray urur ay leeyihiin shirkadaha adeegga lacagaha iyo xawaaladuhu kaas oo haga nidaamka ay ku shaqeeyaan shirkadahoodu maa dama aysan jirin dawlad dhexe. Waxuuna ururku ballan ku galay inuu xoojiyo wada xiriirka, tababbarka iyo in shirkaduhu u hoggaansamaan sharciyada caalamiga ee xukuma lacagaha iyagoo ka wakiil ah xubnaha iyo qaybaha ay matalaan.
- Islaamka iyo fikrada walaalnimda muslinimadu waxay kaalin weyn ka qaadatay inay isku xirmaan Soomaalida, bulshada ganacsatada iyo waddamada islaamka si xiriirka ganacsiga loo ballaariyo.



UNICEF/SOM01-126/Taylor

## Caqabadaha

- Dhismaha kaabayaashu sida gaadiidka gudaha, gaadiidka badda iyo hawada iyo dekaduhu waa liitaa.
- Karti daro iyo qaab-sharciyeedka maamuka l oo liita.
- nidaam la'aan dhinaca canshuuraha iyo dakhliga, taas oo horseeday ku tiirsanaanta deeqaha dibadda.
- Ma jiro macluumad ku saabsan Suuqgaynta ganacsiga. waxayna ganacsatadu iibsadaan badeecooyin gacantii seddexaad ah halkii y toos uga gadan lahayeen soo saarayaasha, islamarkaana badeecooyinka dalka dibadddiisa loo iibgeeyo waxa la sii mariyaa dulaaliin, tas oo keenaysa in shirkadaha caymisku ay diidaan dammanadda shixnadaha ku socda aagga dhinaca Soomaaliya.
- Awood uma laha dadku inay helaan lacago ay wax ku maalgashadan., maadaama aysan jirin dammaanadda amaahda Bunuugta(LC) ee nidaamka bangiyadu aamini karaan
- Dhaqaalaha intiisa badan wuxuu ku salaysanyihiin ganacsi qoys iyo mid qof kaliya wato oo yaryar kalana firirsan. Wax soo saarka hoose iyo ganacsiga yar yar laga gudbi maayo haddii aan laga gudbin milkiyadda fardi fardiga oo aan loo gudbin qaab shirkado la wada sameysto. Ganacsiga noocaan ahi wuxuu ka hortaaganyahay dadka inay helaan xirfadaha maamul ee casriga ah ayna helaan hanti.
- Qiimaha sarifka doolarka iyo shillinku ma fadhiyo isagoo maalin gudaheed dhawr jeer is bedelaya taas oo wiiqaysa awooda wax gadashada ee qoysaska.
- Ma jiraan shaqaale xirfad leh oo tababaran.

## Talooyin


- Waa in dib-u-habayn lagu sameeyaa Nidaamka Xawilaadaha, si loo meel mariyo nidaamka ay ku shaqayn karaan.
- In la dhiso maamul ku habboon daabacaadda, ilaalinta iyo shuruucda dhaqdhaqaaqa lacagaha.
- in loo wareejiyo Lacagta Xawilaadaha hannaanka suuqa ee faa'iidooyinka badan leh ee saamayn ku yeelan kara tayada iyo tirada wax soo saarka dalka.
- Suuqyo lacag oo si fiican u shaqeeya awoodana inay abuuraan raasumaal iyagoo iibinaya saamiyada iyo waraaqaha lacagta taas oo u ogolaanaysa shirkaduhu inay ka faa'iideystaan kaydadka kumayaal qoys iyo qof.
- In la abuuro mashaariic cusub oo siin kara fursado shaqo boqolaal qof iyo in sidoo kale la abuuro mashaariic heer dhexe oo kari kara inay shaqo geliyaan tiro kale oo dheeraad ah, arrimahanina waxay u baahanyihiin in la helo maalgelin lagaga hortago keydinta lacagaha loo baahan yahay in lagu dhiirigeliyo

wax soo saarka ark ay fursaduhu saamaxaan.

- In sare loo qaado maalgashiga gaarka a iyadoo la dhiirigelinayo awoodaynta deegaanka iyo ka qaybgalinta dhinacyo kala duwan.
- In la dhiso Golaha Rugta Ganacsiga.
- In la qaabeeyo siyaasadda soo jiidan karta maalgashiga shisheeye iyo Lahaanshaha Wadajirka ah ee Shisheeyaha.
- In la sameeyo Aaladaha Daraasaadka iyo Qiimaynta.
- Hal-abuurka iyo Dhismaha awoodaynta hay'adaha.
- In la dhiso aqoon horumarineed ee dhinaca Barnaamijka xarumaha tababarrada Kombuterka.
- In dalka loo sameeyo nidaam tayeysan oo waafaqsan nidaamka adeegyada caalamiga ah ee dhinaca is-gaarsiinta.


# Lifaaqa 1:

## Natiijada Sahanka Xaaladda Nafaqo ee Soomaaliya (1999 - 2004)



# Khariiddada sida ay gabadhaha iyo wiilashu ugu kala qaybsanyihiin waxbarashada asaasiga ah gobollada sannadka 2003/2004

Khariidada: Kala duwanaanshaha Wiilasha iyo Gabdhaha D/Hoose Dhexe ee Heer Gobol




*Isha: Sahanka D/Hoose Dhexe ee UNICEF Soomaaliya, 2003/04*

Isha xogta: Waxaa laga soo qaatay UNICEF Soomaaliya

# Lifaaqa 3:

# Kartida Qaran iyo Goboleed ee la Socoshada iyo ka Warbixinta Horumarka HHM-ka

| | Himilo | Gaaridda iyo Sugnaaanta Xog Ururinta | | | Faaqidaadda iyo Shaandaynta Xogta | | | Tayada iyo Isku-Hallaynta | | | Xogta Munaasibka ah ee Siyaasad Dejinta | | | Warbixinta iyo Baahinta | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | Xooggan | Dhexdhexaad | Liidata | Xooggan | Dhexdhexaad | Liidata | Xooggan | Dhexdhexaad | Liidata | Xooggan | Dhexdhexaad | Liidata | Xooggan | Dhexdhexaad | Liidata |
| HHM1 | Saboolnimada Iyo Gaajada | | | ** | | | ** | | | ** | | | ** | | | ** |
| HHM2 | Waxabarashada Asaasiga ah oo La wada Helo | | | ** | | | ** | | | ** | | | ** | | | ** |
| HHM3 | Sinnaanta Jinsiga | | | ** | | | ** | | | ** | | | ** | | | ** |
| HHM4 | Dhimashada Carruurta | | | ** | | | ** | | | ** | | | ** | | | ** |
| HHM5 | Dhimashada Hooyada | | | ** | | | ** | | | ** | | | ** | | | ** |
| HHM6 | Biyaha iyo Fayadhawrka | | | ** | | | ** | | | ** | | | ** | | | ** |
| HHM7 | HIV/AIDS-ka | | | ** | | | ** | | | ** | | | ** | | | ** |
| HHM8 | Waaritaanka Deegaanka | | | ** | | | ** | | | ** | | | ** | | | ** |

*HHM -Himilooyinka Horumarinta Miliniyaamka*

# Eray-Bixin

**Wax akhrinta iyo qoridda dadka waaweyn**

Tirada dadka da'doodu tahay 15 sano iyo wixii ka sareeya oo kari kara iyagoo fahamsan inay qoraan akhriyaana oraaho gaagaaban oo la xariira waxa ay la kulmaan maalin waba.[1]

**Saboolnimada  xad-dhaafka ah**

Waa heerka saboolnimda ee uusan qofku baahidiisa ugu hooseysa ee nafaqo, caafimaad iyo hoy uusan helin Karin.

**Qashinka Hawada lagu sii daayo ee maadada (Carbon Dioxide)**

Qashinka hawada gala ee ka yimaad gubashada shidaalka, holoca gaaska iyo sameynta shamiitada.[2]

**Guddiga Waxbarashada Bulshada**

Guddiyo la sameeyay si ay u dhisaan, u maamulaan, u dayactiraan, lacag u aruuriyaan, macalimiin qoraan, lana socdaan horumarka waxbarashada dugsiyada.

**Saboolnimada daran**

Dakhliga qofka oo ka yar hal doolar maalintii marka lagu qiyaaso awoodda waxgadashadiisa.[3]

**Goynta Xubnaha Taranka ee Dumarka**

Waxuu ka koobanyahay hababka qaliin oo dhan oo ay ku jirto goynta qayb ama isagoo dhan kinitirka ama dhaawaca loo geysto xubnaha taranka ee dumarka sababo dhaqan oo aan shaqo ku lahayn daaweyn awgeed.  Waxaa sidoo kale loo yaqaanaa goynta xubinta dhedigga.

**Wax soo saarka guud ee  waddanka**

Isku darka wax soo saarka alaabta iyo adeega la isticmaalo ee kasoo baxa dhaqaalaha waddanka ee ay soo saaraan dadka waddanka u dhashay iyo kuwa ajnabiga ah ee deggan iyadoon loo eegin qofka qaata ama sheegta wax soo saarka.[4]

**Diiwaangelinta Guud ee Waxbarashada**

Boqolkiiba tirada ardada da'da iskuulka gaartay inta ka aada waxbarashada asaasiga ah, tan dugsiga sare iyo jaamacadda.

**Dhaqaalaha Guud ee Qaranka**

Isku darka qiimaha ay wax soo saarayasaha guduhu ku kordhiyaan dhaqaalaha waddanka oo lagu daray canshuurta la saaro alaabta (laga jaray kabidda) oo aysan ku jirin qiimaha wax soo saarka oo lagu daray dhaqaalaha bannaanka ka yimaada (mushaarka dadka dibadaha ka shaqeysta iyo hantida kale iyo maalgashiga dadka waddanku dibadda ku sameystaan).[5]

**Dakhliga Guud ee Qaranka**

Waxuu ka koobanyahay wax soo saarka waddanka gudihiisa iyo dhaqaalaha dibadda ka yimaada ee laga helo adeegga loo fidiyo wadamada dibadda, oo laga jaray waxa la siiyay dadka aan waddanka u dhalan ee wax soo saarka qayb ka qaatay.[6]

**Cabbirka Horumarka Aadamiga**

Celceliska rajada nololeed, heerka waxbarashada iyo wax soo saarka guud ee waddanka inta qofka uga soo aada.[7]

**Tirada  carruurta ka dhimata 1000-kii cunug ee nolol ku dhalata**

Qiyaasta carruurta dhimata inta aysan dhalan ama ku dhinta sannadka koowaad marka loo fiiriyo 1000-kii nolol ku dhalata.[8]

**Dadka waddanka ku barakacay**

Dadka aan meesha ay deganyhiin aan deganaan jirin ee ku barakacay waddanka gudihiisa, inta u dhexeysa gobollada, degmooyinka dhexdooda ama deegaannada isku degmada ah dhexdooda. Waxay ka yimaadaan meelo kal duwan oo Soomaaliya iyagoo raadsanaya nabad iyo xasilooni.

**Rajada Nolosha ee waqtiga dhalmada**

Tirada sanadaha dhallaanka yari ee dhasahy uu noolaanayo haddii noocyada dhimashada ee jira waqtiga uu dhashay ay sidooda sii ahaadan nolosha cunuga oo dhan.[9]

**Xaddiga Dhimashada hooyada ee 100,000 nolol ku dhalataba**

Inta sanadkii haweenka u dhinta sababo uurka la xariira marka loo eego 100,000 cunug ee nolol ku dhashaba.[10]

**Himilooyinka Horumarka Miliniyaamka**

Waxay ka koobanyihiin himilada hormurinta aadamiga kaas oo lagu muujiyo tiro bartilmaameedyo go'an oo waqti ku xiran. Waxaa ka mid ah in kala bar la dhimo saboolnimada iyo gaajada, in caalamka laga hirgeliyo waxbarashada asaasiga ah iyo ekaanshaha jinsiga, yaraynta dhimasahda dhallaanka 5 sano ka yar saddex meelood laba meelood; iyo dhimashada hooyada afar meelood saddex meelood, hakinta cudurka HIV/AIDS-ka, iyo in kala bar la dhimo dadka aan heli karin biyo nadiif ah sannadka 2015 iyadoo laga soo ambaqaadayo heerkii 1990-kii.[11]

**Tubta Saboolnimada heer Qaran**

Heer saboolnimo oo dawlada wadanka u aragto inay waddanka munaasib u tahay. Qiyaasaha qaranku waxay ku salaysanyihiin sahanka qoysaska dadka oo kooxo hoose loo sii qaybiyay.[12]

**Reer guuraaga**

Dadka ku nool guryaha la raran karo oo loo yaqaano 'aqal' oo badanaa ka baxsan magaalooyinka iyo tuulooyinka. Way kala firarsanyihiin maadama qoys kastaa u baahanyahay dhul weyn iyo biyo xoolohoodu daqaan ayna cabaan.

**Kaalmadda Dibadda**

Qiimaha guud ee macaawinooyinka iyo deymaha oo waaxyaha dawladu ku bixiyaan shuruudo fudud kaa soo ujeeddadiisu ugu weyn tahay in la kobciyo horumarka dhaqaalaha iyo daryeelka.[13]

**Xaddiga farqiga Saboolnimada**

Inta ugu yar ee ka hooseysa dakhli maamlmeedka halka doolar ee saboolnimada lagu cabbiro cabbirkani wuxuu muujinyaa qotoda iyo heerka saboolnimadu ku dhacdo.[14]

**Cabbirka awoodda wax Gadashada**

Kala duwanaashada sarifka lacagaha kaas oo keena in sicirka wadamadu ku kala duwanaadaan taas oo sahasha in wax soo saarka iyo dakhliga adduunka la is barbardhigo.[15]

**Dhulka Daaqa**

Dhulka daaqiisa dabiiciga ahi yahay cawska, alwaaxda, geed gaabta, waxana ka mid ah dhul daaqsimeedka, dhulka bannaanka, saxaraha, dhulka carada jilicsan, dhulka caws qalaylka ah.

**Nafaqa xumida (tan daran/tan dhexe)**

Bulshada sida fiican u nafaqaysan, waxaa jira heer la wada isticmaalo oo lagu cabbiro dhirirka iyo culayska ilmaha. Nafaqa yarida dadka waxa lagu cabbiraa carruurta culayskooda iyo dhirarkooda oo la is barbardhigo. Culayska iyo da'da oo la isu fiiriyo waxaa lagu cabiraa nafaqo darrada aad u daran oo xad dhaafka ah.

**Carruurta 5 sano ka yar ee dhimata 1,000-kii nolol ku dhalataba**

Suurtagalnimda inuu cunuggu ku dhinto marka uu dhasho ilaa 5 sano uu ka gaaro marka loo fiiriyo 1,000 kii nolol ku dhalataba.[16]

**Culayska yar marka loo fiiriyo da'da**

Carruurta culayskooda iyo da'dooda marka la isku cabbiro uu culayskoodu laba jeer wax ka badan ka yaryahay heerka tixraaca waxa loo tixgeliyaa inay si caadiya ama si daran uu culayskoodu u yaryahay. Kuwa culayskoodu uu ka yaryahay saddex jeer wax ka badan heerka dhexdhexaadka waxa lagu tilmaamaa in ay aad u culays yaryihiin.

# Tixraacyada

**Shaqo la'aanta**

Dhammaan dadka ka sarreeya da' cayiman kuwaas oo aan shaqo mushaar laga siiyo ka shaqeyn ama aan iyagu shaqooyin u gaar ah haysan, isla markaana diyaar u ah shaqo kuna dadaalay inay shaqo helaan ama iyagu is hawlgeliyaan.[17]


1. Warbixinta Horumarka Aadamaiga ee Soomaliya 2001. Xaafiiska Soomaaliya Qaabilsan ee UNDP, Nairobi
2. David Laiten, 1997, Luqadda iyo Siyaasadda, Xaaladda Soomaaliya, Chicago, Jariiradda Jaamacada Chigago, 1997
3. EU, 2003, Aqoon iswayadaarsi ku saabsan qaabka istiraatijiyada horumarineed, xaafiiska EU u qaabilsan Soomaaliya, warbixintii Aqoon iswaydaarsiga.
4. FAO, 2003 Xaaladda cunto yari ee Adduuna 2003, La socodka horumarka laga gaaray shirka cuntada adduunka iyo himilooyinka horumarinta
5. Dwladda Soomaaliya iyo UNDP, 2002, dokumintiga barnaamijka Deegaanka Soomaaliya
6. Mulama, G.T. 2003, Waraaq fikrad bilow ah oo ku saabsan qaabka loola socdo saboolnimada loona faaqido: Waraaq asaasi ah No.1, oo aan la faafin
7. Narbeth, S. bartilmaameedka qaybinta cuntada deg degga ee Soomaaliya, danyarnimada, dib u qaybinta iyo ka qaybgalka ka faa'ideystayaasha, Nayrobi, WFP
8. Prendville, N. 1999 Adeegga daryeelka hooyada ee Soomaaliya
9. Relief Web: Somalia 2000, war ay Wakaaladda Wararka Qaramada Midoobay (IRIN) diiradda ku saaraysay xayiraadda xoolaha Soomaaliya, war aan la faafin oo ku jira bogga internetka ee IRIN
10. SACB 2000, Hay'adda Isku Dubaridka Macaawinyooinka Soomaaliya, warbixinta deeqaha, 2000
11. SACB 2000, Hay'adda Isku Dubaridka Macaawinyooinka Soomaaliya, warbixinta deeqaha, 2000
12. SACB iyo WHO Soomaaliya, 2003. Adkaynta xakameynta qaaxadda Soomaaliya. Hindise 5 sano oo loo gudbiyay Santuuqqa Caalamiga ee la Dagaalanka HIV/AIDS-ma, Qaaxada, iyo Malaariyada, Hindise aan la faafin.
13. Koox Hawleedka Jinsiga iyo Xuquuqul insaanka ee SACB 2003, Istiraatijyadda Koox Hawleedka Jinsiga iyo Xuquuqul Insaanka ee SACB
14. SACB, UNICEF Soomaliya iyo WHO Soomaaliya. 2002. Xakameynta Qaaxada iyo Duumada inta lagu jira xaaladda qallafsan ee daran ee Soomaaliya, 2003-2005. Kor u qaadidda ka Hortagga, Ogaanshaha iyo Maareynta Xaaladda iyadoo loo marayo isla socod iyo wada shaqayn. Hindise saddex sano ah oo loo gudbiyay Santuuqqa Caalamiga h ee la Dagaalanka HIV/AIDS-ka, Qaaxada, iyo Malaariyada, Hindise aan la faafin
15. SOCDA, Warbixin ku saabsan sida uu u dhacay aqoon is waydaarsiga golaha bulshada, warbixin aan la daabicin
16. Dawladda Baqortooyada Netherland, UNAIDS iyo UNICEF. 2003. Hawlgalka Istiraatijiyadeed ee ka hortagga iyo xakameynta HIV/AIDS-ka iyo cudurrada galmoodka la isugu gudbiyo ee dadka Soomaliyeed dhexdiisa
17. UN 2002. Qorshaha Hawlgalka Wada Jira ee Qaramada Midoobay ee dib u soo kabashada Soomaaliya 2002-2003. Hawgalka Istiraatijiyadeed ee Kaalmada Somaaliya ee Qaramada Midoobay.
18. UNDP 1991. Warbixinta Horumarka Aadamiga ee Soomaliya 1991. Waxa daabacay Madbacadda Jaamacadda Oxford, New York
19. UNDP 1998. Warbixinta Horumarka Aadamiga ee Soomaliya. 1998
20. UNDP 2002. Mashruuca La socoshada Soomaaliya (Watching Brief No.1)
21. UNDP 2003. Warbixinta Horumarka Aadamiga ee Soomaliya 2003, Waxa daabacay Madbacadda Jaamacadda Oxford, New York
22. UNDP 2003. Aqoon is Waydaarsiga ku saabsan sameynta golaha yaraynta saboolnimda oo lagu qabtay Muqdisho, Soomaaliya, 29-30 September, 2003
23. UNDP iyo UNICEF 2002. Himilooyinka Horumarinta Miliniyaamka ee Afrika, Balanqaadyo iyo Horumar
24. UNDP iyo Bangiga Adduunka. 2003 Sahanka Bulsho-Dhaqaale ee Soomaaliya. Warbixinta 1aad, Mashruuca Somalia Watching Brief 2003. Xaafiiska UNDP Soomaaliya, Nayrobi
25. UNDP-da Soomaaliya. 2001. Barnaamijka Deegaanka Soomaaliya, Sameynta Warbixinta Gaaban. Warbixin aan la faafin
26. UNDP Somalia. 2002. Barnaamijka Deegaanka Soomaaliya, Warbixinta Barnaamijka.
27. UNDP 2003. Himilooyinka Horumarinta Miliniyaamka ee Wadamada Carabta: ee Sannadka 2015: Waxyaabaha lagu Guulaystay iyo waxa lagu taamayo, madabaccda Jaamacada Oxford, New york
28. UNESCO 2004. Gebi-dhaclaynta horay iyo gadaal, diiwaangelinta Dugsiyda Hoose ee Soomaaliya
29. UNESCO 2004. Gebi dhaclaynta horay iyo gadaal, diiwaangelinta Dugsiyda Hoose ee Soomaaliya
30. UNICEF 1991. Faaqidaadda xaaladda carruurta iyo haweenka ee Soomaliya.
31. UNICEF 1994. Xaaladda Carruurta Adduunka, Madbacadda Jaamacdda Oxford, New York
32. UNICEF 1997. Xaaladda Carruurta Adduunka
33. UNICEF 1999. Dadaallaada looga hortegayo HIV/AIDS-ka Somaliland. Warbixinta ku Saabsan Aqoonta loo leeyahay, Fikradda laga qabo, waxa laga Aaminsanyahay iyo

Dhaqamada HIV/AIDS-ka iyo sahan ku saabsan faaifidda Cudurrada isu-tagga la isugu gudbiyo, iyo HIV oo laga sameeyay Somaliland
34. UNICEF 2001. Sahanka halbeegayaasha badan ee koox-kooxeedka ee dhammaadka 10-ka sano: Warbixinta farsamo ee Soomaliya oo buuxda
35. UNICEF 2003. 2003/2004. Sahanka Waxbarashada Asaasiga ah ee UNICEF, warbixin aan la faafin
36. UNICEF 2003. Warbixinta Qaybta HIV/AIDS-ka Soomaaliya
37. UNICEF 2003. Xaaladda Carruurta Adduunka
38. UNICEF 2003. UNICEF Soomaaliya 2003-8 Hawlgalka IStiraatijiyadeed ee Ka hortagga iyo xakameynta Cudurka HIV/AIDSka iyo cudurrada galmoodka la isugu gudbiyo
39. UNICEF Soomaaliya 2000. Sahanka halbeegyada badan ee koox kooxeed ee UNICEF
40. UNICEF/WHO 1990. Halbeegyada sida loo deganyahay iyo caafimadka ee wadamada bariga badda midhitareeniyaanka, SACB (Oktobar, 2000) Istiraajiyadda Hawlgalka ee lagu taageerayo qaybta caafimaadka Soomaaliya, Majaladda 1.
41. Vaidyanathan K.E. 1997. Warbixinta Khabiirka Santuuqa Qaramada Midoobay ee Dadka ee ku saabsan istaatistikada dadka ee Soomaaliya
42. WHO Somalia 2002. Warbixinta Sanadlaha ee WHO ee Soomaaliya
43. WHO Somalia 2003. Warbixinta Sanadlaha ee WHO ee Soomaaliya 2003, warbixin aan la faaafin
44. Aqoon is-waydaarsi ku saabsan baahinta iyo iyo Wacyi gelinta MDGs-ka, Sahminta iyo la socoshada saboolnimada iyo warbixinta dib uga hawlgalka Soomaaliya (wadamada dhaqaalahoodu hooseeyo ee xasaraduhu ka jiraan) oo lagu qabtay Soomaaliya:

Somaliland (Waqooyi- gobolka Awdal) Borame-22da-24ta iyo 25ta-29-ka Disember 2002, Waxaa'maalgeliyay UNDP iya Bangiga Adduunka , waxaana martigeliyay Jaamacada Camuud

Somaliland (Waqooyi- gobola Waqooyi Galbeedl)- Hargeysa 23-da -30ka Disember 2002, Waxaa'maalgeliyay UNDP iya Bangiga Addunka iyadoo la kaashanaysa xaafiiska Soomaaliya ee PENHA

Somaliland ( gaboolka waqooyi- galbeed)-Hargeysa- 10-ka-11-ka Juunyo, 2003, Waxaa'maalgeliyay UNDP iya Bangiga Addunka , waxaa loo qabtay Agaasimyaasha Guud ee Maamulka Somaliland

Muqdisho ( Koonfurta Soomaaliya)-Benaadir 13-ka-15-ka April, 2003, waxaa wada sameeyay Wasaaradda qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee dawaldda Ku-meelgaarka ah iyo UNDP/Bangiga Aduunka.

Hiiran ( Bartamaha Soomaaliya)- Beletweyn 8'da-10-ka maajo 2003 waxaa iska kaashaday UNDP/Bangiga Aduunka iyo shaqaalaha goobta Xaafiiska xiriirinta Bini'aadanamida ee Qaramada middobay(OCHA) iyo WHO

Shabeellada Hoose (koofurta Soomaaliya)- Marka 17-ka -19-ka Maajo, 2003, waxaa wada abaabulay UNDP/Bangiga Aduunka iyo Ururka Horumarinta Haweenka ee (IIDA)

50. Shabeellada Dhexe (Koofurta Soomaliya) jawhar 31-da Luuliyo -2-da Agoosto, 2003 , waxaa wada abaabulay UNDP/Bangiga iyo maamulka gobolka shabeellada dhexe

Muqdisho (koonfurta Soomaaliya) 29-ka-30-ka Sitembar 2003, waxaa wada abaabulay UNDP/Bangiga iyo wasaaradda qorsheynta iyo iskaashiga caalamiga ah ee dawladda ku-meelgaarka ah

45. Warbixin qaybeedyada MDGs-ka ee Somaliland:

1. Dabargoynta saboolnimada daran iyo gaajada sida ku cad MDGs-ka: Xaaladda Somaliland, waxaa qoray C/raxmaan Maxamed
2. Heerka horumarka ee Himilooyinka Horumarinta Miliniyaamka ee waxbarashada Somaliland , waxaa qoray Prof. Suleyman A. Guuleed
3. kor u qaadida sinnaanta jinsiga iyo awood siinta haweenka, waxaa qoray Safiya Xaji Abuukar
4. "Carruurta oo dhan waxay leeyihiin isku xaquuq iyadoon la kala faquuqin', waxaa qoray Dr. Cismaaciil Adam Cabdullahi
5. Warbixin qaybeedka himilooyinka horumarinta Miliniyaamka ee hagaajinjta caafimaadka hooyada ee Somaliland, waxaa qoray Dr. Nimco X. abubakar
6. La dagaalanka HIV/AIDS-ka , duumada iyo cudurrada kale , waxaa qoray Dr. Cabdi Cismaaciil Xuseen
7. Daryeelka Deegaanka Somaliland , waxaa qoray Eng. Cali Cabdi Odowaa

46. Warbixin Qaybiyeedyada MDGs-ka Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya

1. Dabargoynta Saboolnimada daran iyo gaajada daran, waxaa qoray Jeylaani Cabdullahi cusman
2. Waxabarashada asaasiga ah ee caalamka , waxaa qoray Prof. Xuseen Toxow Faarax
3. Kor u qaadida sinnaanta jinsiga iyo awoodsiinta dumarka, waxaa diyaariyay maryam Maxamed gacal
4. yaraynta Dhimashada carruurta, waxaa qoray Xalima Shiikh Cabdi
5. Hagaajinta caafimaadka hooyada , waxaa diyaariyay Xaliima sheikh Cabdi
6. Xaalada HIV/AIDS-ka Soomaaliya, waxaa diyaariyay Dr. Cabdinasir M. Abubakar
7. Daryeelka Deegaanka , waxaa diyaariyay Jeylaani Cabdullaahi Cusmaan

47. Xarunta cilmi-barista iyo horumarinta Puntland, warbixin aan rasmi ahayn oo ku saabsan daraasadda xaaladda dhaqaalaha guud iyo mashaariicda yar yar ee dhinaca faaqidaada ee Puntland
48. Xarunta cilmi-baarista iyo wada xaajoodka -2000, warbixin aan rasmi ahayn oo ku saabsan sahanka bulsho-dhaqaale iyo faaqidaaddeeda ee koofurta iyo bartamaha Soomaaliya
49. Xarunta Nabadda iyo horumarinta-2004 Daarasadda

bulsho-dhaqaale ee Somaliland, nuqul aan rasmi ahayn
50. UNDP.2002/3 sahanka caafimaadka taranka, qomada aan rasmiga ahayn
51. Warbixinnada Golaha Ammaanka, 2002/189, s/2003/987, S/2004/604
52. Warbixinta aan rasmiga ahayn ee Golaha loo dhanyahay 22-ka Maajo 2003- 22-ka Maajo 2003
53. FASU- juunyo/Luuliyo 2004- Warbixin cusub ee Nafaqada
54. UNICEF-2002/03 sahanka waxbarashada asaasiga ah, warbixin farsamo iyo nuqulka aan rasmiga ahayn ee warbixinta 2003/4 ee sahanka waxbarashada asaasiga ah, warbixin farsamo.

Somalia

*United Nations Development Programme, Somalia*
Springette House
Spring Valley, off Kabete Road
Tel. (254-20) 4255000
Fax: (254-20) 4183641
PO Box 28832
00200 Nairobi
Email: registry.so@undp.org
Website: http://www.so.undp.org

Sawirka Hore
UNICEF/SOM03-038/Taylor